Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 12aad** | **Muqdisho, 17 AUGUST 2025** | **Lr. 2**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

## KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

## MARCH-JULY

# 2025

**SHARCI LR.38** **TAARIIKH: 11-DA MAAJO 2025**

**SHARCIGA HAY'ADAHA MAALIYADDA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0720/B11/25**, ku taariikheysan **11/05/2025**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta''Hindise Sharciyeedka Hay'adaha Maaliyadda. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan. |

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Hay'adaha Maaliyadda.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
DIRID / SENT
1 JUL 2025
BY: Faduma Mohamed Dayr Saalihi
MAGACAD ______ SAXIIX ______

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

**Madaxweynaha J. F.S.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-051-2025
TAARIIKH: 09-08-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# HINDISE-SHARCIYEEDKA SHARCIGA HAY'ADAHA MAALIYADDA

MAARSO 11, 2025

## Table of Contents

*JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA* ........ *1*

*CUTUBKA KOWAAD* ........ *2*

*QODOBBO GUUD* ........ *2*

Qodobka 1aad: ........ 2

Magaca Sharciga ........ 2

Qodobka 2aad: ........ 2

Qeexitaan ........ 2

Qodobka 3aad: ........ 13

Ujeeddooyinka Sharcigan ........ 13

Qodobka 4aad: ........ 13

Baaxadda ........ 13

*CUTUBKA LABAAD:* ........ *13*

*SHATI- SIIN* ........ *13*

Qodobka 5aad: ........ 13

Awoodda Shati- siinta ........ 13

Qodobka 6aad: ........ 13

Noocyada Shatiyada ........ 13

Qodobka 7aad: ........ 14

Mamnuucidda Ganacsi Shati La'aan ah ........ 14

Qodobka 8aad: ........ 14

Codsiga Shatiga ........ 14

Qodobka 9aad: ........ 15

Bixinta Shatiga ........ 15

Qodobka 10aad: ........ 17

Muddada Shatiga ........ 17

Qodobka 11aad: ........ 17

Diidmada Codsiga ........ 17

Qodobka 12aad: ........ 17

Soo-bandhigidda Shatiga ........ 17

Qodobka 13aad: ........ 17

Diiwaanka Hay'adaha Maaliyadda ........ 17

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 14aad: ........ 18
Awoodda Baarista Ganacsiga Sharci-darrada ah ........ 18
Qodobka 15aad: ........ 18
Xafiiska Wakiil Banki Shisheeye ........ 18
Qodobka 16aad: ........ 19
Bankiyada Islaamiga ah ........ 19
*CUTUBKA SADDEXAAD ........ 19*
*XEERARKA TAXADDARKA IYO XADDIDAADDA KU DABBAQMAYA HAY'ADAHA MAALIYADEED ........ 19*
Qodobka 17 aad: ........ 19
Shaqooyinka loo oggol yahay Bankiga ........ 19
Qodobka 18 aad: ........ 21
Raasamaalka ugu yar ee la bixinayo ........ 21
Qodobka 19 aad: ........ 21
Raasamaalka Waajibka ah ........ 21
Qodobka 20 aad: ........ 21
Hal-beegyada ku filnaanshaha raasamaalka waajibka ah ........ 21
Qodobka 21 aad: ........ 21
Shuruudaha raasamaalka waajibka ah ........ 21
Qodobka 22 aad: ........ 21
Shuruudaha hantida naqad-galka ah ........ 21
Qodobka 23 aad: ........ 22
Keydka lacagta caddaanka ah ee la dhigayo Bankiga Dhexe ........ 22
Qodobka 24 aad: ........ 22
Xaddidaadda milkiyadda saamiga ee hay'ad maaliyadeed ........ 22
Qodobka 25 aad: ........ 23
Shirkad milkiyad guud leh oo aan hawlgal ahayn ........ 23
Qodobka 26 aad: ........ 24
Shaacinta Saamileyda ........ 24
Qodobka 27 aad: ........ 24
Shuruudda iibsiga ama wareejinta saamiga muhiimka ah ee hay'ad maaliyadeed ........ 24
Qodobka 28 aad: ........ 25
Sababaha diidmada soo jeedinta kordhinta, iibsiga ama wareejinta saamiyada ........ 25
Qodobka 29 aad: ........ 25

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Shaacinta ku xad-gudubka qodobbo la xiriira saami muhiim ah ........ 25
Qodobka 30 [aad]: ........ 25
Waajibaadka kordhinta ama dhimista saamiga muhiimka ah ee hay'ad maaliyadeed ........ 25
*Qodobka 31 [aad]: ........ 25*
Qodobka 32 [aad]: ........ 26
Dhaqan-galka wareejinta, iibsiga ama midowga ........ 26
Qodobka 33 [aad]: ........ 28
Xaddidaadda Bixinta, Deymaha iyo Dammaanadaha ........ 28
Qodobka 34 [aad]: ........ 28
Xaddidaadaha Bixinta Faa'iidada Saamiyada ........ 28
Qodobka 35 [aad]: ........ 29
Xadiddaadda wax kala iibsiga ka dhexeeya hay'ad maaliyadeed iyo dhinac xiriir la leh ........ 29
Qodobka 36 [aad]: ........ 29
Xaddidaadda u Isticmaalka Saamiyada Rahan ahaan ........ 29
Qodobka 37 [aad]: ........ 30
Xaddidaadda Maal- gashiga ........ 30
Qodobka 38 [aad] ........ 30
Xaddidaadda Dhaqdhaqaaqyada Ganacsiga iyo Iibsashada Hantida Ma Guurtada Ah ........ 30
Qodobka 39 [aad]: ........ 31
Xaddidaadaha lacag-dhigashada u dhexaysa bankiyada ........ 31
Qodobka 40 [aad]: ........ 31
Xeerarka Taxaddarka iyo Hagayaasha ........ 31
Qodobka 41 [aad]: ........ 31
Hannaanka maareynta khataraha ........ 31
Qodobka 42 [aad]: ........ 32
Kala soocidda deynta iyo ka soo kabashadeeda ........ 32
*CUTUBKA AFARAAD ........ 32*
*MAAMULKA ........ 32*
Qodobka 43 [aad]: ........ 32
Waajibaadka saamilayda ........ 32
Qodobka 44 [aad]: ........ 33
Guddiga Maamulka Sare ........ 33
Qodobka 45 [aad]: ........ 33
Masuuliyadaha Guddiga Maamulka Sare ........ 33

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 46 aad:.................................................................................................... 34
Xilkasnimada laga rabo xubnaha .................................................................................... 34
Qodobka 47 aad:.................................................................................................... 35
Guddi-hoosaadyada Guddiga Maamulka Sare ........................................................................ 35
Qodobka 48 aad:.................................................................................................... 35
Kulammada Guddiga Maamulka Sare.................................................................................... 35
Qodobka 49 aad:.................................................................................................... 36
War-bixinta waajibka ah ee guddiga maamulka sare iyo fulinta ....................................... 36
Qodobka 50 aad:.................................................................................................... 36
Shaacinta bah-wadaagta iyo danaha ................................................................................ 36
Qodobka 51 aad:.................................................................................................... 37
Mas'uuliyadaha xubnaha maamulka fulinta ee hay'ad ........................................................ 37
maaliyadeed .......................................................................................................... 37
Qodobka 52 aad:.................................................................................................... 38
Mamnuucidda Jagooyinka Badan........................................................................................ 38
Qodobka 53 aad:.................................................................................................... 38
Ceeb-ka-saliimnimada guddiga maamulka sare, maamulka fulinta iyo saamilayda muhiimka
.......................................................................................................................... 38
Qodobka 54 aad:.................................................................................................... 39
Dib-u-baarista guddiga maamulka sare, maamulka fulinta iyo saamilayda muhiimka ah ..... 39
*Qodobka 55aad:* .................................................................................................. *40*
*CUTUBKA SHANAAD* ............................................................................................... *40*
*XISAABAADKA, SHAACINTA WARBIXINNADA MAALIYADEED IYO HANTI- DHAWRKA DIBADDDA* ................................................................................................. *40*
Qodobka 57 aad:.................................................................................................... 40
Waajibaadka ilaalinta xisaabaadka .................................................................................. 40
Qodobka 58 aad:.................................................................................................... 41
Soo gudbinta iyo shaacinta warbixin maaliyadeedka hay'adda maaliyadeed ....................... 41
Qodobka 59 aad:.................................................................................................... 42
Daabacaadda warbixinta sannadlaha ah............................................................................ 42
Qodobka 60 aad:.................................................................................................... 42
Xisaabinta wadajirta ee hay'ad maaliyadeed iyo shirkado hoos- yimaadda ......................... 42
Qodobka 61 aad:.................................................................................................... 43
Magacaabidda, xil ka qaadista iyo muddada xil- haynta hanti- dhawraha dibadda ............... 43

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 62 aad: ........ 45

Ku-wargelinta beddelidda hanti-dhawrka ee Bankiga Dhexe ........ 45

Qodobka 63 aad: ........ 45

Waajibka kalsooni-siinta hanti-dhawrka ........ 45

Qodobka 64 aad: ........ 45

Xayiraadda ka dhanka ah hanti-dhawrka dibadda ........ 45

Qodobka 65 aad: ........ 46

Hanti-dhawraha Gudaha ........ 46

*CUTUBKA LIXAAD* ........ 47

*KORMEERKA BANGIGA DHEXE EE HAY'ADAHA MAALIYADDA* ........ 47

Qodobka 66 aad: ........ 47

Awoodaha Kormeerka ee Bankiga Dhexe ........ 47

Qodobka 67 aad: ........ 48

Baaritaanka Rugta ........ 48

Qodobka 68 aad: ........ 48

Kormeer Wadajir ah ........ 48

Qodobka 69 aad: ........ 49

Kormeerka Shirkadaha Hoos-yimaada Shirkadda Milkiyadda Guud leh, Laamaha iyo Xafiisyada Wakiillada ee Hay'adaha Maaliyadda Soomaaliyeed ee laga Hirgeliyey Dal Shisheeye ........ 49

Qodobka 70 aad: ........ 50

Baaritaannada Gudaha Soomaaliya ee Hay'adda Kormeerka ee Waddan Shisheeye ........ 50

Qodobka 71 aad: ........ 50

Warbixinta Baaritaanka ........ 50

Qodobka 72 aad: ........ 51

Warbixinada Bankiga Dhexe ........ 51

Qodobka 73 aad: ........ 52

Daabacaadda Xaaladda Maaliyadeed ee Hay'adda Maaliyadda ........ 52

Qodobka 74 aad: ........ 52

Wada-shaqayn iyo Iskaashi ........ 52

Qodobka 75 aad: ........ 53

Tallaabo Sixitaan oo Degdeg ah ........ 53

Qodobka 76 aad: ........ 54

Awoodda Bankiga Dhexe ee Talasiinta iyo Jihaynta ........ 54



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 77 aad: ........ 56

Awoodaha Bankiga Dhexe ee Joojinta Shaqooyinka Hay'ad Maaliyadeed ........ 56

Qodobka 78 aad: ........ 56

Nidaamka Caymiska Dhigaalka ........ 56

*CUTUBKA TODDOBAAD ........ 57*

*TALLAABOOYINKA MAAMULKA IYO GANAAXYADA ........ 57*

Qodobka 79 aad: ........ 57

Ganaaxyada ka Dhanka ah Day'ad Maaliyadeed ........ 57

Qodobka 80 aad: ........ 59

Sababaha kala noqoshada shatiga ........ 59

*Qodobka 81 aad: ........ 60*

Qodobka 82 aad: ........ 60

Xayiraadaha ka Dhanka ah Xubnaha Guddiga Maamulka Sare, Maamulka Fulinta iyo Shaqaalaha ........ 60

Qodobka 83 aad: ........ 61

Ganaaxyada Lacageed ........ 61

*CUTUBKA SIDDEEDAAD ........ 62*

*QORSHAYAASHA SOO-KA-BASHADA EE HAY'ADAHA MAALIYADDA ........ 62*

Qodobka 84 aad: ........ 62

Soo-gudbinta qorshaha soo kabashada ........ 62

Qodobka 85 aad: ........ 62

Nuxurka qorshaha soo kabashada ........ 62

Qodobka 86 aad: ........ 63

Sababaha magacaabista maamule gaar ah ........ 63

Qodobka 87 aad: Awoodaha maamulaha gaarka ah ........ 64

Qodobka 88 aad: ........ 66

Maaraynta hay'ad maaliyadeed ee maamule gaar ah ........ 66

Qodobka 89 aad: ........ 66

Waajibaadka maamulaha gaarka ah ee soo kabashada hay'ad maaliyadeed ........ 66

Qodobka 90 aad: ........ 67

Qaababka dib u soo kabashada hay'ad maaliyadeed ........ 67

Qodobka 91 aad: ........ 68

Raadsashada khubaro ........ 68

Qodobka 92 aad: ........ 68


JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Mushaharka maamulaha gaarka ah iyo khubarrada ........ 68

Qodobka 93 aad: ........ 68

Dhammaystirka waajibaadka maamulaha gaarka ah ........ 68

Qodobka 94 aad: ........ 69

Iskaashiga hawlaha soo kabashada ........ 69

*CUTUBKA SAGAALAAD ........ 69*

*XARAASH ........ 69*

Qodobka 95 aad: ........ 69

Xaraash ikhtiyaari ah ........ 69

Qodobka 96 aad: ........ 70

Qorshaha xaraashka ikhtiyaariga ah ........ 70

Qodobka 97 aad: ........ 70

Meelaynta iyo bixinta Qaan-sheegashada ........ 70

Qodobka 98 aad: ........ 71

Dhammaystirka xaraashka ikhtiyaariga ah ........ 71

Qodobka 99 aad: ........ 71

Sababaha xaraashka khasabka ah ........ 71

Qodobka 100 aad: ........ 72

Hay'adda mas'uulka ah xaraashka khasabka ah ........ 72

Qodobka 101 aad: ........ 73

Faafinta go'aanka xaraashka khasabka ah ........ 73

Qodobka 102 aad: Saamaynta magacaabista xaraashaha ........ 73

Qodobka 103 aad: ........ 74

Awoodaha xaraashaha ........ 74

Qodobka 104 aad: ........ 76

Gudbinta Qaan-sheegashooyinka ........ 76

Qodobka 105 aad: ........ 77

Lacag-siinta dhigtayaasha iyo deyn-bixiyayaasha kale ........ 77

Qodobka 106 aad: ........ 77

Luminta u-qalmitaanka hawlaha maamul ee hay'ad maaliyadeed ........ 77

Qodobka 107 aad: ........ 77

Guddiga maamulka sare waa inay bixiyaan deymaha hay'adaha maaliyadeed ........ 77

Qodobka 108 aad: ........ 78

Muddada uu xaraashku soconayo iyo ka warbixinteeda ........ 78

Qodobka 109 aad: ........ 78
Haynta iyo hubinta buugaagta xisaabaadka ee xaraashaha ........ 78
Qodobka 110 aad: ........ 78
Fasixidda xaraashaha ........ 78
Qodobka 111 aad: ........ 79
Habka xaraashka kala- duwan ........ 79
*CUTUBKA TOBANAAD* ........ *79*
*QODOBBO CIQAABEED* ........ *79*
Qodobka 112 aad: ........ 79
Dembiyada ........ 79
*CUTUBKA KOW IYO TOBONAAD* ........ *83*
*QODOBBO KMA-DAMBEYS AH* ........ *83*
Qodobka 113 aad: ........ 83
Furitaanka, raridda, iyo xiritaanka rugaha ganacsiga ........ 83
Qodobka 114 aad: ........ 84
Isticmaalka tignoolajiyadda marka ganacsiga la fulinayo ........ 84
Qodobka 115 aad: ........ 84
Xadididda faa'iidada laga soo ceshanayo Maalgalinta bixintoodu daahday ........ 84
Qodobka 116 aad: ........ 85
Faragelinta celceliska faa'idada ........ 85
Qodobka 117 aad: ........ 86
Gelitaanka nidaamyada onlaynka ah ........ 86
Qodobka 118 aad: ........ 86
Xasaanadda ........ 86
Qodoboka 119 aad: ........ 86
Shaqo-u-xilsaarasho ........ 86
Qodobka 120 aad: ........ 87
Isticmaalka wakiillada ........ 87
Qodobka 121 aad: ........ 87
Diiwaannada iyo keydka ........ 87
Qodobka 122 aad: ........ 88
U hoggaansanaanta ka hortagga lacag-dhaqidda iyo la- dagaallanka maal-gelinta argagixisada ........ 88
Qodobka 123 aad: ........ 89

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Tartanka furan ........ 89

Qodobka 124 aad: ........ 89

Xaddidaadda isticmaalka ereyga "banki" ........ 89

Qodobka 125 aad: ........ 90

Koontooyinka fadhiidka ah ........ 90

Qodobka 126 aad: ........ 91

Lacagaha laga tagey ........ 91

Qodobka 127 aad: ........ 91

Sir-qarin ........ 91

Qodobka 128 aad: ........ 92

Ilaalinta macaamiisha ........ 92

Qodobka 129 aad: ........ 92

Xayeysiiska marin-habaabinta lacag-dhigashada ........ 92

Qodobka 130 aad: ........ 93

Dokumentiyada elektaroonigga ah, isgaarsiinta iyo macluumaadka ........ 93

Qodobka 131 aad: ........ 94

Habka xallinta cabashooyinka ........ 94

Qodobka 132 aad: ........ 94

Xalliyaha cabashooyinka ........ 94

Qodobka 133 aad: ........ 94

Warbixin-siinta Bankiga Dhexe ........ 94

Qodobka 134 aad: ........ 95

Wadaagga macluumaadka amaahda ........ 95

Qodobka 135 aad: ........ 95

Isku- xiranka ........ 95

Qodobka 136 aad: Hal-abuur ........ 96

Qodobka 137 aad: ........ 96

Fasaxa bankiga ........ 96

Qodobka 138 aad: ........ 97

Ururka hay'adaha maaliyadeed ........ 97

Qodobka 139 aad: ........ 97

Xiriirka Shuruucda kale ........ 97

Qodobka 140 aad: ........ 98

Qoraallada farsamada ........ 98

Qodobka 141 aad: ........ 98
Soo saarista wareegtooyinka iyo habraacyada ........ 98
Qodobka 142 aad: ........ 98
Xeer- nidaamiyayaasha ........ 98
Qodobka 143 aad: ........ 99
Qodobada dhaqangalka ku meel-gaarka ah ........ 99
Qodobka 144 aad: ........ 100
Baabi'in ........ 100
Qodobka 145aad: ........ 100
Dhaqan-gal ........ 100

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## CUTUBKA KOWAAD
## QODOBBO GUUD
### Qodobka 1aad:
### Magaca Sharciga

"Sharcigan waxaa lagu magacaabaa "Sharciga Hay'adaha Maaliyadda".

### Qodobka 2aad:
### Qeexitaan

Sharcigan gudihiisa haddii aan si kale loogu qeexin, ereyada soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa macnaha ku hor qoran:

**"Xiriirka la leh"** waxaa loola jeedaa - marka loo eego hay'ad maaliyadeed - shirkad hoos timaadda hay'ad maaliyadeed ama shirkad ay hay'adda maaliyadeed hoos timaaddo ama shirkad ay si guud u wada hoos yimaaddaan hay'adda maaliyadeed;

**"Raasamaal la qoondeeyay"** marka loo eego banki ka yagleelan meel ka baxsan Soomaaliya oo laan ama shirkad hoos timaadda ku leh gudaha Soomaaliya, waxaa loola jeedaa raasamaal maaliyadeed oo loo qoondeeyay laantaas, iyo lacagaha kale ee uu sidaas u tixgeliyo Bankiga Dhexe;

**"Bah-wadaag"**

a) marka loo eego shirkad ama shirkado waxaa loola jeedaa:

i. shirkadda milkiyadda guud leh ama shirkaddeeda hoos timaadda;

ii. shirkadda hoos timaadda shirkadda milkiyadda guud leh;

iii. shirkadda leh milkiyadda guud shirkadda hoos timaadda;

iv. shirkadda milkiyadda guud leh ee aan u hawlgelayn sida shirkad hoos timaadda;

v. shirkad hoos timaadda shirkadda aan hawlgalka ahayn ee milkiyadda leh.

vi. Shirkad bah-wadaag la ah shirkadda milkiiyaddeeda leh oo aan hawlgal ahayn

vii. Shakhsi kasta oo si keligiis ah ama si wadaag ah gacanta ugu haya shirkad ama midowga shirkado ama bah- wadaagtooda marka loo eego shakhsi ahaan, waxaa loola

jeedaa -1

viii. xubin kasta oo qoyskiisa ah;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

ix. shirkad kasta ama shirkado kasta oo kale oo uu u maamulo si toos ah ama si dadban, isagoo keligii ah ama isaga iyo shurakadiisa; iyo

b) Qofkana waxa loo aqoonsanayaa inuu yahay xubin qoyska ah haddii uu yahay waalid, lammaane, walaal, ilmo, adeer, abti, eeddo, habaryar, ilmo waalid loo yahay (walaalku ama walaashu dhashay), aayo, adeer (hooyada qaba), ilmo waalid loo yahay (waalidkiis la qabo ama wax qaba), ilmaha uu korsaday/kafaalo-qaaday (sifo sharci ah lagu kafaalo-qaaday balse uusan jirin xiriir dhiig oo kala dhexeeya) qofka ay khusayso iyo haddii uu jiro ilmo la kafaalo-qaaday, labada waalid ee kafaalo-qaaday.

**"Banki"** waxaa loola jeedaa shirkad haysata shati ay ku qaban karto shaqo banki balse uusan ku jirin Bankiga Dhexe;

**"Ganacsiga bankiyada"** waxaa loola jeedaa ganacsiga:

- ka guddooma xubnaha dadweynaha lacag dhigaal ah oo ay dib ula bixi karaan marka ay rabaan ama dhammaadka muddo go'an ama ogeysiis ka dib;
- ka guddooma xubnaha dadweynaha lacag dhigaal ah iyo kala-bixid koontada socota (Current Account), aqbalaadda jeegagga; iyo furidda koontada maalgalinta (Investment Account)
- Ka shaqaysiiya lacagta lagu hayo bankiga ama koontada Socota, ama lacag kasta oo kale, iyadoo lagu bixinayo maalgalin ama qaab kasta oo kale oo aan Shareecada kahor-imanaynin, iyadoo masuuliyadda khatartuna ay saaran tahay sida hishiiska labada-dhinac uu qeexayo;

**"Kooxda Bankiyada"** waxaa loola jeedaa hay'ad maaliyadeed oo shati leh iyo shirkadaha hoos yimaadda, shirkadaha milkiyadda guud leh ee aan hawlgalka ahayn iyo shirkadaha hoos yimaadda shirkadaheeda milkiyadda guud leh ee aan hawlgalka ahayn;

**"Buug"** waxaa loola jeedaa diiwaan kasta, dokumenti ama diiwaan kale oo macluumaad iyo diiwaanka xisaabaadka, si kastaba ha loo ururiyee, oo la diiwaan-geliyay ama la keydiyay, ha ahaato qoraal, foom daabacan, muuqaal, habka elektaroonigga ah ama si kale;

**" Hantiilaha Haa'idada"** waxaa loola jeedaa shakhsiga -

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

- maamula adeeg-bixiyaha maaliyadeed ama shakhsiyad sharci ama isfahan; ama
- leh ama maamula macmiilka ama qofka wax kala iibsiga loo samaynayo iyo marka laba qof ama in ka badan ay wadaagaan lahaanshaha saamiyo isku shirkad ah, qof kastana uu noqdaa milkiile faa'iido ku leh tirada wadarta guud ee saamiyada shirkadda;

**"Guddiga Maamulka Sare"** waxaa loola jeedaa guddiga maamulka sare ee hay'ad maaliyadeed;

**"Laan"** waxaa loola jeedaa xarun kasta oo joogto ah oo aan ahayn xafiiskeeda guud, isla markaasna ay hay'adda maaliyadeed ku qabsato hawlaheeda gaancsiga ee gudaha ama dibadda Soomaaliya ;

**"Banki aan lahayn faracyo"** waxaa loola jeedaa adeegyadaa bankiga ama adeegyada hay'adaha maaliyadeed ee ay hay'ad maaliyadeed bixiso iyadoo aysan jirin dhisme xarun-laameed oo muuq ahaan u jira;

**"Xarun-maaliyadeed Bulsho"** waxaa loola jeedaa adeegyada xarun loo sameeyay in qaaraan rukumasho ah lagaga ururiyo xubnaha, ama sanduuq lacag horumaris ah laga siiyo xubnaha;

**"Ganacsiga Xarun-maaliyadeed Bulsho"** waxaa loola jeedaa:
- ganacsiga xubnaha laga ururiyo lacag rukumasho, ama sanduuqa lacago horumaris ah laga siiyo xubnaha; iyo
- arrimaha kale ee lagu qeexo Xeer-nidaamiyayaasha;

**"Raasamaal"** waxaa loola jeedaa raasamaal saamiyeed la bixiyay, ama haddii ay tahay hay'ad maaliyadeed oo lagu yagleelay meel ka baxsan Soomaaliya, raasamaalkeeda loo qoondeeyay;

**"Bankiga Dhexe"** waxaa loola jeedaa Bankiga Dhexe ee Soomaaliya oo lagu aasaasay Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya;

**"Shirkad"** waxaa loola jeedaa -

- shirkad kasta oo lagu qeexay sharci qoran oo la xiriira shirkadaha oo wakhtigan dhaqan-gal ah, iyo shirkad kasta oo lagu yagleelay

  sama ku diiwaan-gashan sharci qoran oo dhaqan-gal ka ah Soomaaliya waxaana ka mid ah; shirkad kasta, ha ahaato mid lagu yagleelay, lagu sameeyay ama lagu aasaasay meel ka baxsan Soomaaliya; iyo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

- hay'ad kasta oo lagu sifeeyay hay'ad maaliyadeed oo hoos timaadda sharcigan;

**"Macmiil"** waxaa loola jeedaa –

- cid kasta ama qof kasta oo isticmaala, isticmaalay ama laga yaabo inuu ku fikiro isticmaalka si toos ah ama si dadban mid ka mid ah alaabta ama adeegyada ay bixiso hay'ad maaliyadeed; iyo
- macmiilka hay'ad maaliyadeed;

**"Xakameyn"** waxaa loola jeedaa –

(a) Awood u lahaanshaha inuu, si toos ah ama si dadban, u saameeyo dhismaha xubnaha guddiga maamulka sare ee shirkad ama shirkado;
(b) haysashada, si toos ah ama si dadban, shakhsi ahaan ama iyadoo loo marayo shirkad milkiyad guud leh ama shirkado hoos yimaadda, ama si kaleba, wadarta guud ee boqolkiiba labaatan (%20) ama ka badan ee awoodda cod-bixinta ee shirkad ama shirkado, keligiis ha ahaado ama ha weheliyaan shuraako ama la-hawlgalayaasha kale ee shirkadda ama shirkadaha; ama
(c) iyadoo loo eegayo go'aaminta Bankiga Dhexe, marka qofku uu awood u leeyahay inuu saamayn weyn ku yeesho maamulka ama siyaasadda shirkad ama shirkado ku salaysan heshiis ama hab kasta oo kale, iyadoo aan loo eegin qaddarka lahaanshaha rasmiga ah, ama xuquuqda cod-bixinta;

**"Raasamaalka Asaasiga ah"** waxaa loola jeedaa saamileyda joogtada ah ee la soo saaray iyo saamiyada guud ee si buuxda loo bixiyay, ama xaaladda bankiyada lagu yagleelay dhul shisheeye, raasamaalka loo qoondeeyey, oo lagu daray dhammaan keydadka la shaaciyay, lagana jaray hantida aan la taaban karin;

**"Amaah"** macnaheedu waa ballan kasta oo lagu bixinayo qaddar lacag ah oo aan dulsaar lahayn ama kharashyada kale ee kadhalanaya qaddarkaas, sida dammaanad kasta oo la bixiyo, ama xuquuq kale oo lagu bixinayo qaddar lacag ah oon dulsaar lahayn;

**"Maalgalin"** macnaheedu waa bixinta lacag horudhac ah, ama heshiis qaab-kasta u dhexmara macaamilka iyo haya'ada maaliyadeed oo lagu sameeyay si waafaqsan Shareecada Islaamka, kaas oo ka mid ah heshiis iib ama iibsasho iyo bixinta dammaanadeeda, heshiis shuraako, ama heshiis kale oo maalgelin

ah;

**"Hay'adda Tixraaca Amaahda"** waxaa loola jeedaa hay'ad si gaar ah ugu xilsaaran ururinta, isku-dhafka, isu-geynta iyo iibinta xogta halbeegga amaah-celinta ee shakhsiyaadka iyo shirkadaha;

**"Ganacsiga Hay'adda Tixraaca Amaahda"** waxaa loola jeedaa –

a) Ganacsiga ururinta, isku-xirka, isu-geynta iyo faafinta xogta halbeegga amaah-celinta ee shakhsiyaadka iyo shirkadaha; iyo
b) Hawlaha kale ee uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer-nidaamiyayaal;

**"Koontada Socota"** waxa loola jeedaa koonto uu bankigu ku hayo magaca, ama magaca uu u qoondeeyay macmiilka bankiga, kaas oo lacag lagu bixiyo ama faa'iido ugu jirto macmiilkaas, iyo jeegagga, kambiyaalaha, xawilaadaha iyo dhaqdhaqaaqyada kale ee bankiyeed ee lagu sameeyo amarka macmiilka:

**"Lacag-dhigasho"** macnaheedu waa lacag la aqbalo ama la bixiyo si waafaqsan Shareecada

1. oo ku saleysan shuruudo aan dulsaar lahayn oo lagu soo celin doono codsiga macmilka ama waqti dambe ama xaalado lagu heshiiyay; ama
2. lacag-dhigasho maalgalin, macmilka dhigtay hay'ada maaliyadeed ayadoo ujeedadu tahay in laqaybsado faa'ido iyo khasaaro; iyo
3. aan la xiriirin bixinta hantida ama adeegyada hoos yimaadda qandaraaska maalgalinta iibka, kiraynta, ama amniga dhigaalka fulinta qandaraaska maalgalinta; iyo tixraac kasta oo ku jira sharcigan oo la xiriira qaadashada ama samaynta lacag-dhigasho waa in loo macneeyaa si tan waafaqsan;

**"Ganacsiga Maal-gelinta Horumarka"** waxaa loola jeedaa –

a) Ganacsiga bixiya raasamaal halis badan geli kara oo la xiriira mashaariicda horumarinta dhaqaale ee aan macaash-doonka ahayn;

   iyo
b) Hawlaha kale ee uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer-nidaamiyayaal;

**"Madaxa"** waxaa loola jeedaa qof kasta oo haya jagada agaasinka shirkadda magac kasta ha loogu yeero e, waxaana ka mid ah qofka guddiga maamulka sare ay siiyeen awoodda ah inuu ku-sime noqdo haddii agaasimuhu awoodi waayo tegitaanka kulammada;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

**"Keydadka la shaaciyey"** waxaa loola jeedaa dhammaan keydka lagu abuuray ama lagu kordhiyay saami-kororka, faa'idada la hayo (ka dib marka laga jaro dhammaan kharashyada, lacagta dhitada ah ee loo dhigay si loogu daboolo karashaadka ama dhacdooyinka maaliyadeed ee mustaqbalka dhici kara, canshuuraha iyo faa'iida- qeybsiga sannadlaha ah) iyo keydka guud, haddii keydka la shaaciyay uu yahay mid joogto ah oo saafi ah sidaas awgeedna awood u leh inuu daboolo khasaaraha;

**"Urur"** waxaa loola jeedaa shirkad, shirkado, hay'ad kheyri ah, iskaashato, xarun- maaliyadeed bulsho, sanduuq, urur ama qof kasta oo kale;

**"Khatarta maaliyadeed"** waxaa ku jira adeega maalgalinta, deymaha, hormarrinnada, lacag la-bixidda xad-dhaafka ah, haysashada waraaqaha iyo sidoo kale ballan-qaadyada xaanshida xisaabxirka ka baxsan sida aqbalaadaha, dammaanadaha, caymiska, saxiixyada, iibinta saamiyada, warqadda ballan-qaadka bixinta, damiin-ka- noqoshada heshiiska, iyo deymaha kale ee mustaqbalka iman kara;

**"Hay'ad maaliyadeed"** waxaa loola jeedaa shirkad shati u haysata inay ka waddo ama ka fuliso ganacsiga hay'adaha maaliyadeed gudaha dalka Soomaaliya, waxaana ka mid ah banki, bankiga maalgelimaha yar-yar, shirkadda maalgelinta dhismayaasha, xafiiska sarifka lacagaha qalaad, xawaaladaha; hay'adda tixraaca amaahda; xarun maaliyadeed-bulsho, iskaashatooyinka kaydinta iyo amaahda (SACCO), bankiga kaydka xafiiska boostada, adeeg-bixiyaha kiraynta raasamaalka, adeeg-bixiyaha hafto-ku-gadashada, hay'ad maalgelin oo horumarin ama hay'ad kasta oo Xeer-nidaamiyayaasha Bankiga Dhexe ku qeexaan inay tahay hay'ad maaliyadeed si waafaqsan Shareecada Islaamka;

**"Ganacsiga Hay'adaha Maaliyadeed"** waxaa loola jeedaa –

a. ganacsiga bankiyada;
b. ganacsiga hay'adaha maal-gelineed ee yar-yar;
c. ganacsiga xafiiska sarifka lacagaha qalaad;
d. ganacsiga maal-gelinta dhismayaasha;
e. ganacsiga lacag dirista;
f. ganacsiga xafiiska tixraaca amaahda;
g. ganacsiga xarun-maaaliyadeed bulsho;
h. ganacsiga iskaashatada keydinta iyo amaahda (SACCO);
i. ganacsiga kireynta raasamaalka;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

j. ganacsiga haftada;
k. ganacsiga maal-gelinta horumarka; iyo
l. ganacsiyada kale ee uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer- nidaamiyayaal;

**" Ganacsiga Kireynta Raasamaalka"** waxaa loola jeedaa –

a) ganacsiga maal-gelinta hanti la kireeyay oo uu kireystuhu ku siiyo kiro milkiilaha ama cidda maal-gelinaysa, marka ay dhammaato amminta kirada, kiraystuhu wuxuu leeyahay ikhtiyaar uu ku yeelan karo hantida; iyo
b) hawlaha kale ee uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer-nidaamiyayaal;

**"Warbixinnada Maaliyadeed"** waxaa loola jeedaa xaashida xisaab-xirka, xaashida dakhliga, xaashida susunta caddaanka iyo lifaaqyada bayaannada xisaabaadka;

**"Qof Ceeb-ka-saliim ah"** waxa loola jeedaa qof fiyow sida lagu go'aamiyey shuruudaha ku xusan Xeer-nidaamiyayaasha Bankiga Dhexe;

**"Banki Shisheeye"** waxaa loola jeedaa banki lagu yagleelay meel ka baxsan Soomaaliya oo si sharci ah shati loogu siisay inuu ka fuliyo ganacsi banki gudaha dalka iyadoo ay kor-joogteynayso hay'adda u xilsaaran kormeerka bankiyada;

**"Xafiiska Sarrifka Lacagaha Qalaad"** waxaa loola jeedaa shirkad uu Bankiga Dhexe siiyay shati ay ku qaban karto ganacsiga sarrifka lacagaha qalaad;

**"Ganacsiga Sarrifka Lacagaha Qalaad"** waxaa loola jeedaa ganacsiga

a. iibsashada iyo iibinta lacagaha qalaad,
b. adeegyada xawilaadda; iyo
c. hawlaha kale ee uu Bankiga Dhexe jaangoyn karo;

**"Koox"** waxaa loola jeedaa shirkadaha milkiyadda guud leh ee aan hawlgalka ahayn, shirkadaha hoos yimaadda iyo dhammaan shirkadaha la xiriira shirkadda milkiyadda leh iyo shirkadaha hoos yimaadda;

**"Ganacsiga Haftada"** waxaa loola jeedaa –

a) Ganacsiga uu gatuhu siiyo lacag horumaris ah milkiilaha hantida oo uu la wareego milkiyadda iyo isticmaalka hantida, ka dibna uu haraaga qiimaha iyo faa'idada qayb-qayb u bixiyo, marka uu si buuxda u bixiyo qiimahana uu la wareego gebi ahaan milkiyadda hantida.
b) maal-gelinta gadashada kirada; iyo

c) hawlaha kale ee uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer-nidaamiyayaal;

**“Hay'ad Kormeer oo maxalli ah”** waxaa loola jeedaa hay’adda kormeerka ee dalka hooyo, halkaas oo uu ku yaal xafiiska xarunta dhexe ee shirkadda milkiyadda leh;

**"Shakhsi"** waxaa loola jeedaa qof caadi ah;

**“Daneeye Gudeed”** waxaa loola jeedaa agaasime ama qof leh awood fulineed ama saamile hay’ad maaliyadeed oo uu ku jiro qof kasta oo xiriir la leh iyo dan kasta oo khusaysa qofkaas;

**" Musallafid"** waxaa loola jeedaa xaalad uu adeeg-bixiyaha maaliyadeed –

a) awoodi waayo inuu bixiyo deymaha marka ammintii bixinta la gaaro;
b) leeyahay hanti aan ku filnayn inay daboolaan deymaha; ama
c) leeyahay raasamaal waajib ah oo ka hooseeya inta ugu yar ee loo qoondeeyay;

**“Banki Islaami ah”** waxaa loola jeedaa ganacsi banki oo u shaqeeya si waafaqsan Shareecada

**"Khatar Maaliyadeed Weyn"** waxaa loola jeedaa deyn ay qof ama koox dad ah ku leedahay hay'ad maaliyadeed, taas oo u bandhigan halis daran, si waafaqsan qeexidda Bankiga Dhexe ee Xeer- nidaamiyayaasha;

**“Shati”** waxaa loola jeedaa shati uu Bankiga Dhexe ku bixiyay si waafaqsan sharcigan;

**“Maal-gashiga Aqlabiyadda”** waxaa loola jeedaa milkiyadda ay hay’ad maaliyadeed ku leedahay shirkad ugu yaraan boqolkiiba toban (%10) raasamaalka hay’adda ama saami ka badan boqolkiiba toban

(%10) raasamaalka waajibka ah ee hay’adda maaliyadeed;

**"Xubnaha”** Dadweynaha" waxaa loola jeedaa shakhsiyaadka, shuraakada, hay'adaha, maamulayaasha hay'adaha kheyriga ah, hawlgabka, iyo lacagaha hawlgabka ama lacagaha kale ee la midka ah;

**"Maamule"** waxaa loola jeedaa maamule sare oo hay'ad maaliyadeed, kaasoo awood u leh inuu xakameeyo, jiheeyo ama saameyn ku yeesho, go'aan gaarista arrin la xiriirta ganacsiga hay'adaha maaliyadeed;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

**"Bankiga Maal-gelimaha Yar-yar"** waxaa loola jeedaa shirkad shati u haysata inay sii waddo, qabato, gasho ama ka baayac-mushtarto ganacsiga maal-gelimaha yar-yar ee Soomaaliya.

**"Ganacsiga hay'adaha maalgelimaha yar-yar"** macneheedu waa ganacsiga aan aqbalayn lacag dhigashada iyo amaah aan dulsaar lahayn iyo maalgalinta muddada gaaban shirkadaha yar-yar iyo qoysaska dakhligoodu hooseeyo, badanaana waxaa astaan u ah isticmaalka beddelka curaarta, sida dammaanad kooxeedyada;

**"Wasiir"** waxaa loola jeedaa Wasiirka Maaliyadda;

**"Ganacsiga Xawilaadda Lacagta"** waxaa loola jeedaa-

a) ganacsiga qabashada lacag caddaan ah, jeegag, habab kale oo lacageed ama wax kale oo qiimo leh iyo siinta lacag caddaan ah ama foom kale oo u dhigma macmiilka loo diraha ah, iyadoo la adeegsanayo isgaarsiin, farriin, wareejin loona marayo shabakad hufan; iyo
b) hawlaha kale ee uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer-nidaamiyayaal;

**"Lacag-dhaqid"** waxaa loola jeedaa beddelka ama wareejinta hanti kasta oo ay ku jirto lacag, iyadoo la ogyahay inay ka timid fal-dembiyeed, ujeeddaduna tahay qarinta ama daboolidda asalkeeda sharci- darrada ah ama ku caawinta qof kasta oo ku lug leh fal- dembiyeedka inuu ka baxsado cawaaqibka sharci ee falalkeeda; ama la wareegidda, haysashada ama isticmaalka hantida iyadoo la ogyahay wakhtiga la helayo inay ka timid fal- dembiyeed;

**"ganacsiga maalgelinta dhismayaasha"**

a) Macnaheedu waa ganacsiga maalgelinta dhismaha iyo iibka guryaha deegaanka ah ama kuwa ganacsiga; iyo
b) waxaa ka mid ah hawlaha kale ee uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer-nidaamiyayaal;

**"Shirkadda Milkiyadda Guud leh ee aan Hawlgalka ahayn"** waxaa loola jeedaa shirkad, aan ahayn hay'adda maaliyadeed, taasoo oggolaatay inay maamusho hay'ad maaliyadeed, oo hawlaheeda ay ku kooban yihiin maal-gelinta shirkadaha hoos yimaadda, haynta hantida ay isticmaalaan xubnaha kooxdu; ururinta lacagaha lagu maal-geliyo ama lagu taageero shirkadaha hoos yimaadda,

ururinta lacag ay ku qabtaan hawlahooda xaddidan, maal-gelinta iyadoo kooxda metalaysa qabashada waxqabadyada looga baahan yahay hawlahooda xaddidan, iyo bixinta adeegyada maamulka, maareynta khatarta iyo maaliyadda si ay u taageeraan taabbagalnimada shaqada kooxda;

**"Maamulka Fulinta"** marka loo eego hay'ad maaliyadeed, waxaa loola jeedaa agaasime ama qof kale, magaca uu doono ha lahaado, kaasoo fuliya ama awood u leh inuu fuliyo hawlo la xiriira jiheynta guud ee hay'addaas maaliyadeed ama ka qeyb-qaata maamulkeeda guud;

**"Qof"** waxaa loola jeedaa shaqsi kasta, wakiil gaar ah, shirkad, shuraako, hay'ad kheyri, sanduuq, mu'asaso ama ganacsi meel kasta oo uu ku yaal ama lagu sameeyay;

**"Rug Ganacsi"** waxaa loola jeedaa dhisme, oo ay ku jiraan xafiiska guud, laan, laan-hoosaad, unug suuq-geyneed, xarunta iibka, unug guurguura, dhisme wakiil, dhismaha qolo saddexaad ama dhismayaal kale ee uu Bankiga Dhexe aqoonsado, oo ah hay'ad maaliyadeed oo baayac- mushtar ku hawlan, dadweynahana u furan;

**"Hay'ad Dadweyne"** waxaa loola jeedaa Dawlad, Degmo ama Hay'ad Dawladeed oo uu go'aamiyay Wasiirku inay tahay hay'ad dadweyne iyadoo la tixraacayo sharcigan;

**"Raasamaal Waajib ah",** iyo qaybaheeda, sida uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer- nidaamiyayaal;

**" Xigto"** marka loo eego hay'ad maaliyadeed, waxaa loola jeedaa -

a) qofka dan weyn ka leh hay'adda maaliyadeed ama hay'adda ay dan ka leedahay qofka;
b) agaasime ama maamul sare oo ka tirsan hay'adda maaliyadda ama shirkado oo gacanta ku haya hay'adda maaliyadeed;
c) lammaanaha, ilmaha, waalidka ama asalka iyo faraca qofka lagu sheegay xarfaha (a) iyo (b);
d) hay'ad uu gacanta ku hayo qof lagu tilmaamay xarfaha (a) ilaa (c); ama
e) qof ama dabaqad dad ah oo uu Bankiga Dhexe ku magacaabay daneeye isaga oo u aanaynaya dan hore, mid hadda ah, ama xiriir uu la leeyahay hay'adda maaliyadeed oo ah mid si maangal ah loo filayo inuu saamayn ugu yeesho go'aan-gaaris kasta oo ku aaddan dhaqdhaqaaqa ganacsi ee hay'adda maaliyadeed;

**"Iskaashatooyinka Keydinta iyo Deymaha (SACCO)"** waxaa loola jeedaa hay'ad maaliyadeed oo ganacsigeeda ugu muhiimsan uu yahay inay dhiirri- geliso horumarka xubnaheeda iyo inay xubnaheeda u abuurto il amaah;

"Ganacsiga "Iskaashatooyinka kaydka iyo deymaha (SACCO)" –

a. Macnaheedu waa ganacsiga hawshiisa ugu muhiimsani ay tahay in lagu dhiirrigaliyo horumarka xubnihiisa iyo inuu ilo maalgalin u abuuro xubnihiisa; iyo
b. waxaa ka mid ah hawlaha kale ee uu Bankiga Dhexe ku ku qeexo Xeer-nidaamiyayaal;

**"Maamulka Fulinta"** waxaa loola jeedaa qofka maamula ama gacanta ku haya hay'ad maaliyadeed oo sharcigan uu shati siiyay, waxaana ka mid ah-

a) madaxa fulinta Maamulka, ku-xigeenka madaxa fulinta Maamulka, madaxa hawlgelinta maamulka, madaxa maaliyadda maamulka, xoghayaha guddiga maamulka, khasnajiga, madaxa hanti-dhawrka gudaha, ama maareeyaha qeyb muhiim ah oo ka mid ah hay'ad maaliyadeed oo sharcigani shati siiyay;
b) qof haya jago ama leh mas'uuliyad la mid ah sida qofka lagu tilmaamay faqradda (a);

**"Saamile Muhiim ah"** waxaa loola jeedaa qof, aan ahayn dawladda ama hay'ad dadweyne, oo leh, si toos ah ama si dadban, faa'ido maaliyadeed oo ah boqolkiiba shan (%5) ama ka badan saamiga raasamaal ee hay'ad maaliyadeed ama shirkad raadinaysa inay noqoto hay'ad maaliyadeed;

**"Raasamaalka Kaabista"** waxaa loola jeedaa dhito guud oo loo dhigay in lagu daboolo khasaaraha aan weli la aqoonsan ee mustaqbalka dhici kara, iyo dheeriga dib-u-qiimeynta dhismayaasha ganacsi ee ka soo baxa qiimeyn madax-bannaan oo dhismayaashaas lagu sameeyo, iyo nooc kasta oo kale oo raasamaal ah, sida hadba markaaas Bankiga Dhexe go'aamiyo;

**"Raasamaalka Guud"** waxaa loola jeedaa wadarta guud ee raasamaalka iyo raasamaalka kaabista;

**"Wadarta Lacagta taal"** waxaa loola jeedaa wadarta lacagta dhigaalka, ee gudaha ama dibadda Soomaaliya, dhigaal kasta oo ay qabato hay'ad maaliyadeed oo dib loo bixinayo marka la dalbado ama ka dib muddo go'an ama ogeysiis ka dib;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

**"Dhimmanaan Raasamaal"** waxaa loola jeedaa hay'ad maaliyadeed oo aan si buuxda ugu hoggaansamin shuruudaha raasamaalka ee ku xusan sharcigan ama Xeer-nidaamiyayaasha.

**Qodobka 3aad:**
**Ujeeddooyinka Sharcigan**

Ujeeddooyinka sharcigani waa-

a) in qaab-dhismeed loo sameeyo shati-bixinta, nidaaminta iyo kor- joogtaynta hay'adaha maaliyadda; iyo

b) in la dejiyo halbeegyo iyo xeerar ka-hortag oo ay hay'adaha maaliyadeed u hoggaansamaan si loo horumariyo loona ilaaliyo nidaam maaliyadeed oo ammaan ah, xasilloon oo sugan kuna saleesan Shareecada Islaamka.

**Qodobka 4aad:**
**Baaxadda**

Sharcigan waxaa lagu dabbaqayaa dhammaan hay'adaha maaliyadeed ee lagu tilmaamay sharcigan iyo hay'adaha kale ee maaliyadeed ee uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer-nidaamiyayaal.

## CUTUBKA LABAAD:
## SHATI- SIIN

**Qodobka 5aad:**
**Awoodda Shati- siinta**

Awoodda shati-siinta, nidaaminta iyo kormeerista hay'adaha maaliyadda waxaa leh Bankiga Dhexe.

**Qodobka 6aad:**
**Noocyada Shatiyada**

1) Shatiyada waxaa loo kala saarayaa sida soo socota:
   a) shatiga ganacsiga bankiyada;

b) shatiga ganacsiga ee hay'adaha maal-gelinnada yar-yar;
c) shatiga ganacsiga ee xafiiska sarrifka lacagaha qalaad;
d) shatiga ganacsiga ee maal-gelinta dhismayaasha;
e) shatiga ganacsiga xawaaladaha;
f) shatiga ganacsiga ee hay'adaha tixraaca amaahda;
g) shatiga ganacsiga xarun-maaaliyadeed bulsho;
h) shatiga ganacsiga ee iskaashatooyinka keydinta iyo deymaha (SACCO);
i) shatiga ganacsiga kireynta raasamaalka;
j) shatiga ganacsiga haftada;
k) shatiga ganacsiga ee maal-gelinta horumarka; iyo
l) nooc kasta oo kale ee uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer- nidaamiyayaal.

2) Qofka waxaa la siin karaa hal ama in ka badan oo shatiyo ah, marka la eego codsiga ku habboon ee uu Bankiga Dhexe u soo gudbiyo iyo markuu buuxiyo shuruudaha loo dejiyay shati kasta.
3) Hay'adda maaliyadeed waa inay qabato oo keliya ganacsiga ama ganacsiyada ku qeexan shatiga la siiyay.
4) Shatiga waa la beddeli karaa si loogu daro ama looga saaro qeybo shaqooyinka shatiga ka mid ah.
5) Bankiga Dhexe wuxuu soo saarayaa Xeer-nidaamiyayaal u gaar ah oo lagu nidaaminayo mid kasta oo ka mid ah qeybaha ganacsi ee lagu sheegay faqradda (1) ee qodobkan.

## Qodobka 7aad:
## Mamnuucidda Ganacsi Shati La'aan ah

Qofna ma qaban karo ganacsiga hay'adaha maaliyadeed isagoo aan shati ka haysan Bankiga Dhexe.

## Qodobka 8aad:
## Codsiga Shatiga

1) Qof kasta oo doonaya inuu sameeyo ganacsi hay'ad maaliyadeed waa inuu Bankiga Dhexe ka codsado shati.
2) Codsiga waa in lagu sameeyaa foomka loogu talagalay oo ay la socdaan dokumentiyada, macluumaadka, khidmadda codsiga iyo khidmadda shatiga si



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

waafaqsan sida Bankiga Dhexe uu ku qeexo Xeer-nidaamiyayaal.

3) Codsigu waa inuu qeexaa nooca shatiga la codsaday.
4) Hay'adda maaliyadeed ee shisheeye ee codsata inay shati u hesho laan ama shirkad hoos timaadda, marka laga yimaaddo macluumaadka looga baahan yahay faqradda (2), codsadaha shisheeye waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda:
   a) codsadaha shisheeye waa inuu shati hay'ad maaliyadeed ka haysto dalkiisa;
   b) Codsadaha shisheeye waa inuu dhigaa qoondadii raasamaal ee loogu talagalay hawlihiisa ganacsi ee Soomaaliya, qoondadaas raasamaal marna lagama saari karo gudaha Soomaaliya;
   c) Codsadaha shisheeye waa inuu caddeyn diidmo-la'aan ka haysto kormeeraha dalkiisa;
   d) kormeeraha dalka codsadaha shisheeye waa inuu sameeyaa kormeer koobaya dhammaan laamaha codsadaha;
   e) Codsadaha shisheeye waa inuu keeno caddeynta oggolaanshaha kormeeraha dalkiisa ee la-wadaagga macluumaadka iyo la-shaqaynta Bankiga Dhexe; iyo
   f) shuruudaha kale sida uu Bankiga Dhexe soo saaro.

5) Bankiga Dhexe ayaa dejinaya shuruudaha shati-siinta hay'adaha maaliyadeed, kuwaas oo shuruudo kala duwan ku xiraya noocyada kala duwan ee ganacsiyada hay'adaha maaliyadeed.

## Qodobka 9$^{aad}$:
## Bixinta Shatiga

1) Marka la helo codsiga shatiga, Bankiga Dhexe wuxuu hubinayaa codsiga, haddii ay jiraan macluumaad ka maqan codsiga, wuxuu ogeysiinayaa codsadaha kana dalbanayaa macluumaadka dheeraadka ee loo baahan yahay.
2) Marka uu codsaduhu soo gudbiyo codsi dhammeystiran, Bankiga Dhexe ayaa ka baaraandegaya codsiga isaga ayaana go'aan ka gaaraya.
3) Bankiga Dhexe wuxuu siinayaa shati codsadaha haddii uu ku qanco arrimaha soo socda-
   a) dhammeystirnaanta iyo ansaxnimada dokumentiyada iyo macluumaadka loo soo gudbiyay;
   b) codsaduhu inuu haysto raasamaalkii loo baahnaa inuu bixiyo, ilaha raasumaalkuna ay yihiin kuwo sharci ah oo hufan;
   c) saamilayda codsaduhu inay leeyihiin tab iyo tabar ku filan oo ay ku bixiyaan raasamaal dheeraad ah, marka loo baahdo;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
الجمهورية الفيدرالية الصومال
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ
AQALKA SARE

d) aqoonta, kartida iyo waayo-aragnimada xubnaha la soo jeediyay ee guddiga maamulka sare iyo xubnaha maamulka fulinta ee codsadha inay shaqada xiriir la leeyihiin, iyo in dhammaan shakhsiyaadkaasi ay yihiin kuwo waxgal ah si waafaqsan shuruudihii loo dejiyay;

e) guddiga maamulka sare in uu leeyahay aqoon wanaagsan oo wadajir ah oo ku saabsan hawlaha muhiimka ah ee codsaduhu doonayo inuu fuliyo iyo khataraha ku gedaaman;

f) milkiyadda iyo qaab-dhismeedka maamulka codsadaha-

   i) waa inuu u daah-furan yahay si ku filan oo suurta-gelin karta taxaddar iyo kormeer wadajir ah oo wax-ku-ool ah; iyo

   ii) inuusan hor is-taagi doonin hirgelinta tallaabooyinka sixitaan ee mustaqbalka;

g) saamilayda ku leh saami muhiim ah codsadaha oo ay ku jiraan milkiilayaasha kama-danbeysta ah ee faa'idada leh inay yihiin kuwo habboon oo lagu kalsoonaan karo, si loo hubiyo in codsaduhu uusan ku lug lahayn lacag-dhaqid, maal-gelin argagixiso ama falal- dembiyeedyo kale;

h) oddoroska ku saabsan xaaladda maaliyadeed ee codsadaha inay muujinayaan ififaale maaliyadeed oo quman oo lagu hirgelin karo ganacsiga la cayimay ee hay'adda maaliyadeed;

i) nidaam habboon oo maamul shirkadeed, maareynta khatarta iyo

j) halbeegyada dhawrista gudaha ah, oo ay ku jiraan kuwa la xiriira

k) ogaanshaha iyo ka-hortagga fal-dembiyeedka, iyo sidoo kale kor- joogtaynta hawlaha la soo jeediyay in qolo saddexaad loo xilsaaran doono;

l) qaab-dhismeedka, shaqada, siyaasadaha iyo sidoo kale halbeegyada dhawrista gudaha ee codsadaha inay ku habboon yihiin hawlaha ama ganacsiga la filayo; iyo

m) Shuruudaha kale ee lagu qeexay Xeer-nidaamiyayaasha.

4) Bankiga Dhexe waa inuu ku caddeeyaa shatiga nooca ganacsiga ee lagu bixiyay.

5) Shatiga waxaa lagu bixin karaa shuruud ama shuruud la'aan, shuruudahana wax waa laga beddeli karaa sida uu go'aamiyo Bankiga Dhexe ama codsi ka yimid hay'ad maaliyadeed ka dib.

6) Bankiga Dhexe waa inuu, afar iyo toban maalmood gudahood, laga bilaabo taariikhda shatiga la soo saaray ku daabaco Faafinta Rasmiga ah ama mareegtiisa, magaca hay'adda maaliyadeed ee shatiga leh, nooca shatiga iyo taariikhda shatiga.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

7) Bankiga Dhexe shati ma siinayo banki qalfoof ahaan u jira (shell bank).

## Qodobka 10aad:
## Muddada Shatiga

Shatiga lagu bixiyay sharcigan wuxuu ansax ahaanayaa muddada lagu qeexi doono Xeer-nidaamiyayaasha.

## Qodobka 11aad:
## Diidmada Codsiga

1) Haddii codsaduhu uusan buuxin dhammaan shuruudaha shatiga ama xogta uu soo gudbiyay ay kala dhimmanaato, Bankiga Dhexe wuxuu diidayaa codsiga, go'aanka diidmada oo ay weheliyaan sababaha loo diidayna waxaa la gaarsiinayaa codsadaha toban maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda go'aanka.
2) Codsadaha codsigiisa la diiday wuxuu racfaan u qaadan karaa Bankiga Dhexe si dib-u-eegis loogu sameeyo codsigiisa.
3) Racfaanka loo qaatay Bankiga Dhexe sida ku cad faqradda (2), Bankiga Dhexe wuxuu dhisayaa koox maamulayaal sare ah oo aan ka qeyb-qaadan qiimayntii codsiga shati-siinta, si loo go'aamiyo racfaanka.
4) Habraaca la xiriira diidmada codsiga waxaa lagu qeexayaa Xeer-nidaamiye.

## Qodobka 12aad:
## Soo-bandhigidda Shatiga

Hay'adda maaliyadeed waa inay had iyo jeer ku soo bandhigtaa nuqulka shatiga meel laga arki karo oo gudaha goobteeda ganacsiga ka mid ah.

## Qodobka 13aad:
## Diiwaanka Hay'adaha Maaliyadda

1) Bankiga Dhexe wuxuu mar kasta diyaarinayaa, haynayaana diiwaanka dhammaan hay'adaha maaliyadeed ee shatiga haysta iyo xafiisyada wakiillada hay'adaha maaliyadda ee shisheeye.
2) Diiwaanka lagu sheegay faqradda (1) ee qodobkan, waa in lagu daabacaa mareegta Bankiga Dhexe iyo habkii kale ee Bankigu go'aamiyo.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 14aad:
## Awoodda Baarista Ganacsiga Sharci-darrada ah

1) Marka uu Bankiga Dhexe si maangal ah uga shakiyo in qofku uu ku hawlan yahay ganacsi hay'ad maaliyadeed oo aan shati haysan si waafaqsan sharcigan, Bankiga Dhexe isagoo maraya hay'adaha sharci fulinta-
   a) Wuxuu gelayaa dhisme kasta isagoo samaynaya baaritaan;
   b) Wuxuu baarayaa dokumenti kasta, macluumaad, diiwaan, nidaamka kombiyuutarada ama shay kasta oo kale oo khuseeya baaritaanka;
   c) Wuxuu qaadanayaa dukumeenti kasta, nuqulkiisa asalka ah ama koobiga ah; iyo shay kasta oo kale oo loogu baahan karo baaritaanno dheeraad ah;
   d) Wuxuu ka codsanayaa qof kasta inuu soo saaro dukumeenti, xog, diiwaan, ama shay kasta oo kale oo qofka baarista wada u baahan karo;
   e) Wuxuu waraysi la xiriira xog kasta oo ganacsiga ku saabsan la yeelan karaa qof kasta;
2) Wuxuu farayaa qofka ganacsiga samaynaya inuu isla markiiba joojiyo sii wadidda ganacsiga si ku-meel-gaar ah ilaa inta baaritaannada la dhammeystirayo ama si kama-dambays ah; iyo Wuxuu qaadayaa tallaabo kasta oo kale oo lagama-maarmaan ah si uu u sii wado baaritaanka.Bankiga Dhexe, halkii uu baaris ku sameyn lahaa arrin qodobkan hoos imanaysa,

   wuxuu arrinta u gudbin karaa hay'ad sharci-fulineed si ay baaris iyo tallaabo ku habboon uga qaaddo.

## Qodobka 15aad:
## Xafiiska Wakiil Banki Shisheeye

1) Bankiga Dhexe wuxuu u oggolaanayaa banki shisheeye inuu xafiis wakiil ka ah ka sameysto Soomaaliya.
2) Bankiga Dhexe wuxuu Xeer-nidaamiyayaal ku qeexayaa shuruudaha oggolaansho-siinta, hawlgelinta iyo warbixin-siinta ee xafiiska wakiilka bankiga shisheeye ama hay'adaha maaliyadeed ee kale ee shisheeye.
3) Xafiiska wakiilku ma samyn karo wax ganacsi ah ama hawl kasta oo u baahan shati si waafaqsan sharcigan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 16aad:
## Bankiyada Islaamiga ah

1) Bangi kasta oo shati kuqaata xeerkan waa inuu ganacsigiisu waafaqsanyahay Shareecada Islaamka.
2) Bankigii doonaya inuu sameeyo ganacsi banki Islaami ah waa in uu oggolaansho ka helo Bankiga Dhexe.
3) Bankiga Dhexe waxa uu Xeer-nidaamiyayaal ku qeexayaa qaabka ay bankiyada Islaamiga ah iyo ganacsiga kale ee hay'adaha maaliyadeed ugu hawlgeli karaan si waafaqsan Shareecada Islaamka.
4) Ganacsi kasta oo hay'ad maaliyadeed oo lagu sameeyo si waafaqsan Mabaadi'da Shareecada Islaamka waa inay u hoggaansamaan qodobbada Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyayaashiisa, haddii aysan Xeer- nidaamiyayaashu si kale go'aamin.

# CUTUBKA SADDEXAAD
# XEERARKA TAXADDARKA IYO XADDIDAADDA KU DABBAQMAYA HAY'ADAHA MAALIYADEED

## Qodobka 17 aad:
## Shaqooyinka loo oggol yahay Bankiga

1) Bankigu wuxuu qaban karaa shaqooyinka soo socda:
a) qabashada dhigaalka;
b) bixinta deynta, haddii ay dammaanad leedahay iyo haddii kaleba;
c) kireynta raasamaalka;
d) wakiil ka noqoshada lacagta Soomaaliya iyo lacagaha qalaad;
e) sarrifka lacagaha qalaad;
f) bixinta adeegyada lacag-dirista;
g) bixinta iyo maamulidda kaararka lacag-bixinta, deynta ama kuwa lacag-dhigashada, jeegagga, ballan-qaadyada lacag- bixineed iyo, iyadoo lala kaashanayo adeeg-bixiyeyaasha, hawlgelinta nidaamyada kaararka lacag-bixinta, deynta iyo kuwa lacag- dhigashada;

h) u dhaqmidda sidii dammaanad-bixiye, fuliye ama maamule hanti dad kale;
i) dillaalidda lacagta;
j) u dhaqmidda sidii wakiil maaliyadeed;
k) adeegyada tixraaca amaahda;
l) adeegyada ilaalinta iyo keydinta; iyo maamulka alaabta qaaliga ah, oo ay ku jiraan shahaadooyinka maal-gashiyada;
m) bixinta adeegyada bankiyada ganacsiga, oo ay ku jiraan qaabaynta iyo dammaanad-siinta saamiyada, maal-gelinta ganacsiga, maal- gelinta shirkadaha iyo bixinta talo maaliyadeed;
n) iibsashada iyo gadashada saamiyada iyaga oo ka wakiil ah macaamiisha
o) maamulka iyo talo ka bixinta maal-gashiyada;
p) talabixin ku saabsan qaab-dhismeedka raasamaalka, istaraatiijiyadda warshadaha, iyo su'aalaha iyo talada la xiriirta, iyo sidoo kale adeegyada la xiriira isku-biirista iyo iibsashada ganacsiyada;
q) wakiil ka noqoshada maal-gashiyada macaamiisha;
r) bixinta adeegyo banki oo aan laan lahayn;
s) bixinta dammaanad-qaadka iyo ballan-qaadyada;
t) maal-gelinta horumarka;
u) maal-gelinta dhismaha guryaha;
v) gelitaanka heshiisyada hafto-ku-gadashada;
w) ka ganacsiga koontadiisa gaarka ah ee hawlaha maamulka khasnadda
x) ka ganacsiga koonto u gaar ah ama koontooyinka macaamiisha:
y) agabyada suuqa lacagta sida jeegagga, biilasha, iyo shahaadooyinka lacag-dhigashada;
z) sarifka lacagaha qalaad;
aa)heshiisyada maaliyadeed ee ka ganacsiga saamiyada mustaqbalka;
bb) agabyadaa sarifka iyo faa'iidada;
cc) maal-gashiyo la wareejin karo; iyo
dd) hawl kasta oo kale si waafaqsan qeexitaanka ama ansixinta Bankiga Dhexe.

2) Bankiga Dhexe wuxuu xeer-nidaamiye ku qeexayaa hawlaha loo oggol yahay hay'adaha kale ee maaliyadeed.
3) Hay'ad maaliyadeed waxay ku lug yeelan kartaa iyadoo u dhex- maraysa shirkad hoos timaadda samaynta ganacsiga caymiska ama ka qeyb-qaadashada arrimaha dammaanadda saamiyada iyo bixinta adeegyada la xiriira hawlahan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 18 aad:
## Raasamaalka ugu yar ee la bixinayo

1) Bankiga Dhexe, ayaa xeer-nidaamiye ku qeexaya raasamaalka ugu yar ee ay tahay inay bixiyaan hay'adaha maaliyadeed.
2) Bankiga Dhexe isagoo raacaya xeer-nidaamiyayaasha wuxuu marmarka qaar kordhin karaa raasamaalka ugu yar ee ay tahay in la bixiyo, wuxuuna dammaanad dhigaal ku soo rogi karaa hay'adaha maaliyadeed.

## Qodobka 19 aad:
## Raasamaalka Waajibka ah

Bankiga Dhexe waxuu xeer-nidaamiye ku qeexayaa qaabka uu noqonayo raasamaalka waajibka ah ee hay'adaha maaliyadda.

## Qodobka 20 aad:
## Hal-beegyada ku filnaanshaha raasamaalka waajibka ah

1. Hay'adda maaliyadeed waa inay ilaalisaa halbeegga shuruud ahaan looga baahan yahay inay buuxiso si waafaqsan qaddarka raasamaalkeeda, sida uu Bankiga Dhexe ku qeexo xeer-nidaamiyeyaasha, si keligeed ah ama si wadajir ah.
2. Bankiga Dhexe wuxuu hay'ad maaliyadeed uga baahan karaa, si keligeed ah ama si wadajir ah, joogtaynta hal-beeg sare oo la jaanqaadaya raasamaalkeeda, taasi oo ku xirnaan doonta heerka khatarta maaliyadeed ee ay waajahayso.

## Qodobka 21 aad:
## Shuruudaha raasamaalka waajibka ah

Bankiga Dhexe soo rogi karaa, isagoo digreeto soo saaraya ama isaga oo u maraya xeer-nidaamiyeyaal, shuruudaha raasamaalka waajibka ah oo ku salaysan khatarta gaarka ah ee ay waajahayso hay'adda maaliyadeed.

## Qodobka 22 aad:
## Shuruudaha hantida naqad-galka ah

1) Hay'adda maaliyadeed waa in ay buuxisaa, si keligeed ah ama si wadajir ah, waajibaadka hantideeda, deymaaheeda, iyo masuuliyadaha ka baxsan xaanshida xisaab-xirka si ay u awooddo in ay u gudato waajibaadkeeda maaliyadeed marka

ammintooda la gaaro.

2) Hay'adda maaliyadeed waa inay keydisaa, si keligeed ah ama si wadajir ah, hanti naqad-gal ah oo ku filan si ay si habsami leh ugu gudato waajibaadkeeda maaliyadeed wakhtiga ku habboon, marka ammintooda la gaaro.
3) Bankiga Dhexe wuxuu xeer-nidaamiyeyaal ku soo saari karaa xaddiga hantida naqad-galka ah ee ay tahay inuu haysto Banki ama Hay'ad kasta oo kale oo maaliyadeed, waxaa kale oo xeer-nidaamiyeyaashu caddayn doonaan xaddiga ugu yar ee hantida naqad-galka ah iyo shuruudaha kale ee la xiriira.

## Qodobka 23 aad:
## Keydka lacagta caddaanka ah ee la dhigayo Bankiga Dhexe

1) Bankigu waa in uu dhigaa Bankiga Dhexe keyd lacageed oo caddaan ah si waafaqsan hal-beegga uu Bankiga Dhexe markaas ku qeexo digreetooyin.
2) Xaddiga keydka lacagta caddaanka ah waa in uu noqdaa hal-beegga wadarta guud ee lacagaha dhigaalka ah oo loo xisaabiyay hab gaar ah iyo wakhti cayiman oo sannad gudihiis ah, si waafaqsan qeexitaannada uu soo saarayo Bankiga Dhexe.
3) Bankiga Dhexe wuxuu digreetooyin ku qeexayaa-

a) qeybaha kale ee hay'adaha maaliyadeed ee keyd lacageed oo caddaan ah dhigaya Bankiga Dhexe; iyo
b) Halbeegga keydka lacagaha caddaanka ah ee qeybaha kala duwan ee hay'adaha maaliyadeed.

## Qodobka 24 aad:
## Xaddidaadda milkiyadda saamiga ee hay'ad maaliyadeed

1) Qofku waa in uusan si toos ah ama si dadban u yeelan ama si kale ugu yeelan dano faa'iido ah in ka badan boqolkiiba shan iyo labaatan saamiga bankiga.
2) Bankiga Dhexe wuxuu codsi ka dib qofka ka dhaafi karaa xaddidaadda faqradda (1) si waafaqsan xaaladaha iyo muddada uu Bankiga Dhexe cayimo.
3) Xadka saami-qeybsiga ee ku xusan faqradda (1) laguma dabbaqi doono hay'adaha soo socda:
   a) Dawladda Soomaaliya;
   b) Dawlad shisheeye.
   c) hay'ad dadweyne;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

d) hay'ad caalami ah; iyo
e) shirkad aan hawlgal ahayn oo leh milkiyad guud oo uu ansixiyay Bankiga Dhexe.

4) Bankiga Dhexe waa inuu xeer-nidaamiyeyaal ku qeexaa xadka saamiga milkiyadda ee hay'adaha kale ee maaliyadeed, waxaana xeer- nidaamiyeyaashu ka dhaafi karaan shuruudaha qaarkood, iyadoo la tixgelinayo dabeecadda, iyo khatarta hay'adahaas u gaarka ah.

## Qodobka 25 aad:
## Shirkad milkiyad guud leh oo aan hawlgal ahayn

1) Bankiga Dhexe wuxuu shirkad deynteedu ku xaddidan tahay hantideeda "limited liablity" u aqoonsan karaa shirkad milkiyad guud leh oo aan hawlgal ahayn.
2) Shirkad looma aqoonsan karo shirkad milkiyad guud leh oo aan hawlgal ahayn ilaa uu Bankiga Dhexe ku qanco-

a) kala duwanaanshaha qaab-dhismeedka saami-lahaanshaheeda ama kan kooxdeeda;
b) diiwaankeeda ganacsi ama diiwaanka ganacsi ee saamilaydeeda;
c) xaaladda maaliyadeed iyo taariikhda shirkadda ama saamilaydeeda;
d) dabeecadda maamulkeeda;
e) ku-habboonaanta saamilaydeeda muhiimka ah ee tooska ah iyo kuwa dadban oo ay ku jiraan ka-faa'iideystayaasha ugu dambeeya ee saamiga muhiimka ah ku leh shirkadda;
f) Xaddiga qaab-dhismeedkeeda raasamaal iyo fursadaheeda faa'idada;
g) awood u lahaanshaheeda inay wakhti kooban raasamaal dheeri ah ugu biirin karto hay'ad maaliyadeed oo ay ku leedahay saami, haddii loo baahdo; iyo
h) shuruudaha kale ee lagu qeexi doono xeer-nidaamiyeyaasha.

3) Shirkad leh milkiyad guud oo aan hawlgal ahayn lana ansixiyay waxay yeelan kartaa gebi ahaan ama qeyb ahaan hay'ad maaliyadeed.
4) Bankiga Dhexe wuxuu xeer-nidaamiyeyaal ku qeexayaa qaabka ansixinta iyo hawlgelinta shirkadaha leh milkiyadda guud ee aan hawlgalka ahayn iyo arrin kasta oo la xiriirta.

## Qodobka 26 [aad]:
## Shaacinta Saamileyda

Saami kasta oo ay leedahay shirkad, qof loo magacaabay, ama wakiil metalaya qof kale ee hay'ad maaliyadeed, kolba sida xaalku yahay, hay'adda maaliyadeed waa inay usoo bandhigtaa Bankiga Dhexe warbixin buuxda oo ku saabsan milkiilayaasha iyo ka faa'idayaasha u danbeeya ee saamiga.

## Qodobka 27 [aad]:
## Shuruudda iibsiga ama wareejinta saamiga muhiimka ah ee hay'ad maaliyadeed

1) Ma jiro qof si toos ah ama si dadban u yeelan kara ama u wareejin kara saami muhiim ah ee hay'ad maaliyadeed iyadoooo aan ka hor oggolaansho laga helin Bankiga Dhexe.
2) Bankiga Dhexe wuxuu xeer-nidaamiyeyaal ku qeexayaa shuruudaha looga baahan yahay si loo yeesho ama loo wareejiyo saami muhiim ah ee hay'ad maaliyadeed.
3) Qof kasta oo iibsada ama wareejiya saami muhiim ah ee hay'ad maaliyadeed si aan waafaqsaneyn faqradda (1)-

a) wuxuu luminayaa xuquuqda faa'iidada, midda codaynta iyo xuquuqda kale ee ku xiran saamiyadaas;
b) waxaa laga xannibayaa xuquuqda cod-bixinta ee hay'adda maaliyadda si waafaqsan muddada uu Bankiga Dhexe cayimo; ama
c) waxuu luminayaa dhammaan xuquuqdiisa cod-bixinta ama xuquuq kasta oo kale oo uu ku lahaa maamulka hay'adda maaliyadeed, Bankiga Dhexena wuxuu qaadayaa tallaabooyin uu saamiga saamilaha ay khusayso ugu wareejinayo saamile kale oo ka tirsan hay'adda, ama mid cusub.

4) Hay'adda maaliyadeed waa inay muddadiiba mar ogeysiisaa Bankiga Dhexe wixii wareejin ama la wareegid ah ee la xiriira saamiyada hay'adda maaliyadeed, kuwaas oo ka hooseeya xaddiga saamiga muhiimka ah.
5) Hay'adda maaliyadeed waa inay ogeysiisaa Bankiga Dhexe isla markii ay ogaato xog kasta oo saamayn taban ku yeelan karta sumcadda saamilaha muhiimka ah.

## Qodobka 28 aad:
## Sababaha diidmada soo jeedinta kordhinta, iibsiga ama wareejinta saamiyada

1. Bankiga Dhexe wuxuu diidi karaa codsiga kordhinta, iibsiga ama wareejinta saamiyada ee hay'ad maaliyadeed haddii uu-wax u dhimayo tayada maamulka hay'adda maaliyadda ama bed- qabkeeda dhaqaale;
   a) khatar-gelinayo danaha dadka lacagaha dhigtay hay'adda maaliyadeed, waa haddii ay tahay hay'ad maaliyadeed oo aqbasha lacag-dhigashada; ama
   b) caqabad ku yahay kormeerka wax-ku-oolka ah ee hay'adda maaliyadda.

## Qodobka 29 aad:
## Shaacinta ku xad-gudubka qodobbo la xiriira saami muhiim ah

Haddii uu xogteeda helo, xubin kasta oo ka tirsan guddiga maamulka sare, madaxa maamulka fulinta iyo hanti-dhawrka dibadda ee hay'ad maaliyadeed waa inay si degdeg ah u ogeysiiyaan Bankiga Dhexe xaddi kasta oo lagu kordhiyay, lala wareegay ama laga wareejiyay saamile muhiim ah ee hay'ad maaliyadeed iyada oo aan oggolaansho hore laga helin Bankiga Dhexe.

## Qodobka 30 aad:
## Waajibaadka kordhinta ama dhimista saamiga muhiimka ah ee hay'ad maaliyadeed

Bankiga Dhexe wuxuu fari karaa saamile kasta oo muhiim ah ama qof kasta oo saami mug leh ku leh hay'ad maaliyadeed inuu kordhiyo ama dhimo saamigiisa haddii arrintaasi lagama-maarmaan u tahay hay'adda maaliyadeed.

## Qodobka 31 aad:
## Oggolaanshaha Iibsashada ama Mideynta Hay'adaha Maaliyadda

1) Iyadoo aan waxba loo dhimayn qodobbada sharciga lagu maamulayo shirkadaha, Bankiga Dhexe wuxuu bixin karaa oggolaanshaha-
   a) Midowga ama isku-biirista laba ama in ka badan oo hay'ado maaliyadeed ah; ama
   b) In hay'ad maaliyadeed ay iibsato dhammaan ama qeyb ka mid ah hantida iyo

deymaha hay'ad maaliyadeed oo kale.

2) Bankiga Dhexe wuxuu xeer-nidaamiyeyaal ku qeexayaa qaabka iyo shuruudaha codsiga iyo ansixinta wareejinta, iibsiga, midaynta iyo isku- biirista.

## Qodobka 32 aad:
## Dhaqan-galka wareejinta, iibsiga ama midowga

1) Marka uu dhaqan-galo macaamil ganacsi oo saamaynaya wareejinta, la wareegidda ama midaynta hay'ad maaliyadeed oo ay samaynayso hay'ad kale oo maaliyadeed, ama ku wareejinta ay hay'ad maaliyadeed ugu wareejinayso dhammaan ama qeybka mid ah hantideeda iyo deymaheeda hay'ad maaliyadeed oo kale

a) dhammaan hantida iyo deymaha hay'adaha midoobay, ama haddii la wareejinayo hanti iyo deyn, hantidaas iyo deymahaas hay'adda maaliyadeed ee wareejinta samaynaysa ee lagu wareejiyay habka wax kala iibsiga, waa in ay masuuliyaddooda qaaddo hay'adda maaliyadeed ee la- midowga samaysay, ama, sida xaaladdu noqon karto, hay'adda maaliyadeed ee wax lagu wareejiyay;

b) Hay'adaha maaliyadeed ee midoobay ama marka la wareejinayo hantida iyo deymaha, hay'adda maaliyadeed ee wax la wareegaysa, waxay yeelanaysaa xuquuq iyo waajibaad la mid ah kuwii hay'adda maaliyadeed ee la-midowga samaysay ama, sida xaalku noqon karo, isla kuwii ay lahayd hay'adda wax wareejisay, ama xitaa kuwii ay hay'addaasi guddoontay ka hor midowga ama wareejinta;

c) dhammaan heshiisyada, ballamaha, macaamilka iyo dukumeentiyada la galay, la sameeyay, la fuliyay, ama lagu taageeray mid ka mid ah hay'adaha maaliyadeed ee midoobay ama, sida ay xaaladdu noqon karto, hay'adda maaliyadeed ee wareejinta samaysay oo la dhaqan- geliyay isla markiiba ka hor midowga , iibsashada ama wareejinta, marka laga reebo heshiisyada, ballamaha, macaamilka iyo dukumentiyada, iyada oo la raacayo shuruudaha midowga, iibsiga ama wareejinta ee lagu heshiiyay inaan la dabbaqin, waxay ahaanayaan kuwo si buuxda u shaqaynaya oo saamaynaya oo loo fasirtay ujeeddooyin kasta sidii in lagu soo galay, lagu sameeyay ama

lagu fuliyay, ama lagu taageeray hay'adda maaliyadeed ee midowga samaysay ama, sida ay xaaladdu noqon karto, hay'ad maaliyadeed ee wax lagu wareejiyay ama qofka hantida iyo deymaha lagu wareejiyay; iyo qaan-sheegad, ballan, dammaanad ama agab kasta oo lagu sugayo macaamilka mustaqbalka, tashiilaad ama adeegyada

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOMALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

mid ka mid ah hay'adaha maaliyadeed ee midoobay ama, sida ay xaaladdu noqon karto, hay'adda maaliyadeed ee wareejinta samaysay, kuwaas oo dhaqangal ahaa ka hor midowga ama wareejinta, waa inay si buuxda dhaqangal usii ahaadaan, waxaana loo fasiran doonaa inay yihiin qaan-sheegad, ballan, dammaanad ama agab la siiyay ama lagu taageerayo hay'adda maaliyadeed ee midowga samaysay ama, sida ay xaaladdu noqon karto, hay'adda maaliyadeed ee wax lagu wareejiyay ama qofka hantida iyo dayntaas lagu wareejiyay, waxaana sidaas la mid ah dammaanadda macaamilka mustaqbalka, tashiilaadka ama adeegyada hay'addaas maaliyadeed ama qofkaas marka laga reebo in heshiiska wareejinta aanay qeyb ka ahayn qodob waajibinaya arrimahaas.

2) Midowga, la wareegidda ama wareejinta hantida iyo deymaha waa in lagu ansixiyo shirka guud ee saamilayda mid kasta oo ka mid ah hay'adaha maaliyadeed ee ay khusayso.
3) Midowga, la wareegidda ama wareejinta hantida iyo deymuhu ma hirgelayaan ilaa lagu faafiyo mareegta Bankiga Dhexe.
4) Markii uu Bankiga Dhexe ku faafiyo mareegtiisa wareejinta, la wareegidda ama midowga, dhammaan dadka oo ay ku jiraan hay'adaha dawliga ahi waa inay si toos ah u aqoonsadaan-

a) sharcinnimada wareejinta, iibsiga ama midowga; iyo
b) xuquuqda iyo waajibaadka hay'adaha maaliyadeed ee ku lug leh wareejinta, iibsiga ama midowga, si waafaqsan qodobbada iyo shuruudaha ku xusan heshiiska wareejinta, iibsiga ama midowga.

5) Diiwaan-hayaha Shirkadaha iyo Diiwaan-hayaha Milkiyadaha, iyo maamul fulinta sare ama qof kasta oo mas'uul ka ah diiwaan-gelinta milkiyadaha ama xafiis kasta oo kale oo ay khusayso, waa in marka uu soo saaro wax kasta oo la xiriira milkiyad, dammaanad, qaan-sheegad, saamiyo, keyd saamiyeed, shahaado, warqad ballan, shati ama dokumeenti kale oo uu saameeyay midowga, iibsiga ama wareejintu, uu wax ka beddelka lagama- maarmaanka ah ku sameeyo diiwaankiisa si loo diiwaan-geliyo wareejinta qaan-sheegadka hantida ee khuseysa ama xuquuq kale, saami, curaar, deyn
, warqad ballan ama shati iyo wixii xuquuq ah ee hoos yimaada hay'adda maaliyadeed ee ka dhalatay midowga ama, sida ay xaaladdu tahay, hay'adda maaliyadeed ee wax la wareegtay.
6) Ma jiro wax kharash kala-wareejin, cashuur, khidmad diiwaangelin, cashuur shati

ama kharashyada kale oo laga bixinayo:-

a) wareejinta hantida iyo deymaha; ama
b) meel-marin ama wax-ka-beddel kasta oo la sameeyo si loo diiwaan- geliyo wareejinta noocaas ah, marka loo gudbiyo Diiwaan-hayaha Shirkadaha, Diiwaan-hayaha Milkiyadda, ama qof kasta oo kale oo lagu sheegay faqradda (5).

## Qodobka 33 aad:
## Xaddidaadda Bixinta, Deymaha iyo Dammaanadaha

1) Hay'ad maaliyadeed waa in aanay siin qofna lacag, amaah ama aanay bixin wax dammaanad maaliyadeed ah, ama aanay aqbalin deyn iyadoo ka wakiil ah qof, iyada oo wadarta qiimaha lacagta, denta, dammaanadaha maaliyadeed iyo deymaha kale ee khuseeya ay ka badan tahay boqolley cayiman oo ku salaysan raasamaalka waajibka ah, ama qeyb ka mid ah, sida uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer-nidaamiyeyaaa;
2) Bankiga Dhexe wuxuu hay'ad maaliyadeed ka dhaafi karaa xadiddaadaha ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, iyadoo lagu salaynayo xaaladaha uu Bankiga Dhexe arrintan u arki karo lagama-maarmaan.
3) Ka dhaafidda lagu xusay faqradda (2) ee qodobkan, waxay ahaanaysaa dhaqangal inta lagu jiro muddada uu Bankiga Dhexe cayimo.
4) Si waafaqsan ujeeddooyinka faqradda (1) ee qodobkan, tixraaca qof kasta waxaa ku jira qofkaas iyo bah-wadaagtiisa; iyo-

a) Lacagta, amaahda, dammaanad-qaadyada maaliyadeed iyo deymaha kale ee qofkaas iyo bah-wadaagtiisa waa in la isu geeyo si loo xisaabiyo wadarta qiimahooda; iyo
b) Xaddidaadaha lagu soo rogay faqradda (1) ee qodobkan, ayaa lagu dabbaqi doonaa lacagta, amaahda, dammaanad-qaadka maaliyadeed iyo deymaha khuseeya qofkaas iyo bah-wadaagtiisa.

## Qodobka 34 aad:
## Xaddidaadaha Bixinta Faa'iidada Saamiyada

1) Bankiga Dhexe wuxuu xeer-nidaamiye ku xaddidayaa bixinta faa'iidada, iyadoo loo eegayo halbeegga raasamaalka waajibka ah ee hay'adda

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE
جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ

maaliyadeed.

2) Ma jirto Hay'ad maaliyadeed oo ku dhawaaqi karta, biirin karta, bixin karta ama dibadda u wareejin karta wax faa'ido ah ama samayn karta wareejin kasta oo la xiriirta faa'idadii la sameeyay ilaa -

a) La gudo dhammaan kharashaadkii dib loo dhigay, oo ay ku jiraan kharashaadka hordhaca ah iyo kuwa la xiriira aasaaska shirkaddda, faa'idada iibinta saamiyada, dullaalnimada, khasaaraha dhacay iyo shay kasta oo kale oo kharash ah oo aan loo hayn hanti la taaban karo;
b) La tixgeliyo kharashaadka iyo lacagta dheeriga ah ee lagu biirinayo raasamaalkeeda;iyo
c) Loo diyaariyo qoondo ku filan deymaha xumaaday ama shakiga leh ama hantida kale, taas oo ku qanacsan yahay Bankiga Dhexe, marka laga hadlayo hay'ad maaliyadeed oo bixisa deymo ama tashiilaad amaah.

3) Loo tixgeliyo soo saarista saamiyada dhiirrigelinta ah oo ka imanaya macaashka bixinta faai'idada saamiyada.

## Qodobka 35 aad:
## Xadiddaadda wax kala iibsiga ka dhexeeya hay'ad maaliyadeed iyo dhinac xiriir la leh

1) Dhammaan wax kala iibsiga ay hay'ad maaliyadeed la yeelato dhinac xiriir la leh waa in loo fuliyaa si waafaqsan shuruudaha u degsan macaamilka u dhexeeya hay'ad maaliyadeed iyo xubin ka mid ah dadweynaha.
2) Bankiga Dhexe waxuu xeer-nidaamiyeyaal ku qeexayaa shuruudaha lagu dabbaqi karo wax kala iibsiga ka dhexeeya hay'ad maaliyadeed iyo dhinac xiriir la leh ama dhinacyo isku xiran, wuxuuna caddaynayaa xaaladaha ka reebban qodobkan iyadoo lagu salaynayo waxyaabaha lagama-maarmaanka u ah nooca xiriirka ama wax kala iibsiga.

## Qodobka 36 aad:
## Xaddidaadda u Isticmaalka Saamiyada Rahan ahaan

Hay'adda maaliyadeed waa in aanay wax tashiilaad deymeed ah siinin qofna iyadoo rahan iyo dammaanad ahaan loo isticmaalayo saamiyadeeda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 37 aad:
## Xaddidaadda Maal- gashiga

1) Hay'ad maaliyadeed ma sameyn karto maal-gashi weyn iyadoo aan oggolaansho hore laga helin Bankiga Dhexe.
2) Marka la qiimaynayo codsiga maal-gashi weyn, Bankiga Dhexe waa in uu xaqiijiyaa in maal-gashiga hay'adda maaliyadeed ee la soo jeediyay aanay:
   a) hoos u dhigayn maamulka hay'adda maaliyadda iyo bed- qabkeeda maaliyadeed;
   b) khatar gelinayn danaha dadka lacagta dhigtay, saamilayda ama dayn-bixiyeyaasha, iyadoo lagu salaynayo xaaladda markaas;
   c) caqabad ku ahayn kormeerka wax-ku-oolka ah ee hay'adda maaliyadda;
   d) caqabad ku ahayn fulinta tallaabooyinka sixitaanka mustaqbalka; iyo
   e) Inaanay u bandhignayn hay'adda maaliyadeed khataro xad-dhaaf ah.
3) Bankiga Dhexe ma oggolaan karo maal-gashi la soo jeediyay haddii uusan ku qanacsanayn in hay'adda maaliyadeed ay haysato ilo dhaqaale, maamul iyo khibrad ku filan oo ay ku maarayso maal-gashiga.
4) Bankiga Dhexe wuxuu xeer-nidaamiyeyaal ku qeexayaa shuruudaha maal-gashiyada waaweyn ee hay'ad maaliyadeed.

## Qodobka 38 aad
## Xaddidaadda Dhaqdhaqaaqyada Ganacsiga iyo Iibsashada Hantida Ma Guurtada Ah

1) Hay'ad maaliyadeed ma samayn karto, si keligeed ah ama iyadoo kaashanaysa cid kale, ganacsi jumlo ama tafaariiq ah, oo uu ku jiro ka ganacsiga soo dejinta ama dhoofinta, marka laga reebo inay u qaadanayso deymo ka maqan.
2) Hay'ad maaliyadeed ma yeelan karto hanti ma guurto ah, marka laga reebo in ay u qaadanayso deyn ka maqan.
3) Hay'ad maaliyadeed waa ay iibsan kartaa hanti ma guurto ah ama xuquuq la mid marka ay taasi lagama-maarmaan u tahay hawlgelinta ganacsigeeda ama marka ay shaqaalaheeda siinayso adeegyo, waxaase shardi ah in qiimaha hantidu aanu ka badnayn boqolley ka mid ah raasamaalka waajibka ah ee hay'adda maaliyadeed, ama qeybo ka mid ah, sida uu Bankiga Dhexe qeexi doono
4) Bankiga Dhexe waxuu go'aaminayaa muddada hantida lagu helay si

waafaqsan faqradda (1) ee qodobkan lagu iibinayo.

5) Mamnuucidda ku xusan qodobkan laguma dabbaqi karo hay'ad maaliyadeed oo ganacsi u samaynaysa si waafaqsan mabaadi'da shareecada Islaamka.

## Qodobka 39 aad:
## Xaddidaadaha lacag-dhigashada u dhexaysa bankiyada

1) Bankiga Dhexe wuxuu Xeer-nidaamiyeyaal ku qeexi doonaa boqolkiiba inta raasamaalka waajibka ah ee bankiga, ama qeybihiisa, ee ay hay'ad maaliyadeed dhigan karto ama ku shuban karto hay'adaha kale ee maaliyadeed.
2) Lacag-dhigashada u dhexaysa hay'adaha maaliyadeed ee xiriirka leh waxaa loo tixgalinayaa inay tahay wax kala iibsi gudaha ah, waxayna ku dabbaqmaysaa qodobbada Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyayaasha.

## Qodobka 40 aad:
## Xeerarka Taxaddarka iyo Hagayaasha

Bankiga Dhexe wuxuu dejinayaa xeerar taxaddar iyo hagayaal ku habboon qeybaha kala duwan ee hay'adaha maaliyadeed iyadoo lagu salaynayo nooca ganacsigooda, hawlahooda iyo heerka khatarta ay wajahayaan.

## Qodobka 41 aad:
## Hannaanka maareynta khataraha

1) Hay'adda maaliyadeed waa inay, si keligeed ah ama si wadajir ah, u meelmariso siyaasad dhammaystiran oo maareyn khatareed ah si loo aqoonsado, loo cabbiro, loo qiimeeyo, loo kormeero, looga warbixiyo, loona xakameeyo, ama si joogto ah loogu yareeyo dhamman khataraha.
2) Siyaasadda waa inay qeyb ka tahay kormeer wax-ku-ool ah oo ay samaynayaan guddigeeda maamulka sare iyo maamulkeeda fulinta.
3) Hay'adda maaliyadeed waa inay si keligeed ah ama si wadajir ah u qiimeysaa xaddiga raasamaalkeeda waajibka ah iyo shuruudaha hantida naqad-galka ah ee la xiriira heerkeeda khatar, xaaladaha suuqa iyo dhaqaalaha guud.
4) Siyaasadda maaraynta khatarta waa in ugu yaraan lagu tixgeliyo khataraha soo socda:
   a) khatarta waafaqsanaan la'anta shareecada islaamka;

b) khatarta hantida naqad-galka ah;
c) khatarta hawlgelinta;
d) khatarta suuqa;
e) khatarta dalka;
f) khatarta istaraatiijiga ah;
g) khatarta tignaloojiyadda;
h) khatarta sharci;
i) khatarta u hoggaansanaanta sharci
j) khatar kasta oo kale oo hay'ad maaliyadeed u tixgelin karto lagama maarmaan.

5) Siyaasadda maaraynta khatarta ee lagu xusay faqradda (4) waa inay tixgelisaa dabeecadda ganacsiga iyo heerka khatar ee hay'adda maaliyadeed u gaarka ah.
6) Siyaasadda maaraynta khatarta ee hay'ad maaliyadeed waa inay u hoggaansanaato xeerar ama habraacyo kasta oo uu soo saaro Bankiga Dhexe.

### Qodobka 42 aad:
### Kala soocidda deynta iyo ka soo kabashadeeda

1) Hay'adda maaliyadeed ee ganacsigeeda ay ku jirto bixinta deymuhu waa inay kala soocdaa noocyada deymaha ay bixiso oo ay ku ilaalisaa mar walba heer ay ka soo kaban karto.
2) Bankiga Dhexe waxuuu Xeer-nidaamiyeyaal ku go'aaminayaa shuruudaha kala soocidda deymaha iyo heerarka ka soo kabashadeeda ee hay'adaha maaliyadeed ee kala duwan.

## CUTUBKA AFARAAD
## MAAMULKA
### Qodobka 43 aad:
### Waajibaadka saamilayda

1) Iyadoo aan waxba loo dhimayn qodobbada sharciga ee khuseeya shirkadaha, saamilayda hay'adda maaliyadeed waa inay si wadajir ah u ilaaliyaan, u dhowraan oo ay si firfircoon u isticmaalaan awoodda ugu sarraysa ee hay'ad maaliyadeed marka ay qabsanayaan shirarka guud.
2) Waajibaadka saamilayda waxa ka mid ah-
   a) hubinta in dad amaano iyo karti leh loo doorto xubnaha guddiga maamulka sare;
   b) hubinta in guddiga maamulka sare si joogto ah loogula xisaabtamo inay si

hufan oo wax-ku-ool ah u gutaan maamulka hay'adda maaliyadda;

c) wax ka beddelidda xubnaha guddiga maamulka sare haddii ay dhacdo wax-qabad la'aan ama si waafaqsan siyaasadda la ansixiyay ee hay'adda maaliyadeed;
d) hubinta in xubnaha guddiga maamulka sare ay yihiin kuwo u qalma shaqada ay hayaan lehna xirfado kala duwan; iyo
e) mas'uuliyadaha kale ee la qeexi doono.

## Qodobka 44 aad:
## Guddiga Maamulka Sare

1) Hay'ad kasta oo maaliyadeed waa inay dhistaa guddi maamul sare oo awoodda ugu danbaysa u leh maaraynta hay'adda maaliyadeed.
2) Guddiga maamulka sare ee bankigu wuxuu ka kooban yahay ugu yaraan(5) shan xubnood,(3) saddex meelood laba meelna aysan lahayn awood fulin.
3) Guddoomiyaha Bankigu wuxuu noqonayaa xubin aan fulin lahayn, halka madaxa fulinta ee xubnaha maamulka sare uu noqon doono xubin fulin leh.
4) Bankiga Dhexe wuxuu Xeer-nidaamiyeyaal ku qeexayaa shuruudaha kala duwan iyo xubnaha ay ka koobnaanayaan guddiga maamulka sare ee
5) noocyada kala duwan ee hay'adaha maaliyadeed.
6) Bankiga Dhexe qof uusan baarin isla mar ahaantaana ansixinin looma magacaabi karo xubin ka tirsan guddiga maamulka sare ee hay'ad maaliyadeed.

## Qodobka 45 aad:
## Masuuliyadaha Guddiga Maamulka Sare

1) Guddiga maamulka sare ee hay'ad maaliyadeed waxay yeelanayaan masuuliyadaha soo socda:

   a) in uu kormeero hawlaha hay'adda maaliyadda isla markaana kor- joogteeyo maamulka hay'adda maaliyadda si loo hubiyo bedqabkeeda;
   b) in uu ansixiyo jihada istiraatijiyadeed ee hay'adda maaliyadeed, xaddiga khatarta iyo siyaasadaha, in uu saameeyo oo baahiyo dhaqanka iyo qiyamka shirkadda, iyo in uu diyaariyo siyaasadda danaha is-diiddan iyo jawi xakamayn oo xooggan hadba markii loo baahdo;
   c) in uu hubiyo maamul wanaagga hay'adda maaliyadda;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ
AQALKA SARE

d) in uu hubiyo in ganacsiga hay'adda maaliyadeed loo fuliyo si waafaqsan dhammaan sharciyada, xeer-nidaamiyeyaasha, hab- raacyada, awaamiirta Bankiga Dhexe, siyaasadaha la ansixiyay iyo in uu la jaanqaadayo hab-dhaqannada sugaya badbaadada iyo sammaanta;
e) in uu hubiyo in xubnaha maamulka fulintu ay qaadaan tallaabooyinka lagama-maarmaanka u ah aqoonsiga, cabbirka, kor-joogtaynta iyo xakamaynta khataraha;
f) in uu magacaabo oo beddelo markii loo baahdo xubnaha maamulka fulinta iyo in uu go'aamiyo qorshaha ku habboon maamul-dhaxlidda;
g) in uu kormeero maamulka fulinta ee hay'adda maaliyadda taasi oo qeyb ka ah isla-xisaabsanka iyo is-dheellitirka;
h) in uu ilaaliyo danaha sharciga ah ee saamilayda, dhigtayaasha, deyn-bixiyeyaasha, macaamiisha iyo daneeyayaasha kale ee la xiriira hay'adda maaliyadeed
i) in uu ansixiyo qaab-dhismeedka maamulka hay'adda, xisaab-xirrada iyo faaida-qeybsiga;
j) in uu uga warbixiyo saamilayda marka la gaaro shir sanadeedka guud, waxqabadka, xakamaynta gudaha iyo nidaamyada; iyo habraacyada maaraynta macluumaadka ee hay'adda maaliyadeed;
k) in uu uga warbixiyo Bankiga Dhexe wixii isbeddel saamayn leh ee ku yimaada hawlaha, qaab-dhismeedka maamulka iyo xaaladda maaliyadeed ee hay'adda maaliyadda;
l) in uu uga warbixiyo Bankiga Dhexe arrimaha saamayn kara sumcadda saamilayda, guddiga maamulka sare iyo xubnaha maamulka fulinta iyo arrimaha kale ee looga baahan yahay in uu guddigu u gudbiyo Bankiga Dhexe.
m) in uu hubiyo in hay'adda maaliyadeed ay sii waddo xiriirrada wax- ku- oolka ah oo ay la leedahay kormeerayaasheeda; iyo
n) masuuliyadaha kale ee uu jideeyay sharci kasta oo kale iyo Xeer-nidaamiyayaasha kale ee ka soo baxa Bankiga Dhexe.

### Qodobka 46 aad:
### Xilkasnimada laga rabo xubnaha

1. Xubintu waa in, marka loo eego hay'adda maaliyadeed ee uu u shaqaynayo, uu muujiyo xilkasnimo lana yeesho xiriir daacad ah hay'adda maaliyadda iyo saamilaydeeda isagoo gudanaya waajibaadka soo socda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

a) in uu u dhaqmo si daacad iyo niyad-wanaag ku dheehan tahay;
b) in uu u dhaqmo sida ay ku jirto danta ugu wanaagsan oo ay faa'iidadu ugu jirto hay'adda maaliyadda
c) in uu u dhaqmo si madax-bannaan, oo xor ka ah saamaynta aan habboonayn ee qof kale; iyo
d) in uu helo macluumaadka lagama-maarmaanka ah si ay ugu suurtagasho inuu guto mas'uuliyaddiisa.

## Qodobka 47 aad:
## Guddi-hoosaadyada Guddiga Maamulka Sare

1) Guddiga maamulka sare ee hay'adda maaliyadeed waa in ay dhisaan guddi-hoosaadyada lagama-maarmaanka ah iyada oo la tixgelinayo baaxadda, nooca ganacsiga iyo khataraha uu la kulmi karo.
2) Iyadoo aan waxba loo dhimayn faqradda (1) ee qodobkan, Bankigu waa inuu dhiso guddiyada soo socda ee guddiga maamulka sare:
   a) Guddiga Amaahda;
   b) Guddiga Hanti-dhawrka;
   c) Guddiga Maaraynta Khatarta;
   d) Guddiga Maamulka Shaqaalaha
   e) Guddiga Mushaaraadka (kan sugan iyo kan aan sugnayn); iyo
   f) Guddiyada kale ee uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer- nidaamiyeyaasha ama bankigu ku jideeyo xeer-hoosaadkiisa guddiga maamulka sare, ama hab kale.

3) Masuuliyadaha guddi kasta oo lagu xusay faqradda (2) waxaa lagu qeexayaa Xeer-nidaamiyayaal.
4) Bankiga Dhexe wuxuu Xeer-nidaamiyeyaal ku qeexi doonaa nooca guddi-hoosaadyada ay tahay inay dhisaan guddiga maamulka sare ee hay'adaha kale ee maaliyadeed iyo awoodahooda.

## Qodobka 48 aad:
## Kulammada Guddiga Maamulka Sare

1) Guddigu wux uu qaban karaa tiro cayiman oo shirar ah sannad gudihii si waafaqsan sida la go'aamiyay ama sida ganacsiga hay'adda maaliyadeed u baahan karo.
2) Bankiga Dhexe wuxuu amri karaa in ay guddigu ku kulmaan wakhti iyo goob cayiman iyo in ay ka tashadaan arrimaha uu bankiga Dhexe cayimo

3) Bankiga Dhexe wuxuu u magacaabi karaa shirka guddiga korjooge, korjooguhuna wuxuu qaadan karaa qoraallada lagama-maarmaanka u ah ujeeddooyinka Bankiga Dhexe.
4) Marka ay guddigu ku guul-darraystaan inay fuliyaan awaamiirta Bankiga Dhexe si waafaqsan faqradda (2), Bankiga Dhexe wuxuu qaadi karaa tallaabada ku habboon si uu u ilaaliyo hufnaanta nidaamka maaliyadeed, danaha hay'adda maaliyadeed iyo macaamiisheeda.
5) Bankiga Dhexe wuxauu Xeer-nidaamiyeyaal ku qeexayaa kooramka loo baahan yahay, qaabka go'aan-qaadashada, isticmaalka tiknoolajiyada sida shirarka guddiga ee habka fogaan-aragga ah iyo shuruudaha kale, si loo suurta-geliyo wada-tashiyo guddi oo wax-ku-oolka ah, loona sugo habka go'aan-gaarista.

## Qodobka 49 aad:
## War-bixinta waajibka ah ee guddiga maamulka sare iyo fulinta

1) Guddiga maamulka iyo xubin kasta, shakhsi ahaan, waa inay isla markiiba qoraal ahaan ugu soo gudbiyaan Bankiga Dhexe haddii ay jirto sabab ay ku rumaystaan in hay'adda maaliyadeed-
   a) Aysan awoodin in ay sii waddo ganacsigeeda;
   b) u muuqato ama ay u badan tahay in mustaqbalka dhow aanay awoodin inay ka soo baxdo dhammaan ama mid kasta oo ka mid ah waajibaadkeeda marka ammintooda la gaaro; iyo
   c) aysan awoodin in ay buuxiso shuruudaha raasamaalka waajibka ah sida ku qeexan Sharcigan ama Xeer-nidaamiyayaasha.

2) Bankiga Dhexe wuxuu qaadayaa tallaabo ka dhan ah xubinta guddiga ama fulinta ka tirsan ee ay masuuliyadeeda tahay, haddii guddiga ama fulintu ay ku guul-darraystaan in ay usoo gudbiyaan warbixinta Bankiga Dhexe si waafaqsan faqradda (1), oo ay ku jirto shaqo ka joojin ama ka saarista guddiga ama xil-kaqaadista xubinta fulinta.

## Qodobka 50 aad:
## Shaacinta bah-wadaagta iyo danaha

1) Xubinta fulintu waa inay qoraal ugu gudbisaa hay'adda maaliyadeed, iyo guddigeeda maamulka sare:

a) dhammaan bah-wadaagteeda;
b) dhammaan danaha ay ka leedahay hay'ad maaliyadeed ama bah- wadaagta hay'ad maaliyadeed; iyo
c) arrin kasta oo keeni karta dano is-diiddan haddii ay ka qeyb-qaadato habka go'aan-qaadashada ku aaddan arrinta.

2) Shaacinta ku cad faqradda (1) waa in lagu wargeliyaa Bankiga Dhexe iyadoo la raacayo habka loogu talagalay.

**Qodobka 51aad:**
**Mas'uuliyadaha xubnaha maamulka fulinta ee hay'ad maaliyadeed**

1) Xubnaha maamulka fulinta ee hay'ad maaliyadeed, oo hoos imaanaya agaasinka guddiga maamulka sare, waa inay xaqiijiyaan in hawlaha hay'adda maaliyadeed ay waafaqsan yihiin istiraatijiyaddeeda, u adkaysigeeda khatarta iyo siyaasadaha ay ansixiyeen guddiga maamulka sare.
2) Madaxa maamulka fulinta ee Bankiga wuxuu leeyahay masuuliyadaha soo socda-
    a) hubinta in siyaasadaha uu guddigu qeexay ee ku jira istaraatiijiyadda guud ee bankiga la hirgeliyay;
    b) hubinta u hoggaansanaanta sharcigan, shuruucda kale ee qoran ee dhaqangalka ah, Xeer-nidaamiyayaasha, habraacyada, tilmaamaha, shuruudaha iyo amarrada uu soo saaro Bankiga Dhexe;
    c) xulidda iyo kula-talinta guddiga, si waafaqsan siyaasadda shaqaalaha, xubno maamul oo karti u leh inay maareeyaan hawlaha bankiga;
    d) isku xirka hawlaha waaxyaha kala duwan ee Bankiga dhexdiisa;
    e) samaynta iyo hawlgelinta habab wax-ku-ool ah oo la xiriira nidaamyada xakamaynta ee gudaha;
    f) naqshadaynta iyo hirgelinta hababka lagama-maarmaanka ah ee maamulka xogaha si gudaha Bankiga looga fududeeyo isgaarsiin hufan oo waxtar leh;
    g) hubinta in guddigu si joogta ah oo ku filan u qiimeeyo hawlaha Bankiga iyadoo loo soo bandhigayo waraaqaha guddiga ee khuseeya; iyo
    h) mas'uuliyadaha kale ee la qeexi doono.

3) Bankiga Dhexe wuxuu ku qeexayaa Xeer-nidaamiyeyaal, mas'uuliyadaha xubnaha maamulka fulinta ee hay'adaha kale ee maaliyadeed.

## Qodobka 52 aad:
## Mamnuucidda Jagooyinka Badan

1) Qofna ma noqon karo xubin ka mid ah Guddiga Maamulka Sare ama xubin ka mid ah Maamulka Fulinta in ka badan hal hay'ad- maaliyadeed oo shati lagu siiyay Sharcigan marka laga reebo in ay yihiin shirkado hoos yimaadda ama shirkadda milkiyadda guud leh.
2) Ma jiro saamile muhiim ah oo loo magacaabi karo guddoomiyaha Guddiga Maamulka Sare ama madaxa Maamulka Fulinta ee banki.
3) Qofna iskuma hayn karo jagooyinka guddoomiyaha guddiga maamulka sare iyo waajibaadka madaxa maamulka fulinta ee hay'ad maaliyadeed.
4) Bankiga Dhexe wuxuu ka dhaafi karaa hay'ad maaliyadeed oo lacag qabasho aan ka shaqayn qaar ka mid ah waxyaabaha lagu mamnuucay qodobkan, iyadoo la raacayo shuruudaha uu Bankiga Dhexe ku qeexo ka- dhaafidda.

## Qodobka 53 aad:
## Ceeb-ka-saliimnimada guddiga maamulka sare, maamulka fulinta iyo saamilayda muhiimka

1) Qofna looma magacaabi karo xubin ka tirsan guddiga maamulka sare ama maamulka fulinta ee hay'ad maaliyadeed, iyadoo aan oggolaansho laga helin Bankiga Dhexe.
2) Bankiga Dhexe wuxuu qiimayn ku samaynayaa ka gun-gaarista ceebaha qofka la soo jeediyay in loo magacaabo xubin guddiga maamulka sare ama maamulka fulinta ka tirsan, waana in uu caddeeyaa in uu yahay ceeb- ka- saliim si loogu magacaabo maamulidda ama xakamaynta hay'ad maaliyadeed.
3) Qiimaynta ceeb-ka-saliimnimada waa in loo fuliyaa si waafaqsan shuruudaha u Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer-nidaamiyeyaasha.
4) Qofka waxaa loo magacaabi karaa maamulka fulinta si tijaabo ah, iyadoo la sugayo qiimaynta ceeb-ka-saliimnimada ee Bankiga Dhexe, magacaabis kasta oo noocaas ahna waa in isla markiiba la ogeysiiyaa Bankiga Dhexe.
5) Qofna ma noqon karo saamile muhiim ah oo hay'ad maaliyadeed ilaa Bankiga Dhexe uu caddeeyo inuu yahay qof ceeb-ka-saliim ah.
6) Ceeb-ka-saliimnimada iyo qiimaynta ku xusan faqradda (5) waa in loo sameeyaa

si waafaqsan shuruudaha Bankiga Dhexe.

7) Qof kasta oo lagu helo in aanu ahayn ceeb-ka-saliim ma noqonayo saamile muhiim ah, xubin ka tirsan guddiga maamulka sare ama maamulka fulinta ee hay'ad maaliyadeed, hadba sida ay noqoto.

## Qodobka 54 [aad]:

## Dib-u-baarista guddiga maamulka sare, maamulka fulinta iyo saamilayda muhiimka ah

1) Bankigaa Dhexe wuxuu hadba, marka uu u arko inay lagama-maarmaan tahay waa inuu , qiimayn ku samaynayaa ceeb-ka-saliimnimada qof hore loogu ansixiyay inuu noqdo xubin ka tirsan guddiga maamulka sare, maamulka fulinta, ama saamile muhiim ah.
2) Qiimayntu, sida ay dhigayso faqradda (1) ee qodobkan, waa in ay ahaataa mid waafaqsan shuruudaha loo dejiyay.
3) Marka la sameeyo qiimaynta faqradda (1) ee qodobkan ka dib, Bankiga Dhexena ku qanco in qofku yahay ceeb-ka-saliim u qalma maamulidda ama xakamaynta hay'adda maaliyadeed, wuxuu aqbalayaa in uu u shaqeeyo hay'addaas.
4) Marka qiimaynta ceeb-ka-saliimnimada qofka, ka dib uu Bankiga Dhexe gaaro go'aan ah in qofkaasi aanu ahayn ceeb-ka-saliim aan u qalmin maamulidda ama maaraynta hay'adda maaliyadeed, Bankiga Dhexe wuxuu shaqada ka xayuubinayaa qofkaas isagoo ku wargelinayaa hay'adda maaliyadeed.
5) Qofka uu Bankigu ka xayuubiyey xilka sida ay dhigayso faqradda (4) ee qodobkan wuxuu joojinayaa in uu guto xilka hay'adda maaliyadda, dibna wax xil ah ugama qabanayo hay'ad maaliyadeed ugu yaraan (5) shan sano, laga bilaabo taariikhda xilka laga qaaday, marka uu yahayse saamile muhiim ah-
   a) Bankiga Dhexe wuxuu ku amrayaa in uu hoos u dhigo saamiga uu ku leeyahay hay'adda maaliyadeed oo uu ka hoos mariyo heerka sharcigu cayimay muddo jaango'an; sida la qeexi doono;
   b) Bankiga Dhexe wuxuu ku amrayaa in uu ku gado dhammaan saamiyadii uu ku lahaa hay'adda maaliyadda muddo cayiman gudahood;
   c) Bankiga Dhexe wuxuu amrayaa in dhammaan saamigiisa ama qeyb ka mid ah laga iibiyo cid saddexaad; ama
   d) Bankiga Dhexe wuxuu ka hor istaagayaa in uu isticmaalo xuquuqdiisa cod-bixinta ee hay'adda maaliyadda; ama
   e) Bankiga Dhexe wuxuu kusoo rogi karaa shuruudo kale sida lagu qeexayo

awaamiirta ama Xeer-nidaamiyeyaasha.

### Qodobka 55aad:
### Mabaadi'da iyo Qaab-Dhismeedka Maamul ee Waafaqsan Shareecada Islaamka (Islamic principle for Sharia Governance Framework)

1) Bankiga Dhexe waxa uu xeernidaamiye ku qeexayaa Qaab-dhismeedka Maamulka Shareecada iyo mucaamalaadkooda ee hay'adaha maaliyadda si waafaqsan mabaadi'da guud ee Guddiga Adeegyada Maaliyadeed ee Islaamiga ah (Islamic Financial Service Board).
2) Bankiga Dhexe waxa uu xeernidaamiyayaal ku qeexaya qaabka ay hay'adaha bixiya adeegga maaliyadeed ee ku dhisan shareecada u dajinayaan xisaabaadookda si waafaqsan Hay'adda Xisaabaadka iyo Dabalgalka Hay'adaha Maaliyadeed ee Islaamiga ah (Accounting and Auditing Organization for Islamic Financial Institutions).

## CUTUBKA SHANAAD
## XISAABAADKA, SHAACINTA WARBIXINNADA MAALIYADEED IYO HANTI- DHAWRKA DIBADDDA

### Qodobka 56 aad:
### Halbeegyada diyaarinta warbixinta maaliyadeed

Warbixinnada maaliyadeed ee hay'ad maaliyadeed waa inay u hoggaansamaan Halbeegyada Warbixinta Maaliyadeed ee Caalamiga ah ama halbeegyada kale ee caalamiga ah ee ku habboon ee uu ansixiyay Bankiga Dhexe.

### Qodobka 57 aad:
### Waajibaadka ilaalinta xisaabaadka

1) Hay'adda maaliyadeed waa in ay xisaabteeda u ilaaliso si waafaqsan mabaadi'da xisaabaadka ee uu qeexayo Bankiga Dhexe.
2) Shirkad hoos-timaadda ama laan ka mid ah hay'ad maaliyadeed oo shisheeye, ganacsina ka wadda gudaha Soomaaliya waa inay u ilaalisaa xisaabaadkeeda si ka madax-bannaan tan hay'adda maaliyadeed ee milkiyadda guud leh.

3) Waxa waajib ku ah hay'adda maaliyadeed-
   a. in la xafido buugaag xisaabeedka saxda ah iyo diiwaanka maaliyadeed ee dhabta ah ee la xiriira xisaabaadka kuwaas oo si dhammaystiran oo run ah u muujinaya xaaladda maaliyadeed ee hay'adda; iyo
   b. in la diyaariyo warbixin xisaabeed sannadle ah oo muujinaysa xaaladda, dakhliga iyo kharashka hay'adda maaliyadeed.

### Qodobka 58 aad:
### Soo gudbinta iyo shaacinta warbixin maaliyadeedka hay'adda maaliyadeed

1) Hay'adda maaliyadeed waa inay u soo gudbisaa Bankiga Dhexe warbixinnada maaliyadeed ee hanti-dhawrku hubiyay muddo saddex bilood gudahood ah ka dib dhammaadka sannad maaliyadeedka;
2) Sannad maaliyadeedku wuxuu ka bilaabanayaa 1-da Janaayo wuxuuna dhammaanayaa 31-ka Diseemba ee isla sannadkaas.
3) Lama daabici karo warbixinnada maaliyadeed ee hay'adda maaliyadeed ee hanti-dhawrku hubiyay ilaa uu Bankiga Dhexe fasaxo.
4) Bankiga Dhexe wuxuu dib u eegis ku samaynayaa warbixinnada maaliyadeed ee la soo gudbiyay, markaas ayuuna-

a. fasaxayaa warbixinnada maaliyadeed si loo daabaco;
b. ku amrayaa hay'adda maaliyadeed iyo hanti-dhawrkeeda dibadda inay wax ka beddelaan ama saxaan warbixinta maaliyadeed haddii ay jiraan arrimo, walaac, khaladaad ama waxyaabo laga tagay;
c. diidayaa warbixinta maaliyadeed kuna amrayaa hay'adda maaliyadeed iyo hanti-dhawrkeeda dibadda inay dib u soo saaraan oo dib u hubiyaan warbixinnada maaliyadeed; ama
d. ka dalbanayaa hay'adda maaliyadeed iyo hanti-dhawrkeeda dibadda wixii macluumaad dheeraad ah ee loo baahdo.

5) Warbixinnada maaliyadeed ee hanti-dhawrku hubiyay ee hay'ad maaliyadeed waa in lagu soo daabacaa afar (4) bilood gudahooda ka dib dhammaadka sannad maaliyadeedka.
6) Bankiga Dhexe wuxuu sabab macquul ah awgeed iyo codsi ka yimi hay'adda maaliyadeed ka dib kordhin karaa muddada soo gudbinta warbixinnada maaliyadeed ee la hubiyay ama daabacaadda warbixinnada maaliyadeed, muddo kordhintuna waxa ay noqon kartaa wakhtiga uu bankiga Dhexe go'aamiyo.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

muddo kordhintu marna waa in aysan ka badan lixdan (60) maalmood laga bilaabo taariikhda la qeexay.

7) Hay'ad kasta oo maaliyadeed waa inay ku daabacdaa mareegaheeda Internet- ka, warbixinnada maaliyadeed ee la hubiyay iyo xog kasta oo uu Bankiga Dhexe qeexo.
8) Warbixinnada maaliyadeed ee la hubiyay ee hay'ad maaliyadeed waa in si furan loogu soo bandhigaa goobaheeda ganacsi sannadka oo dhan.
9) Bankiga Dhexe wuxuu Xeer-nidaamiyayaal ku qeexayaa xogta ay tahay in laga helo warbixinnada maaliyadeed ee la hubiyay, shaacinnada kale, qaabka iyo habka loo daabacayo warbixinnada maaliyadeed ee khusaysa qeyb kasta oo ka mid ah hay'adaha maaliyadeed iyo arrin kasta oo kale oo la xiriirta.

## Qodobka 59 aad:
## Daabacaadda warbixinta sannadlaha ah

Iyada oo aan waxba loo dhimayn qodobbada Sharciga ee la xiriira shirkadaha, hay'adda maaliyadeed waa in ay daabacdaa warbixin sannadle ah oo ka tarjumaysa shuruudaha raasamaalkeeda waajibka ah, u bandhignaanta khatarta iyo istaraatijiyadda maaraynta khatarta.

## Qodobka 60 aad:
## Xisaabinta wadajirta ee hay'ad maaliyadeed iyo shirkado hoos- yimaadda

1) Hay'ad maaliyadeed oo leh shirkado hoos-yimaadda waa in ay u diyaarisaa warbixinnada maaliyadeed si goonni ah iyo si wadajir ahba.
2) Marka la go'aaminayo heerka raasamaalka waajibka ah ee hay'ad maaliyadeed, hay'adda maaliyadeed waa in ay u hoggaansantaa Xeer- nidaamiyayaasha uu qeexay Bankiga Dhexe.
3) Bankiga Dhexe wuxuu Xeer-nidaamiyayaal ku qeexayaa shuruudaha warbixinnada maaliyadeed ee wadajirka ah ee hay'adaha maaliyadeed ee kale ee u shaqeeya koox ahaan.

## Qodobka 61aad:
## Magacaabidda, xil ka qaadista iyo muddada xil- haynta hanti- dhawraha dibadda

1) Hay'adda maaliyadeed waa inay sannad-maaliyadeed kasta soo magacawdaa hanti-dhawre dibadeed oo aqoon iyo karti leh, shaqadiisuna tahay hubinta iyo ka-warbixinta xisaabxirka sannadka, faa'idada iyo khasaaraha hay'adda maaliyadeed.
2) Warbixin kasta oo noocaas ah waa inuu ku jiraa aragti qeexaysa in xisaabaadka xisaabxirka sannadka, faa'idada iyo khasaaruhu ay si dhab ah uga turjumayaan xaaladda hay'adda maaliyadeed iyo natiijada ka soo baxday muddada dhammaatay, oo ay qeyb ka yihiin arrimo kale iyo macluumaadka kale ee Bankiga Dhexe uu ku qeexo Xeer- nidaamiyayaashiisa.
3) Bankiga Dhexe wuxuu u magacaabayaa hanti-dhawraha dibadeed ee hay'adda maaliyadeed, marka hay'adda maaliyadeed ay ku guul- darraaysato inay soo magacawdo hanti-dhawre dibadeed ama inay
4) buuxiso boos bannaan sabab kasta ha ahaatee, dhammaan kharashaadka hanti-dhawrahana waxaa bixinaya hay'adda maaliyadeed.
5) Hanti-dhawre lama magacaabi karo iyadoo aan oggolaansho laga helin Bankiga Dhexe.
6) Hanti-dhawraha dibadda wuxuu hubin karaa hay'ad maaliyadeed muddo saddex (3) sano ah oo xiriir ah, waxaana xilka loo cusboonaysiin karaa si waafaqsan shuruudaha lagu qeexi doono Xeer-nidaamiyayaasha.
7) Bankiga Dhexe wuxuu u fari karaa hanti-dhawraha in uu qabto hawlahan soo socda, marka laga yimaaddo kuwa lagu xusay faqradda (1).
   a) In uu u soo gudbiyo Bankiga Dhexe macluumaadka dheeraadka ah ee la xiriira hanti-dhawrkiisa, si waafaqsan sida uu Bankiga Dhexe u arko lagama-maarmaan;
   b) in uu sameeyo hubin kasta oo kale oo khaas ah ama hanti-dhawr; iyo
   c) in uu soo gudbiyo warbixin ku saabsan mid ka mid ah arrimaha lagu sheegay faqrad-hoosaadyada (a) iyo (b) ee faqradda (6) ee qodobkan; hay'adda maaliyadeed ee ay khusayso ayaana bixinaysa dhammaan kharashka.

8) Haddii hanti-dhawraha hay'ad maaliyadeed, isagoo ku guda-jira gudashada waajibaadkiisa ku cad Sharcigan, uu ku qanco:-
   a) In ay dhacday jebin culus ama ku-dhaqan la'aan la xiriirta qodobbada Sharcigan, Xeer-nidaamiyayaasha, habraacyada, digreetooyinka, shuruudaha laga soo

rogay ama amarrada uu soo saaray Bankiga Dhexe ama jebinta sharciyo kale oo qoran oo xiriir la leh;

b) Fal-dembiyeedyo ku lug leh khiyaamo ama daacad-darro kale oo ay gashay hay'adda maaliyadeed ama mid ka mid ah xubnaha maamulkeeda fulinta ama shaqaalaheeda;

c) khasaare dhacay kaas oo hoos u dhigaya raasamaalka bud-dhigga ah boqolkiiba konton ama wax ka badan

d) khaladaad ba'an oo dhacay kuwaas oo khatar gelin kara bedqabka dhigtayaasha ama deyn-bixiyayaasha hay'adda maaliyadeed; ama

e) in uu xaqiijin kari waayo in qaan-sheegadka dhigtayaasha ama deyn-bixiyayaasha hay'adda maaliyadeed laga daboolki karo hantida hay'adda maaliyadeed, waa in uu si degdeg ah arrinka ugu gudbiyo Bankiga Dhexe.

9) Bankiga Dhexe wuxuu qabanqaabinayaa shirar saddex geesood ah oo uu la yeesho hay'adda maaliyadeed iyo hanti-dhawraheeda wakhti ka wakhti, si ay uga wada hadlaan arrimaha khuseeya mas'uuliyadaha kormeerka ee Bankiga Dhexe ee ka dhashay baaritaanka sharciga ah ee hay'adda maaliyadda oo ay ku jiraan arrimaha khuseeya hay'adaha ganacsiga ee hay'adda maaliyadda, hab xisaabeedka, xakamaynta iyo warbixinta sannadlaha ah.

10) Hanti-dhawrku waa inuu si buuxda galaangal ugu yeelan karo goob kasta, dukumeenti, macluumaad, diiwaan, kombiyuutar, qalab kasta, iyo sidoo kale xubin kasta oo ka tirsan guddiga maamulka sare, maamulka fulinta, shaqaale, wakiil, shirkad bah-wadaag ah ama xiriir la leh hay'ad maaliyadeed.

11) Qofku uma qalmayo in loo magacaabo hanti-dhawraha hay'ad maaliyadeed haddii uu yahay:-

a) xubin ka tirsan guddiga maamulka sare, maamulka fulinta ama shaqaalaha hay'addaas maaliyadeed;

b) qof ay shuraako yihiin xubin ka tirsan guddiga maamulka, maamulka fulinta ama shaqaalaha hay'addaas maaliyadeed;

c) qof ah loo-shaqeeye ama shaqaalaha xubin ka tirsan guddiga maamulka sare, maamulka fulinta ama shaqaalaha bah-wadaagta hay'addaas maaliyadeed;

d) qof ah xubin ka tirsan guddiga maamulka sare, maamulka fulinta ama shaqaale ka tirsan shirkadaha bah-wadaagta la ah hay'adda maaliyadeed; ama

e) qof, isaga, shuraakadiisa ama shaqaalihiisu, si joogto ah u gutaan waajibaadka xoghaye ama buug-haye ee hay'addaas maaliyadeed; ama

f) shirkad ama xubin ka mid ah shirkad hanti-dhawr oo shuraako la ah ama

shaqaale kasta oo qeybaha kore lagu xusay qeyb ka ah.

12) Bankiga Dhexe ayaa Xeer-nidaamiyayaasha ku qeexaya shuruudaha kale ee la xiriira hanti-dhawrka dibadda iyo shaqadooda.

## Qodobka 62 aad:
## Ku-wargelinta beddelidda hanti-dhawrka ee Bankiga Dhexe

1) Ma jirto hay'ad maaliyadeed oo xilka ka qaadi karta ama beddeli karta hanti-dhawraheeda iyada oo aan oggolaansho qoraal ah ka helin Bankiga Dhexe.
   a) Hanti-dhawraha hay'adda maaliyadeed waa in uu isla markaaba ogeysiis qoraal ah siiyaa Bankiga Dhexe haddii uu: -xafiiska iska casilo;
   b) uusan doonayn in dib loo magacaabo;
   c) kusoo daro warbixintiisa ama qabyo-qoraalka warbixintiisa ku saabsan xisaabaadka hay'adda maaliyadda aragti cusub oo aan ku jirin warbixin maaliyadeedkii sannadkii hore.

## Qodobka 63 aad:
## Waajibka kalsooni-siinta hanti-dhawrka

1) Xadgudub ka dhan ah hay'ad maaliyadeed laguma eedayn karo hanti- dhawre iyadoo lagu sababaynayo in uu si daacad ah ula wadaagay Bankiga Dhexe, isagoo ka jawaabayo codsi uu u gudbiyay iyo haddii kaleba, xog

   kasta ama ra'yi kasta oo ku saabsan arrin gaar ah taasoo khusaysa shaqo kasta oo uu Bankiga Dhexe qabto si waafaqsan Sharcigan.
2) Qodobkani wuxuu khuseeyaa arrin kasta oo uu hanti-dhawrku ku ogaado xilkiisa hanti-dhawraha ah ama gudashada waajibaadkiisa Sharcigan ee la xiriira ganacsiga ama arrimaha hay'adda maaliyadeed ama cid kasta oo la xiriirta hay'addaas maaliyadeed.

## Qodobka 64 aad:
## Xayiraadda ka dhanka ah hanti-dhawrka dibadda

1) Haddii uu hanti-dhawraha dibaddu-
   a) ku guul-daraysto in uu u hoggaansamo shuruudaha Sharcigan ama Xeer-

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

nidaamiyayaal;

b) ku guul-darraysto inuu si waafi ah oo habboon u fuliyo hawlaha iyo waajibaadka hanti-dhawrayaasha dibadda uu Sharcigan ama Xeer-nidaamiyayaashu ku waajibinayaan;
c) uu buuxin waayo shuruudaha ceeb-ka-saliimnimada ee qofka ee ku qeexan Sharcigan;
d) uu haysto sababo macquul ah oo uu ku aamino in hay'adda maaliyadeed ay tahay mid musallaftay, ama ay jirto khatar weyn oo ay hay'adda maaliyadeed ku noqon karto mid musallaftay; ama hay'adda maaliyadeed ay ku guul-darraysatay inay u hoggaansanto shuruudaha ka-taxaddarka ee ku qeexan Sharcigan; ama ogaanshaha xaqiiqo jirta oo ku saabsan hay'adda maaliyadeed oo laga yaabo inay wax u dhinto danaha dhigtayaasha, deyn-bixiaeyaasha
e) ama daneeyayaasha kale, ama ku guul-darraysiga u warbixinta Bankga Dhexe;
f) lagu xukumay dembi la xiriira daacadnimo darro;
g) yahay mid aan karti u lahayn ama aan ku habboonayn inuu qabto hawlaha hanti-dhawraha dibadda; ama
h) ku guul-darraystay inuu shaaciyo dano toos ah ama kuwo dadban oo dhalind kara dano is-diiddan oo khuseeya hawlaha hanti-dhawraha;

Bankiga Dhexe wuxuu;

I. amar ku siinayaa hay'adda maaliyadeed in ay xilka ka qaaddo hanti-dhawraha;
II. ka mamnuucayaa in uu hawl-gal hanti-dhawr ka fuliyo hay'adda maaliyadda;
III. ka mamnuucayaa in uu u qabto adeegyada hanti-dhawrka hay'ad kale oo maaliyadeed ilaa laga gaarayo muddada uu Bankiga Dhexe go'aamiyo; ama
IV. ku soo rogayaa ganaax lacageed oo kale, sida Bankiga Dhexe go'aamiyo.

2) Bankiga Dhexe wuxuu siinayaa hanti-dhawraha ay khusayso mid ka mid ah arrimaha ku xusan faqradda (1) fursad uu isku difaaco ka hor inta aan go'aan laga gaarin.

## Qodobka 65 aad:
## Hanti-dhawraha Gudaha

1) Hay'adda maaliyadeed waa in ay dhistaa waax hanti-dhawr oo madax-bannaan;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ayna magacawdaa hanti-dhawre gudeed si uu u fuliyo hawlaha ay farto ama u xilsaarto hay'adda maaliyadeed.

2) Hanti-dhawraha gudaha xilka lagama qaadi karo, iyadoo aan oggolaansho laga helin Bankiga Dhexe.
3) Hanti-dhawrka dibadda iyo hanti-dhawraha gudaha waa inay si joogto ah u wada tashadaan.
4) Bankiga Dhexe ayaa Xeer-nidaamiyayaal kusoo saaraya shuruudo dheeraad ah oo khuseeya hanti-dhawrka gudaha.

## CUTUBKA LIXAAD
## KORMEERKA BANGIGA DHEXE EE HAY'ADAHA MAALIYADDA

### Qodobka 66 aad:
### Awoodaha Kormeerka ee Bankiga Dhexe

1. Bankiga Dhexe wuxuu kormeeraa hay'adaha maaliyadda iyo kooxahooda, isagoo adeegsanaya farsamooyinka iyo agabka kormeerka ee ku habboon, si loo hubiyo in hay'adaha maaliyadda iyo kooxahooda ay u hoggaansamaan qodobbada Sharcigan, sharciyada kale ee Dalka ee dhaqan-galka ah, Xeer- nidaamiyeyaasha, habraacyada, digreetooyinka, shuruudaha la soo rogay iyo amarrada ka soo baxa Bankiga Dhexe.
2. Bankiga Dhexe wuxuu isticmaalayaa awooddiisa kormeerka, si uu u qiimeeyo u hoggaansanaanta hay'adaha maaliyadeed ee Sharciga ka

   Hortagga Lacag-dhaqidda iyo Maal-gelinta Argagaxisada iyo Xeer-nidaamiyeyaasha dhaqan-galka ah.
3. Bankiga Dhexe wuxuu galaangal buuxa u yeelanayaa diiwaannada guddiga mamulka sare, maamulka fulinta iyo shaqaalaha hay'adda maaliyadeed, si uu dib ugu eego u hoggaansanaanta xeerarka iyo xanydaabyada gudaha iyo sidoo kale sharciyada dibadda iyo Xeer- nidaamiyeyaasha.
4. Bankiga Dhexe wuxuu qaadan karaa hab ku salaysan khatarta oo lagu kormeerayo hay'adaha maaliyadda iyo kooxahooda iyadoo la tixgelinayo muuqooda khatareed iyo muhiimadda ay leeyihiin iyo hababka yaraynta khatarta kala duwan ee jira.
5. Isagoo ku dhaqmaya awooddiisa kormeer ee Sharcigan, Bankiga Dhexe ma hoos iman karo cid kale.
6. Bankiga Dhexe wuxuu isticmaalayaa cid saddexaad oo madax-bananan, haddii ay taasi dhacdo:-

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

a) waa in uusan ku wareejin mas'uuliyaddiisa taxaddar cid saddexaad; iyo
b) wuxuu qiimaynayaa in natiijada la isugu hallayn karo ilaa heerka loogu talagalay iyo in kale, wuxuuna tix-gelinayaa eexaha saameyn kara dhinacyada saddexaad.

**Qodobka 67 aad:**
**Baaritaanka Rugta**

1. Bankiga Dhexe wuxuu mar kasta ama marmarka qaar go'aansan karaa in qof uu u igmaday uu hubin ku sameeyo hay'ad kasta oo maaliyadeed iyo wakiilladeeda.
2. Qofka hubinta samaynaya wuxuu xaq aan xaddidnayn u yeelanayaa in uu galo goob kasta oo ganacsi oo ka mid ah hay'adaha maaliyadeed, wuxuuna baari karaa hawlaheeda ganacsi oo ay ku jiraan buugaagta, xisaabaadka, diiwaannada, lacagta caddaanka ah ee taal, dammaanadaha iyo qiimayaasha maal-gashiyada kale, warbixinnada kulammada, waraaqaha la is- dhaafsaday, bayaannada, rasiidada, nidaamka kombiyuutarka, qalabka, agabka iyo sidoo kale wixii kale ee dukumeenti ah ama alaabaha loo baahan yahay in la baaro.
3. Hay'ad maaliyadeed, maamulkeeda fulinta, shaqaalaheeda iyo wakiilladeedu waa inay soo saaraan oo ay u bandhigaan qofka hubinta samaynaya dukumeenti, macluumaad ama wax kasta oo kale oo uu u baahan karo, waana inay, si buuxda u helaan xarumahaas iyo nidaamyada muddadaas ay hawsha wadaan.
4. Baare kasta waxaa la siinayaa dukumentiga asalka ah ama nuqulka rasiid kasta, haddii la codsado in falanqayn dheeraad ah lagu soo sameeyo, iyadoo la geynayo xarunta Bankiga Dhexe.
5. Awoodaha kormeerka ee Bankiga Dhexe ee qodobkan ku xusan, waxay daboolayaan shirkad kasta ama hay'ad kasta oo xisaabaadkeeda lagu daray hay'addaas maaliyadeed iyo cid kasta oo kale oo la xiriirta hay'adda maaliyadeed.
6. Xog kasta oo la helo inta lagu guda-jiro hubinta waa in loo maareeya, si sir qarin leh, loona isticmaalo oo keliya ujeeddooyinka Sharcigan, Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya iyo ujeeddo kasta oo kale oo sharci ah oo uu leeyahay Bankiga Dhexe.

**Qodobka 68 aad:**
**Kormeer Wadajir ah**

1. Bankiga Dhexe wuxuu si wadajir ah ugu soo rogayaa halbeegyo taxaddar, ururinayaa oo falanqaynayaa warbixinnada maaliyadeed iyo macluumaadka kale ee kooxda Bankiyada ama kooxda hay'adaha maaliyadeed, kuwaasi oo koobaya

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

qeybaha ay ka midka yihiin ku filnaanshaha raa'sumaalka waajibka ah, naqadka, u bandhignaanta khatarta, xadka ugu badan ee amaahda, qaab- dhismeedka kooxda iyo meelaha kale ee la qeexi doono.

2. Bankiga Dhexe wuxuu kormeer wadajira ku samayn karaa hay'ad kasta oo maaliyadeed iyo kooxdeeda ama bah-wadaagteeda ama kuwa ku- sidkan, waxaana laga yaabaa in uu dalbado macluumaadka uu Bankiga Dhexe uga maarmi waayo ujeeddooyinka kormeeridda wadajirka ah.
3. Bankiga Dhexe wuxuu awood u leeyahay inuu xaddido hawlaha kala duwan ee koox wadajirta ay qaban karto iyo goobaha lagu qabanayo hawlaha oo ay ku jiraan xiritaanka xafiisyada shisheeye haddii ay go'aamiso in:-
   a) Badbaadada iyo bedqabka hay'adda maaliyadeed iyo kooxdeeda khalkhal la geliyay, ayna hawlahaasi hay'adda maaliyadeed iyo kooxdeeda u bandhigayaan khatar xad-dhaaf ah oo aysan jirin wax tallaabo ah oo lagaga hor-tegayo;
   b) Kormeerka kormeereyaasha kale uusan ku filnayn marka la eego hawlaha markaas socda; ama
   c) Marka samaynta kormeer wax-ku-oolka ah ee wadajirka ah la hor- istaago.
4. Bankiga Dhexe wuxuu soo rogi karaa shuruudo taxaddar oo xooggan oo loogu talagalay hay'adaha maaliyadeed ee gaarka ah iyo bah- wadaagtooda, iyadoo lagu salaynayo xaaladdooda khatareed iyo muhiimadda nidaamkooda.

## Qodobka 69 aad:

## Kormeerka Shirkadaha Hoos-yimaada Shirkadda Milkiyadda Guud leh, Laamaha iyo Xafiisyada Wakiillada ee Hay'adaha Maaliyadda Soomaaliyeed ee laga Hirgeliyey Dal Shisheeye

1. Bankiga Dhexe wuxuu kormeerayaa faracyada, laamaha iyo xafiisyada wakiillada ee hay'adaha maaliyadda Soomaaliyeed ee lagu yagleelay waddan shisheeye, iyadoo aan waxba loo dhimayn awoodaha maamulka kormeerka ee Dalka laga hirgeliyey.
2. Kormeerka lagu sheegay faqradda (1) ee qodobkan, waxaa lagu samaynayaa heshiis wada-shaqayn oo dhex-mara Bankiga Dhexe iyo hay'adda kormeerka ee dalka martida loo yahay.
3. Bankiga Dhexe oo ah kormeeraha maxalliga ah, wuxuu qabanqaabinayaa iskaashi kormeer oo uu la samaynayo hay'adaha kormeerka ee dalka martigeliya ah, kaasi oo lagu samaynayo hay'adaha maaliyadeed ee Soomaaliyeed ee ka hawlgala dalalka shisheeye.

## Qodobka 70 aad:
## Baaritaannada Gudaha Soomaaliya ee Hay'adda Kormeerka ee Waddan Shisheeye

Iyadoo aan waxba loo dhimayn ku dhaqanka heshiis kasta oo iskaashi oo ka dhaxeeya hay'adda kormeer ee dalka uu asal ahaan ka soo jeedo, kormeereyaasha ka socda hay'adda kormeerka ee Dal shisheeye waxay gudaha Soomaaliya ka gudan karaan shaqadooda la xiriirta kormeerka faracyada, laamaha iyo xafiisyada wakiillada hay'adahooda maaliyadeed marka ay ogeysiis qoraal ah iyo codsi ay usoo gudbiyaan Bankiga Dhexe.

## Qodobka 71 aad:
## Warbixinta Baaritaanka

1. Marka la dhammeeyo hubinta hay'ad maaliyadeed, Bankiga Dhexe wuxuu diyaarinayaa warbixinta baaritaanka oo uu:-
   a) ku muujinayo xadgudub kasta oo loo geystay Sharcigan, Xeer-nidaamiyeyaasha, habraacyada, digreetooyinka, shuruudaha, amarrada, tilmaamaha ama sharci kasta oo la xiriira sida Sharciga Ka- hortagga lacag-dhaqida iyo La-dagaallanka Maal-gelinta Argagixisada;
   b) ku muujinayo bedqabka maaliyadeed ee hay'adda maaliyadda;
   c) ku muujinayo wixii gaabis ah ee jira;
   d) ku samaynayo wixii tala-bixin ah ee ku saabsan sida xadgudubyada ama meelaha gaabisku ka jiro wax looga qabanayo;
   e) ku sameynayo wixii tala-bixin ah ee ku saabsan ciqaab kasta ama tallaabo maamul oo laga qaadayo hay'adda maaliyadda, maamulkeeda fulinta, shaqaalaheeda, wakiillada ama qof kasta oo kale.
   f) ku sameynayo indho-indhayn ama tala-bixin kasta oo kale haddii ay lagama-maarmaan noqoto.

2. Bankiga Dhexe wuxuu warbixinta baaritaanka iyo talooyinka la wadaagayaa guddiga maamulka sare ee hay'adda maaliyadeed ee la kormeeray, waxaana nuqul ka mid ah loo dirayaa maamulka fulinta ee hay'adda maaliyadda.
3. Bankiga Dhexe, haddii uu u arko in ay habboon tahay, wuxuu la wadaagayaa nuqul ka mid ah talooyinka hanti-dhowraha dibadda ee
4. hay'adda maaliyadeed ee la baaray.

5. Hay'adda maaliyadeed ee la baaray waxay u gudbinaysaa Bankiga Dhexe qorshe-hawleed lagu fulinayo dhammaan talooyinka ku xusan warbixinta kormeerka, qorshe-hawleedkuna, waa inuu muujiyaa wakhtiga kama- dambaysta ah ee talo kasta la fulinayo.
6. Fulin la'aanta talooyinka Bankiga Dhexe waxay horseedaysaa in Bankiga Dhexe uu qaado tallaabo sixitaan ah ama xayiraad ka dhan ah hay'adaha maaliyadeed ee ay khusayso si waafaqsan qodobbada Sharcigan iyo Xeer- nidaamiyeyaasha.
7. Talooyinka Bankiga Dhexe ee ku xusan qodobkan, waa in loo tixgeliyo inay yihiin awaamiir ka soo baxday Bankiga Dhexe, waxayna waajib ku yihiin oo lagula xisaabtamayaa hay'adda maaliyadeed, maamulkeeda fulinta, shaqaalaheeda iyo wakiilladeeda.

## Qodobka 72 aad:
## Warbixinada Bankiga Dhexe

1. Hay'adda maaliyadeed waa in ay u soo gudbisaa dukumeentiyada, warbixinnada maaliyadeed, warbixinada kale iyo macluumaad kasta oo uu Bankiga Dhexe uga baahdo, si uu u guto shaqadiisa.
2. Dukumeentiyada, warbixinnada maaliyadeed, warbixinada kale iyo macluumaad kasta oo kale; wixii caddayn ah ee arrintaas khuseeyana waa in loogu soo gudbiyaa Bankiga Dhexe qaabka iyo muddada uu cayimo.
3. Bankiga Dhexe haddii uu uga baahdo wakiil kasta, bah-wadaagta, shirkadda milkiyadda guud leh ee aan hawlgalka ahayn ama shirkad hoos-timaadda shirkad milkiyad guud leh ama qof kasta oo saami muhiim ah ku leh hay'ad maaliyadeed, waa in uu siiyo Bankiga Dhexe ama wakiilkiisa la magacaabay macluumaadkaas ama dukumentiyadaas, oo ay ku jiraan warbixinnada maaliyadeed iyo diiwaannada xisaabeed ee kale, haddii loo arko inay lagama- maarmaan tahay, si loogu go'aamiyo in qodobbada Sharcigan iyo Xeer- nidaamiyeyaasha la raacay iyo in la hubiyo:-
   a) qaab-dhismeedka sharci, maamul iyo hawleed ee kooxda;
   b) xaalada khatareed ee kooxda iyo shirkadahooda hoos-yimaadda;
   c) habka maaraynta khatarta gudaha looga agaasimay loogana fuliyay kooxda dhexdeeda; iyo
   d) shirkadaha, dhaqaalaha iyo xiriirrada kale ee ka dhexeeya xubnaha kooxda.

4. Hay'adda maaliyadeed waa in ay ogeysiisaa Bankiga Dhexe isbeddel kasta oo la taaban karo oo ku yimaadda hawlaheedaa, qaab- dhismeedkeeda iyo xaaladdeeda

guud ama isla marka ay ogaadaan isbeddel kasta oo oo soo kordhay, oo ay ku jiraan jebinta shuruudaha Sharciga ama kuwa taxaddarka.

5. saamile, xubin ka mid ah guddiga maamulka sare, maamulka fulinta, shaqaale, wakiil ama adeeg-bixiye saddexaad ee hay'ad maaliyadeed midkoodna uma cuskan karo waajibaadka sir-qarinta ama ilaalinta sir- mihnadeedka, si uu ugaga hortago shaacinta macluumaadka uu u baahan yahay Bankiga Dhexe.

## Qodobka 73 aad:
## Daabacaadda Xaaladda Maaliyadeed ee Hay'adda Maaliyadda

1. Bankiga Dhexe wuxuu daabacayaa, gebi ahaan ama qeyb ahaan, xaaladda maaliyadeed ee hay'adaha maaliyadeed si wadajir ah.
2. Daabacaaddu sida ku cad faqradda (1) ee qodobkan, waa in aysan shaacin arrimaha maaliyadeed ee hay'ad maaliyadeed ama macaamiisheeda marka laga reebo: -
   a) in ay si toos ah ugu dirto hay'adda maaliyadeed ama macaamiisheeda;
   b) in ay u dirto cid saddexaad laakiin haysata oggolaansho qoran oo ka yimid hay'adda maaliyadeed ama macaamiisheeda;
   c) in uu oggolaanayo sharci qoran;
   d) in ay amarto maxkamad sharci ah;
   e) in la ilaalinayo danaha Bankiga Dhexe;
   f) iyadoo la raacayo qaabka wadaagista macluumaadka amaahda ee uu Sharcigani oggolaanayo; ama
   g) marka uu Bankiga Dhexe la wadaagayo macluumaadka hay'ad maaliyadeed ee ku saabsan hawlaha deynta iyo culaysyo haysta lacag- bixinta hay'ad maaliyadeed kale ama macaamiisheeda.

3. Marka laga reebo sida uu dhigayo Sharcigani, qofna daaha kama qaadi karo mana daabici karo wax xog ah oo soo galay gacantiisa taasoo ka dhalatay gudashada waajibaadkiisa ama masuuliyadihiisa uu Sharcigani siiyay.

## Qodobka 74 aad:
## Wada-shaqayn iyo Iskaashi

1. Iyadoo aan loo eegin Qodobkan, Bankiga Dhexe wuxuu u bandhigi karaa macluumaad kasta hay'ad lacageed, hay'ad maamusha hay'adaha maaliyadeed, hay'adda ilaalinta dhigaalka, xafiiska tixraaca amaahda ama wakaaladda

cashuuraha ama hay'adda sharci fulinta ee gudaha ama dibadda Soomaaliya, taasoo macluumaadka noocaas ah, si macquul ah ugu baahan yahay, si sax ah loogu fuliyo hawlaha Bankiga Dhexe ama hay'adda lacagta ee codsiga samaysay, hay'ad maamusha hay'adaha maaliyadeed, hay'adda ilaalinta dhigaalka, xafiiska tixraaca amaahda ama wakaaladda cashuuraha ama hay'adda sharci fulinta.

2. Marka lala wadaagayo macluumaadka hay'ado ka baxsan Soomaaliya waxaa shardi ah inuu jiro heshiis xog is-weydaarsi oo labada dhinac u dhexeeya.
3. Bankiga Dhexe wuxuu heshiis la gelayaa Hay'adaha kale ee kormeerka, iyadoo ujeeddadu tahay fulinta hawlo wadajir ah iyo wadaagista macluumaadka kormeerka, si waafaqsan shuruudo cayiman kuwaas oo hubinayaa:-
   a) ilaalinta sirta macluumaadka la wadaagayo;
   b) in macluumaadka la wadaagayo loo isticmaalo keliya ujeeddada la cayimay; iyo
   c) in oggolaansho la raadsaday oo la helay ka hor inta aan xogta lala wadaagin ama la siin cid saddexaad.

## Qodobka 75 aad:
## Tallaabo Sixitaan oo Degdeg ah

1. Marka uu Bankiga Dhexe go'aamiyo in:-
   a) hay'ad maaliyadeed ku xad-gudbtay ama ku guul-darraysatay inay u hoggaansanto qodob kasta oo ka mid ah Sharcigan, Xeer- nidaamiyeyaasha, habraacyada, digreetooyinka, shuruudda ama amar uu soo saaray Bankiga Dhexe;
   b) hay'ad maaliyadeed ku hawlan tahay hab-dhaqan aan bedqab iyo badbaado lahayn ama dhaqdhaqaaqyo u keeni kara khatar hay'adda maaliyadda ama nidaamka maaliyadda;
   c) heerka raa'sumaalka waajibka ah ee hay'adda maaliyadeed uu hoos u
   d) dhacay oo ka hooseeyo ugu yaraan intii loogu talagalay; ama
   e) uu jiro gaabis weyn oo la xiriira ganacsiga hay'adda maaliyadda; Bankiga Dhexe wuxuu u baahanayaa hay'adda maaliyadeed inay:-
      I. Qaaddo tallaabo sixitaan oo degdeg ah, si wax looga qabto xad-gudubyada, ka-tegidda, hab-dhaqannada aan bedqabka iyo badbaadada lahayn; gaabisyada kale; ama
      II. Inay u soo gudbiso qorshaha dib-u-soo-celinta raa'sumaalka waajibka ah muddo shan iyo afartan (45) maalmood gudahood ah, kaasi oo

faahfaahinaya tallaabooyinka ay hay'adda maaliyaddu qaadi doonto, si ay dib ugu soo celiso raa'sumaalkii waajibka ahaa ugu yaraan heerkii loogu talagalay.

2. Bankiga Dhexe wuxuu u magacaabayaa, iyada oo ay kharashka bixinayso hay'adda maaliyadeed, qof ku habboon, kartina leh, si waafaqsan aragtida Bankiga Dhexe, si uu ugala taliyo, ugana caawiyo hay'adda maaliyadda qaabaynta iyo hirgelinta qorshaha soo-celinta raa'sumaalka ama qorshe- hawleedyada kale ee sixitaanka; qofka la magacaabay waa inuu si joogto ah u siiyaa Bankiga Dhexe warbixin ku saabsan halka uu marayo qorshuhu.
3. Haddii hay'ad maaliyadeed uu Bankiga Dhexe ku amro inay qaaddo tallaabooyin sixitaan oo cayiman, hay'adda maaliyadeed waa inay u soo gudbisaa Bankiga Dhexe warbixin xilliyeed ku saabsan hirgelinta tallaabooyinka sixitaanka, waana inay hubisaa in tallaabooyinka sixitaanka,

si dhammaystiran loo fuliyo inta lagu jiro muddadaas cayiman.

### Qodobka 76 aad:
### Awoodda Bankiga Dhexe ee Talasiinta iyo Jihaynta

1. Haddii Bankiga Dhexe uu helo sabab uu ku rumaysto in: -
   a) ganacsiga hay'ad maaliyadeed loo maray hab ka soo horjeeda ama aan waafaqsanayn Sharcigan, Xeer-nidaamiyeyaasha, habraacyada, ama amarrada ka soo baxa Bankiga Dhexe ama wax kasta oo wax u dhimaya ama aysan dani ugu jirin dhigtayaasheeda, deyn- bixiyeyaasheeda ama xubnaha dadweynaha, ama
   b) mid ka mid ah maamulka fulinta, shaqaalaha ama wakiillada hay'ad maaliyadeed uu ku hawlan yahay dhacdo ay u badan tahay inay ka hor imanayso mid ka mid ah qodobbada Sharcigan, xeer- nidaamiyeyaasha, habraacyada, shuruudaha ama amarrada uu soo saaray Bankiga Dhexe.

   Bankiga Dhexe wuxuu:-
   I. talo iyo soo-jeedin siinayaa hay'adda maaliyadeed taasoo ku aaddan sidii ay guud ahaan u maarayn lahaayeen ganacsigooda.
   II. soo saarayaa tilmaamo ku saabsan tallaabooyinka sixitaanka ee la qaadayo, si loo hagaajiyo maamulka ama hababka ganacsiga ee hay'adda maaliyadeed ama si loo sugo ama loo hagaajiyo u hoggaansanaanta shuruudaha Sharcigan, xeer- nidaamiyeyaasha, habraacyada, shuruudaha

ama amarrada uu soo saaray Bankiga Dhexe, ama si waafaqsan sharci kasta oo Dalka ama Xeer- nidaamiyeyaasha; ama si wax looga qabto gaabis kasta oo jira;

III. xaalad kasta oo faqradda (1)(b) ee qodobkan, ay khusayso wuxuu soo saarayaa tilmaamaha hay'adda maaliyadeed, maamulka fulinta, shaqaalaha, wakiilka ama qof kale si ay u joojiyaan dhaqankaas;

IV. magacaabayaa qof ku habboon, kartina u leh sida uu qabo Bankiga Dhexe, si uu ugala taliyo oo u caawiyo hay'adaha

maaliyadeed guud ahaan ama gacan uga siiyo fulinta ujeeddooyinka tilmaamaha hoos yimaadda faqradda (1)(b)(ii)(iii) ee qodobkan, talada qofka magacaabanna waxay yeelanaysaa awood iyo saamayn la mid ah tilmaanta lagu caddeeyay faqradda (1)(b)(ii) (iii) ee qodobkan, waxaana loo aqoonsanayaa inuu yahay jihada Bankiga Dhexe ee qaybtan.

2. Haddii Bankiga Dhexe uu Go'aamiyo:-
   a) in xubin ka tirsan koox aan ahayn hay'ad maaliyadeed ay ku kacday wax xadgudub ah oo ka dhan ah Sharcigan, Xeer- nidaamiyeyaasha, habraacyada, digreetooyinka, shuruudaha ama amarrada ka soo baxa Bankiga Dhexe, ama
   b) in hawlaha xubin noocaas ah ay saamayn taban ku yeelanayaan hay'adda maaliyadeed ama ay khatar gelin karaan danaha dhigtayaasha. Bankiga Dhexe wuxuu xubinta ku amrayaa in ay meesha ka saarto hab- dhaqankaas inta lagu guda-jiro muddada uu go'aamiyay.

3. Bankiga Dhexe wuxuu magacaabayaa hay'ad karti u leh ama qof khibrad u leh arrimaha ay khusayso, si uu u qabto fulinta tilmaamaha lagu caddeeyay faqradda (2) ee qodobkan.
4. Bankiga Dhexe wuxuu, marka laga yimaaddo talaabooyinka lagu sheegayfaqradda (3) ee qodobkan, go'aaminayaa in uu tilmaamo dheeraad ah siiyo cidda ay khusayso si loo:-
   a) hakiyo maal-gashi kasta oo dheeri ah oo ay hay'adda maaliyadeed ku samaynayso shirkad hoos-timaadda;
   b) joojiyo awoodda shirkad milkiyad guud leh oo aan hawlgal ahayn ay ku leedahay hay'ad maaliyadeed;
   c) hakiyo wax kala iibsiga ka dhexeeya hay'adaha bah-wadaagta ah iyo hay'adda maaliyadeed; ama
   d) hakiyo ka qayb-galka qof kasta ee arrimaha hay'adda maaliyadda

5. Bankiga Dhexe ka hor inta uusan soo saarin tilmaamaha ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, gaarsiinayaa hay'adda maaliyadda, maamulkeeda fulinta, shaqaalaheeda, wakiilkeeda ama qof kale, ogeysiis ujeedkiisu yahay caddaynta sababaha, kuna waajibinaya hay'adda maaliyadda, maamulka fulinta, shaqaalaha, wakiilka ama qof kale soo bandhigidda sababta ay tahay in aan loo soo saarin tilmaamo, muddada lagu cayimay ogeysiiska gudaheed.
6. Hay'adda maaliyadeed ee hesha tilmaanta sida uu dhigayo qodobkan, waa in ay ugu hoggaansantaa muddada lagu cayimay, haddii loo baahdana waa in ay soo bandhigtaa caddaynta in ay sidaas samaysay.
7. Bankiga Dhexe wuxuu soo saarayaa awaamiir ku waajahan hay'adaha guud ahaan, si ay u gutaan waajibaadkooda ku xusan Sharcigan iyo gaar ahaan, iyadoo la eegayo:-
   a) halbeegyada ay tahay in ay u hoggaansanto hay'adda maaliyadeed marka ay ku guda-jirto ganacsigeeda Soomaaliya ama waddan kasta oo ay ku taal laan ama shirkad hoos-timaadda hay'adda maaliyadeed; iyo
   b) habraacyada ay tahay in ay raacaan hay'adaha maaliyadeed, si loo xaqiijiyo nidaam maaliyadeed oo bedqaba, badbaado leh, xasilloon oo hufan.

### Qodobka 77 aad:
### Awoodaha Bankiga Dhexe ee Joojinta Shaqooyinka Hay'ad Maaliyadeed

1. Haddii ay jiraan sababo macquula oo Bankiga Dhexe ku rumaysto in hawlaha hay'ad maaliyadeed ay waxyeelaynayaan xasilloonida, bedqabka, shaqada ama nidaamsanaanta hay'adda maaliyadeed ama hannaanka maaliyadeed, wuxuu joojinayaa dhammaan hawlaha ama hawlaha qaarkood ee hay'adda maaliyadeed.
2. Joojintu waxay dhaqan-gal ahaanaysaa muddada uu Bankiga Dhexe cayimo.
3. Ka dib markay dhammaato muddada lagu xusay faqradda (2) ee qodobkan, Bankiga Dhexe wuxuu qaadayaa tallaabo kasta oo kale si waafaqsan Sharciga.

### Qodobka 78 aad:
### Nidaamka Caymiska Dhigaalka

1. Bankiga Dhexe wuxuu dejinayaa isla markaana haynayaa, sida lagu qeexo Xeer-nidaamiyeyaasha, nidaam caymis dhigaal, kaasoo lagaga hor- tegayo khasaaraha ku iman kara qeyb ama gebi ahaan dhigaalka Bankiga ama hay'adaha maaliyadeed

ee kale ee qabta dhigaalka, isagoo u maraya hab sare u qaadaya xasilinta nidaamka maaliyadeed ee Soomaaliya iyo yaraynta u bandhignaantooda khasaaraha.

2. Iyadoo aan waxba loo dhimayn guud ahaan faqradda (1) ee qodobka, Xeer-nidaamiyeyaasha hoos yimaadda faqradda (1) ee qodobkan, ayaa qeexaya shuruudaha nidaamka oo ay ka mid yihiin: -
    a) maal-gelinta nidaamka caymiska dhigaalka, iyadoo loo marayo sanduuqa caymiska, kaasoo lagu salaynayaa khidmadaha laga qaado Bankiyada iyo hay'adaha kale ee qabta dhigaalka, waxaana lagu dallicayaa dhammaan kharashyada la xiriira bixinta dhigaalka, dib-u- qaabayn kasta oo lagu sameeyo hay'adaha maaliyadeed ee ay khusayso, si loo dhimo ama looga hortago khasaare halis ah oo ku yimaadda nidaamka ama in la bixiyo kharashka xaraashkooda;
    b) noocyada dhigaalka la daboolay iyo xadka daboolidda;
    c) qaddarka lacagta caymiska ee uu bixiyo banki kasta ama hay'ad maaliyadeed oo qabata dhigaalka
    d) awoodaha Bankiga Dhexe ee maamulidda nidaamka;
    e) maamulka nidaamka; iyo
    f) Shuruud kasta oo kale oo uu Bankiga Dhexe qeexo.

3. Bankiga Dhexe wuxuu horumarinayaa lacagta sanduuqa caymiska dhigaalka, isagoo ku salaynaya shuruudaha dib-u-bixin ee uu u arko inay ku habboon yihiin maamulka nidaamka caymiska dhigaalka.

## CUTUBKA TODDOBAAD
## TALLAABOOYINKA MAAMULKA IYO GANAAXYADA
### Qodobka 79 [aad]:
### Ganaaxyada ka Dhanka ah Day'ad Maaliyadeed

1) Haddii hay'ad maaliyadeed-
    a) ku xadgudubto ama ku guul-darraysato in ay u hoggaansantanto qodob ka mid ah Sharcigan, Xeer-nidaamiyeyaasha, habraacyada, digreetooyinka, shuruudda ama go'aannada uu soo saaray Bankiga Dhexe;
    b) ku hawlan tahay hab-dhaqan aan bedqad iyo badbaado lahayn ama dhaqdhaqaaqyo keeni kara khataro ku wajahan hay'adda maaliyadda ama nidaamka maaliyadeed, ama marka danaha dhigtayaasha ama deyn-

bixiyeyaasha ay si kale khatar u soo wajahdo; ama

c) ay ku sugan tahay dhimmanaan raa'sumaal; Bankiga Dhexe wuxuu ku soo rogayaa mid kasta oo ka mid ah ganaaxyada soo socda ee ka dhanka ah hay'adda maaliyadeed, iyadoo ku xiran culayska xadgudubka, khaladka ama xaaladda:-

I. digniin qoraal ah;
II. soo-saarista amar joojin iyo soo afjarid;
III. joojinta dhammaan taageerada Bankiga Dhexe;
IV. mamnuucidda ku dhawaaqidda sama bixinta faa'idada saamiga;
V. mamnuucidda laamo cusub ama rugo kale oo ganacsi;
VI. mamnuucidda ku lug yeelashadahawlo cusub ama ballaarinta hawlaha jira;
VII. joojinta amaahda, maal-gashiga, ama hawlaha fidinta amaahda;
VIII. mamnuucidda iibinta hantida ama ku kasbashada hanti dheeraad ah iibsi, kiro muddo gaaban ama kiro muddo dheer;
IX. mamnuucidda in la aqbalo dhigaal kale ama noocyada kale ee deymeed;
X. mamnuucidda bixinta nooc kasta oo mushaar ah, xirmooyinka shaqo ka-goynta, khidmadaha maamulka ama magdhowga kale ee ku meel- gaarka ah ee guddiga maamulka sare;
XI. mamnuucidda bixinta nooc kasta oo ka mid ah gunnooyinka mushaharka, khidmadaha maamulka ama magdhowga kale ee ku habboon maamulka fulinta iyo shaqaalaha;
XII. amridda in hay'adda maaliyadeed ay joogtayso xaddi sare oo taxaddar sida uu qeexo Bankiga Dhexe;
XIII. joojinta adeegyada wakiilka ama adeeg-bixiye dhinac saddexaad ah;
XIV. kala noqoshada shatiga; ama
XV. xayiraad kasta oo kale sida uu qeexo Bankiga Dhexe.

2) Marka la go'aaminayo xayiraadaha ku habboon in lagu soo rogo, Bankiga Dhexe wuxuu tixgelinayaa arrimaha soo socda-

a) Dabeecadda xukunka Sharcigan, Xeer-nidaamiyayaasha, habraacyada, digreetooyinka, shuruudda ama go'aanka lagu xadgudbay ama aan la raacin;
b) culayska ama khatarta xadgudubka;
c) dabeecadda ganacsiga ee hay'adda maaliyadeed;
d) tallaabo kasta oo sixitaan oo ay qaadday hay'adda maaliyadeed;
e) xaaladda maaliyadeed ee hay'adda maaliyadeed; ama
f) haddii hay'adda maaliyadeed ay diyaar u tahay baaritaan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

## Qodobka 80 aad:
## Sababaha kala noqoshada shatiga

1) Bankiga Dhexe wuxuu kala noqonayaa shatiga la siiyay hay'ad maaliyadeed wakhti kasta haddii hay'adda maaliyadeed:
   a) aanay bilaabin shaqada lix (6) bilood gudahood laga bilaabo taariikhda shatiga la siiyay;
   b) ay shaqada joojisay in ka badan hal bil iyadoo aan loo soo bandhigin sabab macquul ah Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.
   c) ku heshay shatiga hab ku salaysan xog been ah ama qaab khiyaano ah;
   d) ay si weyn ugu xadgudubtay qodobbada Sharcigan,
   e) Xeer- nidaamiyeyaasha ama habraacyada uu soo saaray Bankiga Dhexe;
   f) ay marar badan ku guul-darraystay in ay u hoggaansanaato shuruudo, tallaabooyin sixitaan ama amar kasoo baxay Bankiga Dhexe;
   g) ay buuxin weydo shuruudaha shatiga ee dhaqan-galka ah;
   h) ay bixin kari weydo deyntii lagu lahaa, lagala wareego maamulka ama la xaraasho hantideeda si deyn loogu gudo; ama ay soo saarto go'aan xiritaan oo ikhtiyaari ah;
   i) ay ku hawlan tahay lacag-dhaqid ama maal-gelinta argagixisada;
   j) ay ku kacdo hab-dhaqan aan bedqad iyo badbaado lahayn, ama fuliso hawlo wax u dhimaya ama awood u leh inay wax u dhimaan bedqabkaqaybta maaliyadda, ama qayb-hoosaadkeeda;
   k) ay u diiddo Bankiga Dhexe ama maamulkiisa fulinta ama wakiilkiisa awoodda u leh inay galaan rugahooda ganacsi, oo helaan buugaagta, xisaabaadka, nidaamka, dukumenti ama macluumaad.
   l) ay ku guul-darraysto in ay bixiso ganaax lacageed oo uu amray Bankiga Dhexe; ama
   m) ay shirkadda milkiyadda guud leh la kulanto musallafid, xayiraad sharci ama xaraash.
2) Shatiga lagama qaadi karo sida uu dhigayo qodobkan haddii aan hay'adda maaliyadda la siin ogeysiis maangal ah oo aan ka yarayn kow iyo labaatan maalmood (21) si ay u soo bandhigto sababta aan shatiga loogala noqon karin oo ay ku qoran tahay sababaha la doonayo in loogala noqdo.
3) Bankiga Dhexe waa in uu tixgeliyaa wixii la-tashi sharci ah ee hay'adda

maaliyadeed ka hor inta uusan go'aan ka gaarin.

Qodobka 81 aad:

Saamaynta ay Yeelanayso Shati kala Noqoshada

1) Hay'ad maaliyadeed oo shatiga lagala noqday waxa la gelinayaa xaraash khasab ah sida ku cad sharcigan iyo Xeer-nidaamiyeyaasha.
2) Iyadoo aan loo eegin faqradda (1) ee qodobkan, Bankiga Dhexe wuxuu Xeer-nidaamiyayaal ku caddaynayaa habraacyo kale oo lagu soo afjarayo ganacsiga hay’ad maaliyadeed oo aan lacag-qabasho samayn oo shatigii lagala noqday, taasoo dabciga ganacsigeeda iyo duruufteeda awgeed aysan waajib ku ahayn in lagu khasbo xaraash hanti sida ku cad Sharcigan.

## Qodobka 82 aad:
## Xayiraadaha ka Dhanka ah Xubnaha Guddiga Maamulka Sare, Maamulka Fulinta iyo Shaqaalaha

1) Haddii Bankiga Dhexe uu caddeeyo in xubin ka mid ah Guddiga maamulka sare, maamulka fulinta ama shaqaalaha hay'ad maaliyadeed uu-
   a) ku xadgudbay ama ku guul-darraystay in ay u hoggaansamaan qodobbada Sharcigan, sharci kale oo qoran, xeer-nidaamiyeyaal, habraacyo, digreetooyin, shuruud ama amar ka soo baxay Bankiga Dhexe; ama
   b) ku hawlan yahay hab-dhaqan aan bedqad iyo badbaado lahayn; Bankiga Dhexe wuxuu ku soo rogayaa mid ka mid ah xayiraadaha soo socota, iyadoo ku xiran culayska xadgudubka ama dhaqan-xumada.
      I. digniin;
      II. amar joojin iyo soo afjarid oo ku aaddan inay joojiyaan hawsha ama dhaqankaas;
      III. amar ah in uu bixiyo ganaax lacageed oo la qeexay iyada oo lacag- bixintu ay ka imanayso ilaha dhaqaale ee qofka;
      IV. ka joojinta xafiiska ama shaqada; ama
      V. ka qaadista xilka ama shaqada.

2) Qofna laguma soo rogi karo xayiraad haddii aan qofka la siin ogeysiis maangal ah oo aan ka yarayn kow iyo labaatan (21) maalmood si uu u caddeeyo sababta ay tahay inaan xayiraada loogu soo rogin, waana in lagu caddeeyaa sababaha loo-

cuskaday xayiraadda.

3) Bankiga Dhexe wuxuu tixgelinayaa la-tashi sharci oo kasta oo uu qofku sameeyo ka hor inta uusan go'aan ka gaarin.
4) Qofka laga eryay xafiiska ama shaqada sida ku cad faqradda (1) ee qodobkan, waa-
   a) in aanu xaq u yeelan in uu ka shaqeeyo hay'ad kasta oo maaliyadeed ugu yaraan shan sano laga bilaabo taariikhda la eryay; iyo
   b) in aan la shaqaaleysiin shanta sano ka dib iyada oo aan oggolaansho laga helin Bankiga Dhexe.

**Qodobka 83 aad:**
**Ganaaxyada Lacageed**

1) Bankiga Dhexe wuxuu Xeer-nidaamiyeyaal ku qeexayaa ganaaxa lacageed oo ay bixinayaan hay'adaha maaliyadeed, maamulka sare, shaqaalaha ama wakiillada hay'adaha maaliyadeed ee ku xadgudbay ama ku guul-darraystay inay u hoggaansamaan qodob kasta oo ka mid ah Sharcigan, xeer- nidaamiyeyaasha, habraacyada, digreetooyinka, shuruudaha ama go'aan uu soo saaray Bankiga Dhexe; ama ku hawlan yihiin hab-dhaqan aan bedqab iyo badbaado lahayn, waa in aan ganaaxiisu ka badan USD 100,000, (boqol kun oo dollar Markeynka ah ama Lacag Shilin Soomaali u dhiganta) marka ay hay'ad maaliyadeed tahay ama USD 5,000 (Shan kun oo dollar Markeynka ah ama Lacag Shilin Soomaali u dhiganta) marka uu shakhsi yahay, iyadoo ay ku xiran tahay culayska xadgudubka.
2) Bankiga Dhexe wuxuu ku soo rogayaa ganaax lacageed oo maalinle ah oo dhan USD 1,000 (kun oo doollar Markeynka ah ama Lacag Shilin Soomaali u dhiganta), hay'addii maaliyadeed ama USD100, ( boqo doollar Markeynka ah ama Lacag Shillin Soomaali u dhiganta) shakhsigii sii wada ku xadgudubka ama u hoggaansami la'aanta qodob kasta oo ka mid ah Sharcigan, Xeer-nidaamiyeyaasha, habraacyada, digreetooyinka, shuruudaha
3) ama go'aanka uu soo saaray Bankiga Dhexe, ka dib marka lagu wargeliyay xadgudubka.
4) Wax ganaax lacageed ah lama qaadi karo haddii aan hay'adda maaliyadeed ama qofka ay khusayso la siin ogeysiis maangal ah oo aan ka yarayn kow iyo labaatan (21) maalmood si ay u soo bandhigto sababta aan xayiraadda loogu soo rogi karin. hay'adda maaliyadeed ama qofkuna waa inay caddeeyaan sababaha aanu ugu

waajibin ganaaxa lacageed.

5) Bankiga Dhexe waxa i uu tixgelinayaa la-tashi kasta oo uu qofku sameeyo ka hor inta uusan go'aan ka gaarin.

6) Ganaaxa lacageed waa lagu oogi karaa iyadoo lagu beddelayo mid kale ama lagu kordhinayo xayiraad kasta oo kale oo lagu cayimay Sharcigan ama Xeer- nidaamiyeyaal.

7) Ganaax kasta oo lacageed oo la siinayo Bankiga Dhexe si waafaqsan Sharcigan ama Xeer-nidaamiyeyaasha-
   a) waxaa si toos ah u bixinaya hay'adda maaliyadeed ama qofka ay khusayso;
   b) Bankiga Dhexe wuxuu si toos ah uga saari karaa koonto kasta oo ay leedahay hay'adda maaliyadeed oo ka furan Bankiga Dhexe; ama
   c) Ganaaxa waxaa lagu soo ceshan karaa dacwad madani ah, iyadoo loo marayo wado kasta oo sharci ah.

## CUTUBKA SIDDEEDAAD
## QORSHAYAASHA SOO-KA-BASHADA EE HAY'ADAHA MAALIYADDA

### Qodobka 84 aad:
### Soo-gudbinta qorshaha soo kabashada

Marka ay baahidu keento, Bankiga Dhexe wuxuu farayaa hay'adda maaliyadeed in ay u soo gudbiso qorshe soo kabasho si loo ansixiyo.

### Qodobka 85 aad:
### Nuxurka qorshaha soo kabashada

1) Qorshaha soo kabashada wuxu ka koobnaanayaa waxyaabahan soo socda:
   a) tallaabooyinka ay tahay in la qaado wakhti cayiman si loo soo celiyo ama loo xoojiyo bedqabka maaliyadeed ee hay'ad maaliyadeed;
   b) samaynta sahay ama keyd;
   c) joojinta bixinta faa'idada saamiga;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

d) kordhinta ra'sumaalka waajibka ah ilaa heerka uu Bankiga Dhexe jaangoyn karo;

e) tallaabooyinka ay tahay in la qaado si dib loogu habeeyo qaab- dhismeedka shaqo ee hay'adda maaliyadda si kor loogu qaado tayada hawlaheeda iyo maamulkeeda; ama

f) tallaabo kasta oo kaleee loo baahan yahay si wax looga qabto meelaha gaabisku ka jiro.

2) Haddii uu Bankiga Dhexe ku qanci waayo ku filnaanshiyaha, macquulnimada ama wax-ku-oolnimada qorshaha dib-u-soo-kabashada, Bankiga Dhexe wuxuu;

a) tilmaamayaa tallaabooyinka dheeraadka ah ee ay tahay in lagu daro qorshaha soo kabashada; ama

b) diidayaa in la ansixiyo qorshaha soo kabashada, wuxuuna magacaabayaa maamule gaar ah.

## Qodobka 86 aad:
## Sababaha magacaabista maamule gaar ah

1. Bankiga Dhexe wuxuu u magacaabayaa mid ka mid ah maamulkiisa sare ama qof kasta oo kale maamule gaar ah oo ka tirsan hay'ad maaliyadeed sababaha soo socda awgood:

a) ku xad-gudub loo geysto qodobbada Sharcigan, Xeer- nidaamiyayaasha, awaamiirta ama go'aannada uu soo saaro Bankiga Dhexe;

b) u-hoggaansanaan la'aanta shuruud kasta oo ku xiran shatiga;

c) hay'adda maaliyadeed oo la kulanta culaysyo u baahan in ay kasoo kabato;

d) haddii hay'adda maaliyadeed ay ku guul-darraysato inay gudato waajibaadka maaliyadeed, marka muddeeda la gaaro oo ay ku jirto waajibka inay bixiso lacagta dhigtayaasha ama deyn-bixiyayaasha;

e) xaaladda maaliyadeed oo ay ku jirto ra'sumaalka waajibka ah, ama mid ka mid ah qeybaha xaaladda maaliyadeed oo sii xumaada;

f) hay'adda maaliyadeed oo ku guul-darraysata inay soo gudbiso qorshaha dib- u-soo-celinta ra'sumaalka ama ku guul-darraysata inay fuliso qorshaha dib-u- soo-celinta ra'sumaalka ee la ansixiyay;

g) khasaare dhacay kaas oo hoos u dhigaya ra'sumaalka waajibka ah ee hay'adda maaliyadda boqolkiiba konton ama ka badan;

h) hay'adda maaliyadeed oo ku kacda dhaqamo ganacsi oo khatar ah;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

i) hay'adda maaliyadeed oo looga shakiyo inay ku lug leedahay lacag- dhaqid ama maal-gelinta argagixisada;

j) Hay'adda maaliyadeed iyadaoo sheeganeysainay u-hoggaansantay shuruud kasta oo ku xusan Sharcigan, si bareer ah ama ka fiirsasho la'aan ah Bankiga Dhexe u siisa xog been-abuur ama marin-habaabin ah oo gaar ah;

k) Hay'adda maaliyadeed oo caqabad ku noqota hawlihii kormeerka ee Bankiga Dhexe;

l) hay'adda maaliyadeed oo caqabad ku noqota shaqadii hanti-dhawraha dibadda;

m) xaaladda hay'adda maaliyadeed oo halis gelin karta danaha dhigtayaasha;

n) shatigii la siiyay hay'adda maaliyadda oo lagala noqday; ama

o) sabab kasta oo kale oo u horseedi karta magacaabistiisa ama magacaabisteeda.

### Qodobka 87 aad: Awoodaha maamulaha gaarka ah

1) Maamule gaar ah ayaa awood u leh inuu-
   a) fuliyo dhammaan hawlaha maamulka ee hay'adda maaliyadda, iyadoo ay ku xiran tahay kormeerka Bankiga Dhexe;
   b) kala noqdo qof kasta, kalana wareego dhammaan hantida hay'adda maaliyadeed;
   c) hubin ku sameeyo ama hanti-dhawr geliyo hay'ad maaliyadeed iyo kooxdeeda;
   d) oggolaansho ka bixiyo go'aannada, tilmaamaha, macaamillada iyo hawlaha kale ee hay'adda maaliyadeed;
   e) dib u habeeyo hay'adda maaliyadeed;
   f) shaqaalaysiiyo ama shaqada ka cayriyo shaqaalaha;
   g) magaca hay'adda maaliyadeed ku soo saaro dukumeenti kasta ama agab kasta;
   h) magaca hay'adda maaliyadeed ku bilaabo ama ku difaaco dacwad kasta oo sharci ah;
   i) fuliyo awoodaha guddiga maamulka sare si wadajir ah iyo si gaar ah, oo ay ku jiraan awoodaha guddiga ee daadajinta maamulka iyo isticmaalka tiimbarada;
   j) iibiyo wax kasta oo ka mid ah hantida hay'adda maaliyadeed inta lagu guda-jiro habka caadiga ah ee ganacsiga hay'adda maaliyadeed;
   k) joojiyo ama xaddido bixinta waajibaadka hay'adda maaliyadeed, tallaabadaasna kama turjumi karto fal musallafid ama kicid;
   l) baabi'iyo heshiis kasta oo amaah ama deyn ah oo ay gasho hay'adda maaliyadeed ama wax bixin kasta haddii, ra'yiga maamulaha gaarka ah, uu

yahay in bixintan, deyntan ama amaahdani aysan ahayn mid sugan ama aan dib loogu bixin karin si waafaqsan shuruudaha, iyadoo oo maamulaha gaarka ahi sidaas ku qanacsan yahay ama haddii hay'adda maaliyadeed aysan haysan dhaqaalaha lagama-maarmaanka u ah fulinta waajibaadkeeda ku aaddan heshiis noocan ah ama haddii

aysan sidaas ku jirin danta hay'adda maaliyadeed;

m) joojiyo ama dhimo xaqa deyn-bixiyayaasha hay'adda maaliyadeed si ay u dalbadaan ama u helaan faa'ido lacag kasta oo ay ku leeyihiin hay'addaas maaliyadeed;

n) qabto shir-sannadeedka iyo shir kasta oo kale oo ay yeeshaan saamileyda hay'adda maaliyadeed ee uu qabo sharciga nidaaminaya shirkadaha;

o) kulan isugu yeero deyn-bixiyayaasha hay'adda maaliyadeed si loo xaddido deymaha hay'adda maaliyadeed;

p) xafido diiwaannada xisaabaadka oo diyaariyo warbixinnada maaliyadeed e sanadlaha ah, warbixinnada ku meel-gaarka ah iyo warbixinnada maaliyadeed ee sannadlaha ah ee ku meel-gaarka ah sida hay'adda maaliyadeed uu ku waajibinayo Sharcigan, xeer- nidaamiyayaasha, sharci kasta oo kale ama Bankiga Dhexe;

q) hubiyo u-hoggaansanaanta hay'adda maaliyadeed ee waajibaadkeeda si waafaqsan Sharcigan; iyo

r) sameeyo arinl ama walax kasta oo lagama-maarmaan u ah oo waxtar u leh fududaynta fulinta arimaha loogu idmaday qaybta sare.

2) Bankiga Dhexe wuxuu warqad magacaabis ah ku qeexayaa awoodaha iyo waajibaadka shaqo ee maamulaha gaarka ah iyo ujeeddada magacaabista, awoodaha iyo waajibaadka wax baa laga beddeli karaa ama waa ay kala duwanaan karaan, hadba sida Bankiga Dhexe u arko lagama-maarmaan.

3) Maamulaha gaarka ahi waa in uu si aan xad lahayn oo aan xaddidnayn u helaa xog kasta oo uu uga baahdo hay'adda maaliyadeed, guddiga maamulka sare, shaqaalaheeda, wakiilladeeda, bah-wadaagteeda ama qof kasta oo kale oo laga yaabo in uu xogta hayo, qofna waa in aanu marmarsiiyo ka dhigan ilaalinta sir mihnadeed si uu macluumaadka ugu diido maamulaha gaarka ah.

4) Hay'ad maaliyadeed, maamulkeeda fulinta, shaqaalaheeda, wakiilladeeda iyo bah-wadaagteeda waa inay taageero buuxda iyo wada-shaqayn buuxda siiyaan maamulaha gaarka ah si uu u fuliyo awoodihiisa una guto waajibaadkiisa, waana inay siiyaan dhammaan xogta, dukumentiyada, kartida aadanaha, agabka iyo wax kasta oo kale oo uu u baahan karo.

5) Marka shaqada maamulaha gaarka ah ay ka mid tahay bixinta oggolaansho la

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

xiriira go'aannada, tilmaamaha, wax kala iibsiga iyo hawlaha kale, Bankiga Dhexe ayaa ku qeexaya warqadda magacaabista, noocyada go'aannada, tilmaamaha, macaamilka iyo hawlgallada u baahan inuu ansixiyo maamulaha gaarka ah.

6) Go'aan kasta oo uu sameeyo, macaamil ama hawlgal uu fuliyo maamule gaar ah oo jebinaya awaamiirta gaarka ah ee Bankiga Dhexe ee faqradda (5) waxa waajib ah in uu baabi'iyo Bankiga Dhexe, hanti kasta oo lagu wareejiyay ama uu helayna waa la soo celinayaa ama dib ayaa loo gudayaa.

## Qodobka 88 aad:
## Maaraynta hay'ad maaliyadeed ee maamule gaar ah

1) Marka maamule gaar ah loo magacaabo inuu maamulo hay'ad maaliyadeed-
   a) Bankiga Dhexe wuxuu ku daabacayaa magaacista mareegtiisa;
   b) Bankiga Dhexe wxuu xaddidayaa ama laalayaa awoodaha maamulka sare, guddiga maamulka iyo golaha guud ee saamilayda hay'adda maaliyadda;
   c) awooddiisu waxa ay gaaraysaa bah-wadaagta iyo dhinacyada kale ee saddexaad ee la macaamilaya hay'adda maaliyadeed;
   d) wuxuu joojinayaa gebi ahaan ama qeyb ahaan, lacag kasta, wareejinta hantida, fulinta qandaraaska ama wax kala iibsiga ee hay'adda maaliyadeed haddii uu u arko inay lama-huraan tahay oo aan la fulin wax lacag, wareejin hanti, fulin qandaraas ama wax kala iibsi ah iyadoo aan oggolaansho laga helin maamulaha gaarka ah.

2) joojin kasta oo lagu sameeyo ama lagu fuliyo faqradda (1) (d) ee qodobkan waa in lagu daabacaa mareegaha hay'adda maaliyadeed.
3) Inta lagu jiro joojinta, deyn-bixiyeyaashu lama wareegi karaan wax hanti oo ay hay'ad maaliyadeed leedahay, dacwad ka dhan ah hay'adda maaliyadeedna uma gudbin karaan maxakamad sharci ah, dhammaan tallaabooyinka helidda ama dib u soo celinta deyn kasta oo ka imaanaysa hay'adda maaliyadeed waa in la joojiyaa.
4) Marka uu xilkiisa gudanayo, maamulaha gaarka ahi waa inuu si joogto ah ula tashadaa Bankiga Dhexa.

## Qodobka 89 aad:
## Waajibaadka maamulaha gaarka ah ee soo kabashada hay'ad maaliyadeed

1) Haddii xilka maamulaha gaarka ahi uu yahay dib-u-habaynta, dib-u- qaabaynta ama dib-u-soo-kabashada hay'ad maaliyadeed, waa inuu falanqeeyaa xaaladda

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

maaliyadeed ee hay'adda maaliyadda, qaab- dhismeedka maamul iyo xaaladaha ay ku shaqayso, wuxuuna uu u gudbinayaa Bankiga Dhexe warbixin la xiriirta rajada soo celinta bed-

qabka maaliyadeed ee hay'adda ama hagaajinta qaab-dhismeedkeeda shaqo.

2) Marka uu helo warbixinta maamulaha gaarka ah, Bankiga Dhexe wuxuu go'aan ka gaarayaa rajada laga qabo in dib loo soo celiyo bed-qabka maaliyadeed ee hay'adda maaliyadeed ama dib u habaynta maamulkeeda ama qaab-dhismeedka shaqo, ka horna wuxuu Bankiga Dhexe la kulmayaa Guddiga maamulka sare, maamulka fulinta, saamilayda iyo deyn- bixiyayaasha hay'adda.

## Qodobka 90 [aad]:
## Qaababka dib u soo kabashada hay'ad maaliyadeed

1) Haddii uu Bankiga Dhexe qabo ra'yiga ah in la soo celin karo bed-qabkii maaliyadeed ee hay'adda maaliyadeed ama ay tahay in la hagaajiyo qaab-dhismeedkeeda maamul ama xaaladdeeda shaqo, Bankiga Dhexe wuxuu ku wargelinayaa hay'adda maaliyadda, maamulkeeda fulinta, guddiga maamulka sare, saamilayda ama deyn-bixiyayaasha hababka soo kabashada ee la rabo in la qaato.
2) Hababka dib loogu soo kabayo hay'ad maaliyadeed ee uu Bankiga Dhexe adeegsanayo waxaa ka mid ah kuwan soo socda.
   a) baabi'inta qaar ama dhammaan deymaha caadiga ah ee hay'adda maaliyadeed;
   b) iibsashada dhammaan ama qayb ka mid ah hantida iyo deymaha hay'adda maaliyadeed ee hay'ad maaliyadeed oo kale;
   c) deymaha oo loo beddelo saamiyo;
   d) ka iibinta deymaha bixintoodu daahday hay'ad maal-gashi ama hay'ad kasta oo kale oo u qalanta sida uu u ansixiyo Bankiga Dhexe;
   e) ku biirinta ama la wareegidda hay'adda maaliyadeed ee liidata ee hay'ad maaliyadeed oo xooggan ama maaliyad ahaan fayo-qabta;
   f) dib-u-qaabeynta habka saami lahaanshaha, maamulka ama hawlgelinta hay'adda maaliyadeed;
   g) sameynta banki ku-meel-gaar si uu si ku-meel-gaar ah ula wareego banki liita;
   h) Taageeridda Bankiga Dhexe ee ku aaddan xaraash degdeg ah oo la geliyo hay'ad maaliyadeed iyadoo lagu salaynayo shuruudaha uu Bankiga Dhexe ku soo rogi karo oo ay ka mid noqon karaan bixinta dammaanad;
   i) Qaramaynta ama la wareegidda hay'ad maaliyadeed oo liidata oo ay

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Dawladdu samayso; ama

j) samaynta macaamil ama hawlgal kasta oo soo celin kara bed-qabka maaliyadeed ee hay'adda maaliyadeed;

3) Awoodaha Bankiga Dhexe ee farqaddiisa (2) ee qodobkan waxaa la fulinayaa iyadoo ujeeddadu tahay inuu qaado tallaabada ugu habboon xaalad kasta.
   a) inuu ilaaliyo oo kor u qaado xasilloonida nidaamka maaliyadeed ee Soomaaliya;
   b) inuu ilaaliyo oo kor u qaado kalsoonida ay shacabku ku qabaan xasilloonida nidaamka maaliyadeed ee Soomaaliya; iyo
   c) inuu ilaaliyo dhigtayaasha.

4) Bankiga Dhexe wuxuu Xeer-nidaamiyaal ku qeexayaa qaab-dhismeedka hirgelinta hababka soo kabashada ee lagu xusay qodobkan ama hababka kale ee dheeraadka ah ee uu cayimi karo.

**Qodobka 91$^{aad}$:**
**Raadsashada khubaro**

Marka uu gudanayo waajibaadkiisa, maamulaha gaarka ah wuxuu raadsanayaa adeegyada khubarrada oo ay ku jiraan xisaabiyayaasha, hanti-dhawrka dibadda iyo qareennada.

**Qodobka 92$^{aad}$:**
**Mushaharka maamulaha gaarka ah iyo khubarrada**

Gunnada maamulaha gaarka ah iyo kharash kasta ama kharashaad kasta oo uu si sharci ah u galo oo ay ku jiraan kuwa shaqaalaysiinta khabiir waxa bixinaysa hay'adda maaliyadeed.

**Qodobka 93$^{aad}$:**
**Dhammaystirka waajibaadka maamulaha gaarka ah**

1) Marka uu dhammeeyo shaqadiisa, maamulaha gaarka ah waa inuu u soo gudbiyaa warbixin dhammaystiran Bankiga Dhexe oo ka kooban talooyin gaar ah oo ku saabsan tallaabooyinka la qaadayo.
2) Maamulaha gaarka ah waxaa ku waajib ah ilaalinta sir-mihnadeedka ku saabsan xog kasta oo uu helo ee la xiriirta shaqadiisa.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 94 ^aad^:
## Iskaashiga hawlaha soo kabashada

Bankiga Dhexe wxuu la shaqaynayaa oo uu kaashanayaa masuuliyiinta ay khusayso ee gudaha iyo dibadda labadaba si loo xaqiijiyo soo kabashada nidaamsan ee hay'adda maaliyadeed.

## CUTUBKA SAGAALAAD
## XARAASH
## Qodobka 95 ^aad^:
## Xaraash ikhtiyaari ah

1) Hay'adda maaliyadeed waxay si ikhtiyaari ah u soo afjari kartaa hawlaheeda ganacsi.
2) Ma dhici karo xaraash ikhtiyaari ah iyadoo aan oggolaansho laga helin Bankiga Dhexe.
3) Codsiga oggolaanshaha xaraashka ikhtiyaariga ah waa in loo gudbiyaa Bankiga Dhexe iyadoo ay la socdaan dokumentiyada ama macluumaadka soo socda-
    a) qorshaha xaraashka ikhtiyaariga ah;
    b) faahfaahinta xaraashka la soo jeediyay;
    c) warbixin uu soo saaray hanti-dhawr madax-bannaan oo caddaynaysa in hay'adda maaliyadeed ay tahay mid is-bixin karta oo awood u leh inay si degdeg ah u xalliso dhammaan sheegashooyinka ka dhanka ah oo ay ku jiraan qaan-sheegashooyinka dhigtayaasha iyo deyn- bixiyeyaasha kale, hadba sida xaaladdu tahay.
4) Bankiga Dhexe wuxuu tixgelinayaa codsiga isagoo go'aan kaga gaarayaa lixdan maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda la helo macluumaadka oo dhammaystiran.
5) Ka hor inta aan la bixin oggolaanshaha xaraashka ikhtiyaariga ah, Bankiga Dhexe waa inuu ku qancaa in hay'adda maaliyadeed ay haysato hanti ku filan oo diyaar ah si dhakhso ah ugu debbarto dhammaan qaan- sheegashooyinka.
6) Bankiga Dhexe wuxuu ogolaanayaa isaga oo ku salaynaya shuruudaha lama-huraanka u ah in dhammaan qaan-sheegashooyinka ay si degdeg ah u xalliso hay'adda maaliyadeed oo ay ku jiraan deymanaha xaraashka ka dib.
7) Haddii xaraashka ikhtiyaariga ah aan loo fulin si waafaqsan qorshaha xaraashka ikhtiyaariga ah ee la ansixiyay, Bankiga Dhexe wuxuu la wareegayaa hay'adda

maaliyadeed isaga oo gelin kara xaraash khasab ah.

8) Bankiga Dhexe wxuu Xeer-nidaamiyayaal ku qeexayaa shuruudaha xaraashka ikhtiyaariga ah ee hay'adaha maaliyadeed guud ahaan ama noocyada gaarka ah ee hay'adaha maaliyadeed, iyadoo Xeer- nidaamiyayaashu ay faahfaahin doonaan-
   a) meeleynta, caddeynta iyo bixinta qaan-sheegashooyinka uu sameeyay xaraashaha;
   b) hawlaha uu ansixinayo Bankiga Dhexe;
   c) awoodaha xaraashaha;
   d) xal u helidda dhigaalka iyo lacagaha kale ee aan la sheegan; iyo
   e) arrin kasta oo kale ee lagama-maarmaan u ah suurtagelinta hirgelinta wax- ku-oolka ah ee xaraashka ikhtiyaariga ah iyo bixinta dhammaan sheegashooyinka.

## Qodobka 96 aad:
## Qorshaha xaraashka ikhtiyaariga ah

1) Qorshaha xaraashka ikhtiyaariga ah waa inuu ka kooban yahay-
a) warbixin dhammaystiran oo la xiriira hantida iyo qiimahooda;
   b) warbixin dhammaystiran oo la xiriira deymaha oo qeexaya qaddarka deyn kasta, nooceeda, iyo haddii lagu muransan yahay iyo in kale;
   c) faahfaahinta dhigtayaasha ama deyn-bixiyayaasha, sida hadba xaalku yahay, oo ay ku jiraan magacyadooda, dokumentiyada aqoonsiga iyo qaan-sheegashooyinkooda ka dhanka ah hay'adda maaliyadeed.

2) Marka la ansixiyo qorshaha xaraashka ikhtiyaariga ah, xaraashaha hay'adda maaliyadeed waa inuu toddobaad walba, saddex toddobaad oo xiriir ah, ku soo daabacaa wargeys si fiican ugu baahsan Soomaaliya iyo marin kasta oo kale ee ku habboon, oo ay ku jiraan mareegaha hay'adda maaliyadda, ogeysiis ku saabsan xaraashka ikhtiyaariga ah iyo ku wargelinta qaanlayaasha soo gudbinta qaan-sheegashooyinkooda ku aaddan xaraashaha.

## Qodobka 97 aad:
## Meelaynta iyo bixinta Qaan-sheegashada

1) Qof kasta oo danaynaya wuxuu dacwad u gudbinayaa xaraashaha saddex bilood gudahood laga bilaabo taariikhda la daabacay ogeysiiska ku wargelinta qaan-sheegtayaasha inay soo gudbistaan qaan- sheegashooyinkooda.
2) Xaraashuhu wuxuu ka codsanayaa codsade kasta soo gudbinta dokumentiyada taageeraya qaan-sheegashadiisa ama wxuu adeegsanayaa dokumentiyada ama macluumaadka gacanta ugu jira hay'adda maaliyadeed.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

3) Xaraashuhu waa inuu bixiyaa qaan-sheegashooyinka sida buuxda loogu qancay, loona caddeeyey.
4) Bixinta qaan-sheegashooyinka waa in loo sameeyaa loona kala horumariyaa sida soo socota -
   a) kharashaadka bixintooda uu waajibinaayo Sharcigani ama sharci kale oo qoran;
   b) lacag-dhigtayaasha;
   c) deyn-bixiyayaasha kale. iyo
   d) mushaharka iyo gunooyinka shaqaalaha.

## Qodobka 98 aad:
## Dhammaystirka xaraashka ikhtiyaariga ah

1) Xaraashuhu markuu dhammeeyo xaraashka ikhtiyaariga ah, waa inuu soo diyaariyo oo u soo gudbiyaa Bankiga Dhexe warbixin dhammaystiran oo faahfaahinaysa hawlihiisa, baaxadda fulinta qorshaha xaraashka ikhtiyaariga ah ee la ansixiyay, xallinta cabashooyinka, heerka maaliyadeed ee hay'adda maaliyadeed iyo wixii kale ee aan weli la xallin.
2) Bankiga Dhexe waa inuu turxaan bixiyaa warbixinta oo uu ka codsadaa xog ama caddayn dheeri ah xaraashaha, haddii uu ku qanco dhammaystirka hannaanka xaraashkana wuxuu fasaxayaa xaraashaha.

## Qodobka 99 aad:
## Sababaha xaraashka khasabka ah

1) Bankiga Dhexe wuxuu ku wargelinayaa hay'ad maaliyadeed xaraash khasab ah isagoo cuskanaya mid ka mid ah sababahan soo socda-
   a) qorshaha dib u soo kabashada oo ay diyaarisay hay'adda maaliyadeed oo aan la fulin ama khatar gelinaya danaha dhigtayaasha ama dayn- bixiyeyaasha kale, hadba sida ay xaaladdu tahay;
   b) hay'adda maaliyadeed oo ku xadgudubta Sharcigan ama Xeer-nidaamiyayaasha;
   c) hay'adda maaliyadeed oo awoodi weyda ama ay u badan tahay inay awoodi weydo, inay bixiso deymaheeda;
   d) hay'adda maaliyadeed oo ku guul-darraysata ama ay u badan tahay, inay ku guul-darraysato, inay u buuxiso shuruudaha ra'sumaalka waajibka ah;

waafaqsan Sharcigan;

e) maamulaha gaarka ah oo keena caddayn ah in xaraashiddu tahay lagama-maarmaan

f) hay'adda maaliyadeed oo musallifta, aysanna jirin suurtagalnimo soo kabasho;

g) hay'adda maaliyadeed ee ay ka soo farcantay ama shirkadda milkiyadda guud leh oo xaraash gasha;

h) Hay'adda maaliyadeed oo shatiga lagala noqdo; ama

i) hay'adda maaliyadeed oo fududaysa lacag-dhaqidda ama maal-gelinta argagixisada;

2) Marka lagu dhawaaqo xaraashka khasabka ah ee hay'ad maaliyadeed, Bankiga Dhexe waa inuu qaadaa tallaabooyin iyo tilmaamo lagu hubinayo ilaalinta hantida hay'adda maaliyadeed iyo ilaalinta danaha kuwa lacagta dhigtay iyo deyn-bixiyeyaasha, hadba sida uu markaas xaalku yahay.

3) Haddii uu jiro u qeybsane idman oo magacaawnaa, awoodaha u qebysanaha idman ee hay'adda maaliyadeed waa in la xayiro isla marka uu Bankiga Dhexe ku soo rogo hay'adda maaliyadeed xaraash khasab ah.

## Qodobka 100 aad:
## Hay'adda mas'uulka ah xaraashka khasabka ah

1) Bankiga Dhexe ayaa noqonaya hay'adda mas'uulka ka ah xaraashka khasabka ah ee hay'adaha maaliyadeed.

2) Bankiga Dhexe ayaa u magacaabaya xaraashe hay'ad maaliyadeed oo lagu soo rogay xaraash khasab ah, mar kastana wuxuu xilka ka qaadi karaa qofka loo magacaabay xaraashaha.

3) Awoodaha guddiga maamulka sare, maamulka fulinta iyo saamilayda hay'adda maaliyadeed waxa ay is-taagayaan marka la magacaabo xaraashe.

4) Mushahaarka xaraashaha iyo kharashyada kale ee la xiriira xaraashka khasabka ah ee hay'ad maaliyadeed waxa bixin doonta isla hay'adda maaliyadeed.

5) Inta lagu guda-jiro xaraashka, hay'adda maaliyadeed waa in ay hoos timaaddaa kormeerka Bankiga Dhexe.

6) Bankiga Dhexe waa inuu soo saaraa Xeer-nidaamiyayaal lagu maamulayo hab-socodka xaraashka khasabka ah, waana inuu fuliyaa dhammaan arrimaha khuseeya oo ay ku jiraan, laakiin aan ku koobnayn kuwan soo socda:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

a) waajibaadka iyo hawlaha xaraashaha;
b) meelaynta, caddaynta iyo bixinta qaan-sheegashooyinka;
c) la kulanka deyn-bixiyayaasha, lacag-dhigtayaasha iyo saamilayda;
d) awoodaha kormeerka ee Bankiga Dhexe;
e) warbixinta uu Bankiga Dhexe u soo gudbiyay xaraashuhu;
f) magacaabista khubarada;
g) kala mudnaanta bixinta qaan-sheegashooyinka;
h) ilaalinta diiwaannada iyo hubinta buugaagta xisaabaadka inta lagu guda- jiro hannaanka xaraashka;
i) arrin kasta oo kale oo lagama-maarmaan u ah habsami u socoshada xaraashka hay'adda maaliyadeed.

7) Bankiga Dhexe ayaa Xeer-nidaamiyeku go'aaminayaa hay'adaha maaliyadeed ee si khasab ah loogu xaraashayo si waafaqsan Sharcigan;
   a) Waa haddii bankiyada, bankiyada maal-gelimaha yar-yar iyo hay'adaha kale ee dhigaalka ay si toos ah ugu dabbaqmayaan xaraashka khasabka ah ee ku xusan Sharcigan.

## Qodobka 101 aad:
## Faafinta go'aanka xaraashka khasabka ah

Bankiga Dhexe waa inuu laba maalmood gudahood laga bilaabo maalinta uu hay'ad maaliyadeed ku amro xaraashka khasabka ah, ku daabaco mareegaha Internet-ka, ogeysiis ku saabsan xaraashka khasabka ah ee lagu soo rogay hay'adda maaliyadeed iyo magacaabista xaraashe.

## Qodobka 102 aad: Saamaynta magacaabista xaraashaha

1) Laga bilaabo taariikhda magacaabista xaraashaha-
   a) dhammaan bixinta deymaha nooc kasta oo ay yihiin ee ka soo baxa hay'adda maaliyadeed ee la siinayo qof kasta waa la joojinayaa; iyo
   b) wax fal ah oo ka dhan ah hay'adda maaliyadeed laguma qaadi karo, lama sii wadi karo ama lama dacwayn karo, wax xukun ahna laguma soo oogi karo hantida hay'adda maaliyadeed iyadoon fasax laga helin maxkamadda.
2) Lama iibin karo wax hanti ah oo ay leedahay hay'ad maaliyadeed ka dib taariikhda shaacinta xaraashka khasabka ah;
3) Wax kasta oo iib hanti ah oo ay leedahay hay'ad maaliyadeed oo la sameeyay lix bilood gudahood ka hor taariikhda xaraashka khasabka ah waxay noqonaysaa mid

aan waxba ka jirin oo ka dhan ah hay'adda maaliyadeed.

4) Dhammaan lacag-bixinta iyo falalka kale ee ay fuliso hay'adda maaliyadeed ee xaraashku ku socdo iyo lacag-bixinnada la siiyo hay'adda maaliyadeed ee xaraashka ku jirta, iyadoo lagu xad-gudbayo amarka la wareegidda ee saamaynaya, laguma dacwayn karo deyn-bixiyeyaasha hay'adda maaliyadeed.
5) Qodobkani ma khusayn doono hab kasta oo hanti ama lacag-bixin kasta ama heshiis loo fuliyay si waafaqsan xeerarka nidaamka lacag-bixinta iyo sida uu oggol yahay sharciyada khuseeya Nidaamka Lacag-bixinta.
6) Hay'adda maaliyadeed ee la xaraashayo waa in ay sii lahaato shakhsiyaddeeda sharciga ah ilaa laga dhammaynayo hannaanka xaraashka oo la baabi'inayosi waafaqsan sharciga la xiriira xiritaanka shirkadaha.
7) Dhammaan xiriirrada u Dhexeeya xaraashaha iyo dhinac saddexaad, xaraashuhu waa inuu ogeysiiyaa dhinacyada saddexaad in hay'adda maaliyadeed la xaraashayo.

## Qodobka 103 aad:
## Awoodaha xaraashaha

1) Xaraashuhu waa inuu lahaadaa awoodo uu:
   a) ku bilaabi karo dacwado sharci ah isaga oo ka wakiil ah hay'adda maaliyadeed ee xaraashku ku socdo ama ka difaaco dacwad kasta oo sharci ah;
   b) ku maaraynayo hay'adda maaliyadeed;
   c) ku helayo adeegyada Qareennada, Nootaayooyinka, Xisaabiyayaasha, qiimeeyayaasha iyo La-taliyayaasha kale ee Xirfadlayaasha ah;
   d) ku sameeyo tanaasul kasta ama heshiis kasta oo u dhexeeya hay'adda maaliyadeed iyo deyn-bixiyayaasha, dadka sheeganaya inay yihiin deyn-bixiyayaal ama shakhsiyaad sheeganaya inay leeyihiin qaan- sheegashooyin taagan, kuwo mustaqbalka ah ama qaan- sheegashooyin xaraash;
   e) ku sameeyo tanaasul ku saabsan codsiyada lacagaha, khataraha la xiriira codsiyada lacagaha, bandhigyada laga yaabo inay keeni karaan deymo, nooc kasta oo qaan-sheegasho oo taagan ama mustaqbalka ah oo laga yaabo inay keento sheegashada magdhaw iyo khataraha jira ama ay u badan tahay inay ka dhex jiraan hay'adda maaliyadeed ee xaraashka ku socdo iyo qolo saddexaad;
   f) ku ururiyo ama kusoo celiyo dhammaan hantida iyo qaan- sheegashooyinka kale ee hay'adda maaliyadeed
   g) ku iibiyo hantida guurtada ah iyo tan ma guurtada ah ee hay'adda maaliyadeed

isagoo u maraya xaraash dadweyne ama heshiis wadaag ah, hal ama dhowr qeybood ;

h) ku iibiyo dhammaan ama qeyb ka mid ah hantida hay'adda maaliyadeed si uu dib ugu gudo deyn-bixiyayaasha;

i) ku dhawaaqo inuu buray oo uu waxb-kama-jiraan yahay fal kasta oo ay samaysay hay'adda maaliyadeed muddo sannad gudaheed ah oo

ka bilaabmaysa taariikhda uu Bankiga Dhexe ka soo baxay go'aanka uu ku magacaabay xaraashaha, haddii ay hay'adda maaliyadda iyo dhinac saddexaad ogaayeen ama ay ahayd inay ogaadaan in falalkaasi ay khatar gelinayaan danaha hay'adda maaliyadeed, lacag- dhigtayaasheeda ama dayn- bixiyeyaasheeda, hadba sida xaalku noqdo;

j) saxiixo oo fuliyo dhammaan falalkaisagoo ka wakiil ah hay'adda maaliyadeed ee uu ku socdo xaraashku;

k) wakiil uga ahaado hay'adda maaliyadeed ee la xaraashayo dacwadaha musallifiddda ee la xiriira shirkad kale ama shirkad ay hay'adda maaliyadeed dan ku qabto;

l) soo saaro ama ayido, isagoo wakiil ka ah hay'adda maaliyadeed ee la xaraashayo, warqad kasta oo ganacsi oo ku dhex jirta xayndaabka awoodaha xaraashaha;

m) ururiyo lacagaha lagama-maarmaanka ah iyadoo la adeegsanayo dammaanadaha hay'adda maaliyadeed ee la xaraashayo;

n) magacaabo qof kasta oo isaga metalaya;

o) aqoonsado deynta shakhsiga ah ee saamile kasta, xubin ka mid ah guddiga maamulka sare iyo maamulka fulinta hay'adda maaliyadeed ee la xaraashayo;

p) meesha ka saaro faa'idooyinka la siiyo saamilayda;

q) heshiis ka galo, ka wada xaajoodo, oo soo gebagebeeyo fal kasta oo ay dani ugu jirto lacag-dhigtayaasha hay'adda maaliyadeed ee la xaraashayo;

r) qoraal wax kaga codsado qof kasta oo ah ama ahaa maamule fulin, maareeye, shaqaale ama hanti-dhawraha dibadda ee hay'adda maaliyadeed ee la xaraashayo, ama qof kasta oo kale oo haysta lacagaha ama hantida kale ee hay'adda maaliyadeed ee la baabi'inayo-

   I. caawiyo xaraashaha inta lagu jiro habka xaraashka;
   II. u bandhigo xaraashaha si uu u tixgeliyo wax kasta oo khuseeya xaraashka;
   III. soo saaro dokumenti kasta oo la xiriira hawlaha hay'adda maaliyadeed ee la xaraashayo.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

2) Xaraashuhu waa inuu baaritaan ku sameeyo -
   a) ka sal-gaaridda sababaha keenay musallifaadda;
   b) warbixin ku saabsan wax kala iibsiga kala duwan ee la xiriira:

      I. dhinacyada xiriirka la leh;
      II. ku xadgudubka shuruucda iyo Xeer-nidaamiyayaasha;
      III. dabeecadda wax kala iibsiga iyo hababka amaahinta, marka ay khuseyso; ama
      IV. siyaasadaha iyo habraacyada hay'adda maaliyadeed ee la la xaraashayo.

## Qodobka 104 aad:
## Gudbinta Qaan-sheegashooyinka

1) Shan iyo afartan maalmood ka dib markii la daabacay ogeysiiska ku saabsan xaraashka khasabka ah ee hay'ad maaliyadeed, xaraashuhu waa in uu ku daabacaa ogeysiis mareegaha hay'adda maaliyadda iyo kanaallada kale, isaga oo ka codsanaya dhammaan dadka qaba wax qaan- sheegasho ah oo ka dhan ah hay'adda maaliyadeed inay xaraashaha u soo gudbiyaan qaan- sheegashadooda.
2) Cabashada waa in loogu gudbiyaa xaraashaha lixdan maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda ogeysiiska codsiga ee xaraashaha ee lagu sheegay faqradda (1) laakiin xaraashuhu wuxuu kordhin karaa muddadan haddii uu u arko lagama-maarmaan.
3) Cabashada lagu soo gudbiyay faqradda (1) waa in lagu sheegaa-
   a) tafaasiil buuxda iyo faahfaahinta aqoonsiga ee dacwoodaha;
   b) nooca qaan-sheegashada iyo sida ay ku timid;
   c) wadarta cadadka la sheeganayo; iyo
   d) Faahfaahinta kale sida xaraashuhu ku shaacin karo ogeysiiska codsi soo gudbinta ama sida lagu caddayn karo Xeer- nidaamiyayaasha.

4) Nuqullada dkumenti kasta oo la heli karo oo taageeraya qaan-sheegasho kasta waa in loo gudbiyaa xaraashaha iyadoo lagu lifaaqay qaan- sheegashada.
5) Xaraashuhu wuxuu u oggolaanaya qaan-sheegtaha ku guul-darraystay in uu ku xareeyo dacwadddiisa mudada lagu cayimay farqada (2) inuu ku soo gudbiyo wakhtiga dheeraadka ah ee uu xaraashuhu cayimay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 105 aad:
## Lacag-siinta dhigtayaasha iyo deyn-bixiyayaasha kale

1) Lix bilood gudahood laga bilaabo taariikhda la guda-galay xaraashka khasabka ah ee hay'ad maaliyadeed, xaraashuhu waa inuu bilaabo bixinta

lacagta dhigtayaasha iyo deyn-bixiyayaasha, hadba sida xaalku yahay, isagoo u kala horraysiinaya sida soo socota-

a) lacagaha sharciga ah;
b) kharashyada xaraashka;
c) dhigtayaasha la sugay ama la ilaaliyay;
d) dhigtayaasha aan la sugin;
e) deyn-bixiyayaasha kale ee loo habeeyay si siman; iyo
f) mushaharka shaqaalaha iyo mushaharka saafiga ah ee ka baxsan wixii deyn ah ee hay'adda maaliyadeed lagu leeyahay; saamilayda.

2) Lacagaha la siiyo dhigtayaasha iyo deyn-bixiyeyaasha kale waa inay ahaaadaan kuwa laga saafi yeelay deymaha ay iyagu hay`adda maaliyadda ku leedahay.

## Qodobka 106 aad:
## Luminta u-qalmitaanka hawlaha maamul ee hay'ad maaliyadeed

Qof kasta, oo baaritaan ka dib lagu helo inuu ku xadgudbay Sharcigan, Xeer-nidaamiyayaasha, siyaasadaha ama habraaca hay'ad maaliyadeed oo la xaraashayo ama ka qayb-qaatay musallafkeedda wuxuu waayayaa xuquuqda in loo magacaabo maamulka ama maaraynta hay'ad maaliyadeed oo ka jirta Soomaaliya ugu yaraan shan sano ka dib taariikhda go'aankaas.

## Qodobka 107 aad:
## Guddiga maamulka sare waa inay bixiyaan deymaha hay'adaha maaliyadeed

1) Marka xaraashka hay'ad maaliyadeed uu muujiyo in hantida hay'addu aysan ku filnayn gudista deymaheeda, Bankiga Dhexe wuxuu, codsi kaga yimid xaraashaha, ka dalban karaa maxkamadda sharciga ah amar ku waajibinaya xubin ama xubno ka tirsan guddiga maamulka sare ama maamulka fulinta ee hay'adda maaliyadda inay bixiyaan qayb ama gebi ahaanba deymaha hay'adda maaliyadeed.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

2) Amarka maxkamada ee lagu xusay faqradda (1) wuxuu oggolaanayaa ku xiridda iyo iibinta hantida gaarka ah ee xubin ama xubnaha guddiga maamulka saare ama maamulka fulinta ee hay'adda maaliyadeed.

## Qodobka 108 aad:
## Muddada uu xaraashku soconayo iyo ka warbixinteeda

Muddada xil-haynta xaraashuhu waa laba sano, laakiin waxaa dib ugu cusboonaysiin kara Bankiga Dhexe ilaa inta lagama- maarmaanka ah.

## Qodobka 109 aad:
## Haynta iyo hubinta buugaagta xisaabaadka ee xaraashaha

1) Xaraashuhu waa inuu;
   a) hayo buugaag xisaabeed sax ah iyo diiwaanka maaliyadeed ee dhabta ah ee la xiriira xisaabaadka kuwaas oo si dhammeystiran oo run ah uga turjumaya arrimaha hay'adda maaliyadeed ee la xaraashayo;
   b) diyaariyo saddexdii biloodba mar warbixin xisaabeed muujinaysa xaaladda arrimaha hay'adda maaliyadeed ee la xaraashayo;
   c) hubiyo in dhammaan xisaabaadka iyo diiwaannada maaliyadeed ay u hoggaansamaan Hal-beegyada Warbixinta Maaliyadeed ee Caalamiga ah;
   d) 6-dii biloodba mar soo kiraysto adeegyada hanti-dhawrka si uu u hubiyo xisaabaadka hay'adda maaliyadda, si sharci ah; iyo
   e) u gudbiyo Bankiga Dhexe warbixinnada xisaabaadka la hubiyay.

2) Marka xaraashuhu ogaado dhammaan hantida hay'adda maaliyadeed, ama in badan oo ka mid ah, sida uu qabo, lana xaqiijiyay iyadoo aan loo baahnayn in la sii daahiyo xaraashka, oo uu u qeybiyo lacagaha dhammaan dhigtayaasha iyo deyn-bixiyayaasha, isaga ama iyadu waa in uu amraa ama amartaa diyaarinta warbixinnada maaliyadeed oo si kama- dambays ah loo hubiyay, una gudbiyo Bankiga Dhexe.

## Qodobka 110 aad:
## Fasixidda xaraashaha

1) Haddii uu Bankiga Dhexe ku qanco in warbixinnada maaliyadeed ee la hubiyay

ay soo bandhigayaan xaalad sax ah oo ku saabsan xaraashka, isla markaana uu ku qanco hawl-qabadkii xaraashaha, Bankiga Dhexe wuxuu fasixi karaa xaraashaha, isagoo ka qaadaya dhammaan mas'uuliyaddii saarnayd ee uu u gutay ama u sameeyay si daacadnimo ah taasi oo ku aaddan maamulka arrimaha hay'adda maaliyadeed; marka laga reebo in fasixidda noocaas ah lagu burin karo caddaynta in lagu helay khiyaano ama xakamaynta ama qarinta wax kasta oo xaqiiqo ah.

2) Fasixidda xaraashuhu waxay ka dhigan tahay in xilkii xafiiska laga qaaday.

### Qodobka 111 aad:
### Habka xaraashka kala- duwan

1) Bankiga Dhexe wuxuu Xeer-nidaamiyayaal ku qeexayaa hannaan gaar ah oo lagu soo afjaraayo ganacsiga qeyb gaar ah oo aan dhigaal ahayn ee hay'adaha maaliyadeed, isagoo tixgelinaya -
   a) dabeecadda ganacsi ee hay'adaha maaliyadeed ee hoos yimaadda qaybtaas;
   b) Dabeecadda danta deyn-bixiyayaasha ama dadka kale ee u baahan in la ilaaliyo;
   c) waxyeellada suurtagalka ah ee loo geysan karo hay'adda maaliyadeed ama dadka kale;
   d) Kharashka ay u badan tahay inuu ka dhasho khasab ku xaraashka hay'adda maaliyadeed.

2) Marka uu Bankigaa Dhexe u qoondeeyo hannaan u gaar ah qayb kasta oo ka mid ah hay'adaha maaliyadeed, habkaas waa in lagu dabbaqaa beddelka hannaanka khasabka ah ee xaraashka ee ku xusan Sharcigan.

## CUTUBKA TOBANAAD
## QODOBBO CIQAABEED
### Qodobka 112 aad:
### Dembiyada

1) Qof kasta oo sameeya ganacsi hay'ad maaliyadeed oo aan shati ka haysan Bankiga Dhexe wuxuu gelayaa dembi, waxana uu mutaysanayaa, marka lagu xukumo, xabsi aan ka badnayn 3(saddex) sano ama ganaax lacageed aan ka badnayn Shilin Soomali u dhigma 100,000, boqol kun dolarka mareykanka ah ama labadaba iyadoo ku xiran sida dembigu u kala culus yahay.

2) Qof kasta oo isticmaala ereyga "Banki", "Hay'ad Maaliyadeed", "Maaliyad" ama

erayada laga soo dhanbalay oo u isticmaala magaca shirkaddiisa, magac ganacsi, magac mareeg, calaamad ama xayaysiis, isaga oo aan haysan shati ka soo baxay Bankiga Dhexe wuxuu gelayaa dembi waxana uu muteysanayaa marka lagu xukumo xabsi aan ka badnayn1 (ha)l sano ama ganaax lacgeed aan ka badnayn Shilin Soomali u dhigma USD 20,000, laabtan kun dolarka mareykanka ah ama labadaba.

3) Qof kasta oo lacag dhigaal ah ka qaata xubnaha dadweynaha isaga oo aan haysan shati u fasaxaysa inuu qaato dhigaal lagu soo saaray Sharcigan wuxuu gelayaa dembi waxana uu mutaysanayaa, marka lagu xukumo, xabsi aan ka badnayn 3 (saddex) sano ama ganaax lacageed aan ka badnayn Shilin Soomali u dhigma USD 100,000, boqolkun dolarka mareykanka ah ama labadaba iyo in uu celiyo dhigaalkii uu qaatay.

4) Sidaas oo kale:

   a) Qof kasta oo ah xubin ka tirsan guddiga maamulka sare, maamulka fulinta, shaqaale, wakiil ama xiriiriye hay'ad maaliyadeed oo xog been ah siiya Bankiga Dhexe;
   b) Qof kasta oo ku lug yeesha maamulka ama qaadashada go'aannada ku saabsan hay'ad maaliyadeed iyadoo uu shaqo fariisin ku sameeyay bankiga Dhexe ama hay'adda sharciyeynta ama lagu dhawaaqay inuu shakhsi ahaan ku musallafay gudaha Soomaaliya ama dibadda;
   c) Qof kasta oo ka qayb-qaatay xubinnimada guddiga maamulka sare ama maamulka fulinta ee hay'ad maaliyadeed oo uu guud ahaan ama qayb ahaan uga qayb-qaatay musallafidda hay'adda maaliyadeed; Wuxuu gelayaa fal-dembiyeed waxaana uu ku mutaysanayaa, marka lagu xukumo, xabsi aan ka badnayn 3 (saddex) sano ama ganaax lacageed aan ka badnayn Shilin Soomali u dhigma USD 50,000, konton kun oo dolarka mareykanka ah ama labadaba iyadoo ku xiran sida dembigu u kala culus yahay.

5) Qof kasta oo:
   a) Aan u hoggaansamin shuruudaha xaraashaha inta lagu jiro xaraashka hay'ad maaliyadeed;
   b) Hor istaaga xaraashaha xilliga uu gudanayo waajibaadkiisa;
   c) Siiya xaraashaha war been ah ama si bareer ah u sheega hadallo been- abuur ah ama marin-habaabin ah;
      I. Wuxuu gelayaa dembi wuxuuna mutaysanayaa, marka lagu xukumo, xabsi

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
الصومال
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ
AQALKA SARE

aan ka badnayn 2 (laba) sano ama ganaax lacageed aan ka badnayn Shilin Somaali u dhigama USD 10,000, toban kun oo doolarka mareykanka ah ama labadaba iyadoo ku xiran sida dembiga u kala culus yahay.

6) Xubin kasta oo ka mid ah guddiga maamulka sare ee hay'ad maaliyadeed ama qof kasta oo kale oo u shaqeeya hay'ad maaliyadeed, kaas oo:
   a) ka jawaabi waaya codsiyada Bankiga Dhexe ama bixiya xog been- abuur ah;
   b) si uun u hor is-taaga hawlaha kormeerka ee Bankiga Dhexe;
   c) hor is-taaga hanti-dhawraha dibadda, maamulaha gaarka ah ama hawlaha xaraashaha ama diida inuu mid ka mid ah siiyo helitaanka dhammaan dukumeentiyada ama macluumaadka la xiriira gudashada waajibaadkiisa;
      I. Wuxuu gelayaa dembi waxaana uu mutaysanayaa, marka lagu xukumo, xabsi aan ka badnayn 2 (laba) sano ama ganaax lacageed aan ka badnaynShilin Soomaali u dhigma USD 30,000, sodon kun oo doolarka mareykanka ah ama labadaba.

7) Xubin kasta oo guddiga maamulka sare kamid ah oo ku guul-darraysta in uu u soo warbixiyo Bankiga Dhexe marka uu helo sabab uu ku aamino ama ay tahay inuu rumaysto in hay'ad maaliyadeed -
   a) Aysan awoodin in ay qabato ama sii waddo hawlaheeda ganacsi;
   b) Aysan awoodin, u muuqato ama ay u badan tahay mustaqbalka dhow inaysan awoodi doonin in ay daboosho dhammaan ama qayb ka mid ah waajibaadkeeda marka ammintooda la gaaro.
   c) Ama aysan awoodin inay buuxiso shuruudaha raasamaalka waajibka ah sida lagu qeexay Sharcigan ama Xeer- nidaamiyayaasha.
      I. Wuxuu gelayaa fal-dambiyeed waxaana uu mutaysanayaa, marka lagu xukumo, xarig aan ka badnayn hal sano ama ganaax lacageed aan ka badnayn Shilin Soomaali u dhigma USD 10,000, Toban kun oo doolarka mareykanka ah ama labadaba iyadoo ku xiran sida dembiga u kala culus yahay.

8) Hanti-dhawre kasta oo dibadda ah oo ku guul-darraysta inuu u warbixiyo Bankiga Dhexe marka uu ogaado in -
   a) in ay dhacday jebin weyn ama ku dhaqmid-la'aan la xiriirta qodobbada Sharcigan, Xeer-nidaamyayaasha, hab-raacyada, digreetooyinka, shuruudaha lagu soo rogay ama amarrada ka soo baxay Bankiga Dhexe ama ku xadgudubka sharciyo kale oo qoran oo khuseeya hay'ad maaliyadeed oo uu

hanti-dhawrku ku jiro;

b) In uu jiro dembi ku lug leh khiyaamo ama daacad-darro kale oo ay gashay hay'adda maaliyadeed ama mid ka mid ah maamulkeeda sare ama shaqaalaheeda;
c) inuu dhacay khasaare hoos u dhigaya ra'sumaalka waajibka ah, iyo qeyb kasta oo ka mid ah, ee hay'adda maaliyadda boqolkiiba konton ama ka badan;

9) Wuxuu gelayaa dembi, wuxuuna mutaysanayaa, marka lagu xukumo, xabsi aan ka badnayn 1 (hal) sano ama ganaax lacageed aan ka badnayn Shilin Soomaali u dhigma USD 20,000, labaatan kun oo doolarka mareykanka ah ama labadaba iyadoo ku xiran culayska dembiga.

10) Xubin kasta oo maamulka fulinta ah oo ku guul-darraysatay in ay ku wargeliso hay'ad maaliyadeed iyo guddiga maamulkeeda sare-

a) Dhammaan bah-wadaagteeda;
b) Dhammaan danaha ay ka leedahay hay'ad maaliyadeed ama bah- wadaagta hay'addaas maaliyadeed;
c) Iyo arrin kasta oo keeni kara dano is-diiddan haddii uu ka qayb- qaato habka go'aan-qaadashada ee arrintaas.

I. Wuxuu gelayaa dembi, wuxuuna mutaysanayaa, marka lagu xukumo, xabsi aan ka badnayn 1(hal) sano ama ganaax lacageed aan ka badnayn Shilin Soomaali u dhigma USD 10,000, toban kun oo doolarka mareykanka ah ama labadaba iyadoo ku xiran culayska dembiga.

11) Qof kasta oo Bankiga Dhexe ku helo in aanu ahayn ceeb ka-saliim si uu u noqdo ama u sii ahaado agaasime, maamul sare ama saamile muhiim ah oo ka tirsan hay'ad maaliyadeed, wuxuu gelayaa dembi haddii uu sharciyaysto in uu sii ahaado agaasime, maamul sare ama saamile muhiim ah oo ka tirsan hay'addaas maaliyadeed, wuxuuna mutaysan doonaa marka lagu xukumo, xabsi aan ka badnayn 1(hal) sano ama ganaax lacageed aan ka badnayn Shilin Soomaali u dhigma USD 20,000, labaatan kun oo doolarka mareykanka ah ama labadaba iyadoo ku xiran sida dembiga u culus yahay.

12) Maamulka fulinta, shaqaale ama wakiil kasta oo ka tirsan, hay'ad maaliyadeed iyo cid kasta oo si aan sharciga waafaqsanayn u soo bandhigta xog kasta oo uu helo isaga oo gudanaya waajibaadkiisa ama masuuliyadihiisa si waafaqsan Sharcigan, wuxuu gelayaa dambi marka la xukumo, wuxuuna mutaysanayaa, marka lagu xukumo, xabsi aan ka badnayn 1(hal) sano ama ganaax lacageed aan ka badnayn

Shilin Soomaali u dhigma USD 20,000, labaatan kun oo doolarka mareykanka ah ama labadaba iyadoo ku xiran culayska dembiga.

13) Qofka u hoggaansami waaya awaamiirta Bankiga Dhexe ee ku soo baxay Sharcigan ama Xeer-nidaamiyayaasha lagu soo saaray Sharcigan wuxuu gelayaa dembi, waxaana uu mutaysanayaa, marka lagu xukumo, xabsi aan ka badnayn 1 (hal) sano ama ganaax lacageed aan ka badnayn Shilin Soomaali u dhigma USD 10,000, toban kun oo doolarka mareykanka ah ama labadaba iyadoo ku xiran culayska dembiga.

14) Ciqaab kasta oo lagu fuliyo hay'ad maaliyadeed, maamulka fulinta, shaqaale ama wakiil kasta sida ku cad qodobkan waxa ay ka madax- bannaanaan doontaa ciqaab kasta ama tallaabo maamul oo kale oo uu Bankiga Dhexe ku soo rogi karo hay'ad maaliyadeed, maamulka fulinta, shaqaale ama wakiil sida uu dhigayo Sharcigan.

## CUTUBKA KOW IYO TOBONAAD
## QODOBBO KMA-DAMBEYS AH
### Qodobka 113 aad:
### Furitaanka, raridda, iyo xiritaanka rugaha ganacsiga

1) Hay'ad maaliyadeed waa in ay oggolaansho ka heshaa Bankiga Dhexe ka hor inta aan la furin, rarin ama la xirin goobaha ganacsiga ee soo socda-
   a) Xafiiska guud; iyo
   b) laamaha.

2) Bankiga Dhexe wuxuu diidayaa in uu ansixiyo furitaanka, raritaanka ama xiritaanka rug ganacsi sida ay dhigayso faqradda (1)-
   a) Haddii hawlgalku wax u dhimi karo tayada maamulka ama bedqabka maaliyadeed ee hay'adda maaliyadeed;
   b) Haddii ay khatar gelinayso danaha macaamiisha hay'adda maaliyadeed, ama
   c) haddii ay caqabad ku noqon doonto kormeerka wax-ku-oolka ah hay'adda maaliyadeed.

3) Bankiga Dhexe wuxuu Xeer-nidaamiyayaal ku qeexayaa shuruudaha furitaanka, raritaanka iyo xiritaanka rugaha kale ee ganacsiga.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

**Qodobka 114 aad:**
**Isticmaalka tignoolajiyadda marka ganacsiga la fulinayo**

1) Hay'adda maaliyadeed waxay isticmaali kartaa tignoolajiyad si ay u qabato ganacsigeeda ama u bixiso adeegyo.
2) Tignoolajiyadda lagu sheegay faqradda (1) waxa ku jira, balse aan ku koobnayn, isticmaalka-
   a) kanaallada elektaroonigga ah;
   b) makiinadaha xisaabaadka (ATM-yada);
   c) barta iibka (POS);
   d) kaararka sida kaararka iibsiga, kaararka deynta, kaararka keyda
   e) iyo qalabka kale ee lacag-bixinta;
   f) internet-ka;
   g) aaladaha gacanta sida taleefanka gacanta; iyo
   h) siyaabo ama habab kale sida uu Bankiga Dhexe ku ansixin karo codsiga hay'ad maaliyadeed.

3) Hay'adaha maaliyadeed waxa ay la heshiinaysaa bixiyayaasha adeegga lacag-bixinta, bixiyeyaasha qalabka lacag-bixinta ama hawl-wadeennada shabakadda adeegga teleefannada, si ay adeegyada u siiyaan macaamiishooda iyagoo isticmaalaya adeegyada ama qalabka ay bixiyaan dhinacyadan saddexaad.
4) Bankiga Dhexe wuxuu Xeer-nidaamiyayaal ku qeexayaa qaab- dhismeedka ama shuruudaha isticmaalka mid ka mid ah tignoolajiyadda ama kanaallada ku xusan faqradda (2), Xeer-nidaamiyayaashu waxa ay jidayn karaan shuruudo kala duwan oo loogu talagalay teknoolojiyadda kala duwan si waafaqsan qeexitaanka Bankiga Dhexe.

**Qodobka 115aad:**
**Xadididda faa'iidada laga soo ceshanayo Maalgalinta bixintoodu daahday**

1) Hay'ad maaliyadeed oo ganacsigeeda uu qayb ka yahay bixinta tashiilaadka maalgalinada waa in la xaddidaa waxa ay ka soo ceshan karto maalgalin- qaataha marka loo eego maalgalinada daahay ilaa qadarka ugu badan ee soo socda-
   a) haraaga aan la bixin ee raasamaalka marka maalgalinta noqoto mid daahday;
   b) ribxiga, iyadoo la raacayo heshiiska u dhexeeya maalgalin-qaataha iyo hay'adda maaliyadeed ama sharci kasta oo khuseeya, waana in aanu ka badnayn raasamaalka lagu leeyahay marka deyntu noqoto mid daahday; iyo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

c) kharashyada ku baxay dib u soo celinta wax kasta oo lagu leeyahay maalgalin-qaataha.

2) Haddii maalgalinta noqoto mid daahday ka dibna maalgalin-qaatuhu dib u bilaabo bixinta maalgalinta ka dibna maalgalinta noqoto mid daahday mar kale, xaddidaadda cutubyada (a) iyo (b) ee faqradda (1) waa in la go'aamiyaa iyada oo la eegayo markii ugu dambeysay ee amaahdu noqotay mid daahday

3) Xaddidaadda lagu sheegay qodobkani ma khusayso lacag ay amartay maxkamad sharci ah ilaa inta xaddigii hore dacwadda maxkamadda loogu sheegtay aanu ka hor imanayn xaddidaadaha ku xusan qodobkan.

4) Bankiga Dhexe waxa uu Xeer-nidaamiyayaal ku qeexayaa-
   a) wakhtiga maalgalinta noqoto mid aan la filayn in dib loo gudo marka loo eego qaybaha kala duwan ee hay'adaha maaliyadeed, nooca maalgalinta iyo maalgalin-qaataha; iyo
   b) habka xisaabinta iyo muujinta faa'iidada ama celceliska faa'idad.

## Qodobka 116 aad:
## Faragelinta celceliska faa'idada

1) Bankiga Dhexe waxa uu faragelinayaa oo uu nidaaminayaa celceliska faa'iidada ee ay hay'adaha maaliyadeed saartaan maalgalinta iyo dhigaalka maalgalinta mudaysan haddii ay dani ugu jirto macaamiisha ama dhaqaalaha. Marka uu faragelyo, Bankiga Dhexe waxa uu tixgelinayaa arrimaha soo socda:
   a) habsami u socodka heerka dhaqaalaha ee markaas;
   b) Baahida loo qabo in la dardargeliyo helista maalgelin ee inta badan shacabka oo ay ku jiraan ganacsatada yar-yar iyo kuwa dhexe, haweenka iyo dhallinyarada,;
   c) heerka maalgalinta bixinteedu daahday guud ahaan; ama
   d) baahida loo qabo in la kordhiyo qaadashada maalgalinta guud ahaan;

2) Faragelin kasta oo hoos timaada faqradda (1) waa in lagu daabacaa mareegta Bangiga Dhexe, waana in lagu qeexaa heerka faa'iidada ama celceliska faa'iidada la isticmaalayo ama qaacidada loo isticmaalayo in lagu xisaabiyo heerka ama celceliska faa'iidada.

## Qodobka 117 aad:
## Gelitaanka nidaamyada onlaynka ah

1) Hay'adda maaliyadeed waa in ay siisaa Bankiga Dhexe marin ammaan ah oo onlayn ah, isla markaana akhris-keliya ah si uu ula socdo, wax kala iibsiga wakhtiga dhabta ah iyo diiwaannada lagu hayo nidaamka.
2) Hay'adda maaliyadeed waa inay samaysaa hab ku habboon oo awood u siinaya Bankiga Dhexe inuu yeesho galaangalka ku xusan faqradda (1).
3) Iyadoo aan loo eegin faqradda (1), Bankiga Dhexe ama cidda uu magacaabayo waxa ay hanti-dhawr ku samaynayaan nidaamka rugta hay'adda maaliyadeed.

## Qodobka 118 aad:
## Xasaanadda

1) Ma jiro wax tallaabo ah oo laga qaadayo Xukuumadda, Bankiga Dhexe, Maamulka Fulinta, Shaqaale ama Wakiil ka tirsan Bankiga Dhexe ama cid kasta oo ku shaqaysa amarka Bankiga Dhexe oo ku aaddan wax kasta oo loo sameeyo ama looga tago si daacadnimo ku dheehan tahay oo ku aaddan maaraynta Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyayaasha; ama fulinta wax kasta oo

   awood ama waajibaad ah oo la oggolaaday ama looga baahan yahay sharci kasta oo kale oo la xiriira Sharcigan.
2) Bankiga Dhexe waa in uu magdhaw ka bixiyaa xubin ka tirsan maamulka fulinta, shaqaale, wakiil ama qof kale oo la magacaabay iyada oo lagu salaynayo kharashaadka lagu difaacayo falkiisa ama gefafka uga dhacay si daacadnimo ku jirto isaga oo gudanaya waajibaadkiisa.

## Qodoboka 119 aad:
## Shaqo-u-xilsaarasho

1) Hay'adda maaliyadeed waxay u xilsaaran kartaa qayb ka mid ah hawlaheeda shaqo ama waajibaadkeeda adeeg-bixiye dhinac saddexaad oo awood u leh, iyadoo la raacayo shuruudaha la qeexi doono.
2) Hay'adda maaliyadeed waa in aysan cidna u xilsaaran hawlaha maaraynta asaasiga ah ee soo socda-
   a) qorshaynta;
   b) qaab-dhismeedka hay'adda;
   c) maamulka iyo hanti-dhawrka; iyo

d) hawlaha go'aan qaadashada sida go'aaminta u hoggaansanaanta shuruucda iyo qawaaniinta dhaqangalka ah, go'aanka bixinta amaahda iyo maareanta galalka maal-gashiga ee hay'adda maaliyadeed.

3) Bankiga Dhexe wuxuu Xeer-nidaamiye ku qeexayaa shuruudo dheeraad ah oo ku saabsan shaqo u xilsaarashada oo ay ku jiraan hawlaha muhiimka ah ee hay'adda maaliyadeed ee ay tahay in uu ansixiyo Bankiga Dhexe, ka hor inta aan cid kale loo xilsaaran.

## Qodobka 120 aad:
## Isticmaalka wakiillada

1) Hay'ad maaliyadeed waxa ay qandaraas siin kartaa wakiil si uu u bixiyo adeegyo cayiman isagoo iyada metalaya.
2) Magacaabista hawl-wadeennada iyo wakiilladu waa inay waafaqdaa shuruudaha uu Bankiga Dhexe ku qeexo Xeer-nidaamiyayaasha.
3) Hay'adda maaliyadeed ayaa mas'uul ka ah wixii khasaare ama dhaawac ah ee soo gaara macmiilka ee ka dhasha falalka ama gefafka wakiilladeeda, haddii falalka ama gefafku ay la xiriiraan waajibaadka wakiilka ee ku aaddan macmiilka.
4) Qandaraaska u dhexeeya hay'ad maaliyadeed iyo wakiilku waa in uu noqdaa mid aan gaar ahayn, wakiilkuna waa inuu xor u yahay inuu bixiyo adeegyada hay'adaha kale ee maaliyadeed;
   a. Haddii wakiilku leeyahay awood, tashiilaad iyo agab uu si badbaado leh oo ku habboon ugu bixiyo adeegyada in ka badan hal hay'ad oo maaliyadeed.

## Qodobka 121 aad:
## Diiwaannada iyo keydka

1) Hay'adda maaliyadeed waa in ay haysaa diiwaanno dhammaystiran oo sax ah oo la xiriira hawlaheeda ganacsi.
2) Diiwaannada waa in lagu xafidaa qaab cayiman oo uu ku jiro foomka dhijitaalka ah ee ay hay'adda maaliyadeed go'aamin karto, ilaa inta diiwaannadaasi ay yihiin kuwo dib loo soo saari karo qayb ahaan iyo guud ahaanba, iyada oo asalkooda aan wax loo dhimayn.
3) Diiwaannada mar walba waa in si dhijitaal ah loogu keydiyaa wakhtigooda dhabta ah iyo meel aamin ah oo ka fog goobaha ganacsiga ee hay'adda maaliyadeed.

4) Dhammaan diiwaannada ay ku jiraan waraaqaha la xiriira ganacsiga hay'ad maaliyadeed waa in la hayaa ugu yaraan shan sano.

## Qodobka 122 aad:
## U hoggaansanaanta ka hortagga lacag-dhaqidda iyo la- dagaallanka maal-gelinta argagixisada

1) Hay'adda maaliyadeed, maamulkeeda fulinta, shaqaalaheeda, wakiilladeeda iyo adeeg-bixiyayaasha dhinac saddexaad ee shaqada loo xilsaartay waa in ay mar walba u hoggaansamaan sharciga iyo Xeer- nidaamiyayaasha jira ee la xiriira ka hortagga lacag-dhaqidda iyo la- dagaallanka maal-gelinta argagixisada.
2) Hay'adda maaliyadeed waa in ay yeelataa hab ku salaysan khatarta si ay wax uga qabato halista ka hortagga lacag-dhaqidda iyo la-dagaallanka maal- gelinta argagixisada ee la xiriira ganacsigeeda.
3) Iyada oo aan waxba loo dhimayn guud ahaan faqradda hore, hay'adda maaliyadeed waa inay-
    a) dhaqangelisaa hababka aqoonsiga macmiilka kaas oo xaqiijinaya in la sugo aqoonsiga dhabta ah ee macmiilka iyo dabeecaddiisa ganacsi;
    b) samaysaa habab ku habboon iyo tallaabooyinka xakamaynta gudaha ah oo la xiriira la socodka iyo hubinta macmiilka; iyo aqoonsiga dhaqdhaqaaqyada ganacsi ee shakiga leh;
    c) lagula xisaabtamaa oo ay mas'uul ka noqoto u hoggaansanaanta wakiilladeeda ee sharciga iyo Xeer-nidaamiyayaasha ka hortagga lacag- dhaqidda iyo la-dagaallanka maal-gelinta argagixisada ee jira;
    d) horumarisaa barnaamijka u hogaansanaanta ka hortagga lacag- dhaqidda iyo la-dagaallanka maal-gelinta argagixisada ee habboon, lana magacaabo madaxa u hoggaansanaanta sharciga ee maamulka si loo hubiyo u hoggaansanaanta sharciga iyo Xeer-nidaamiyeyaasha ka hortagga lacag- dhaqidda iyo la-dagaallanka maal-gelinta argagixisada;
    e) siisaa tababarro joogto ah shaqaalaha iyo wakiillada si loo hubiyo in la baray horumarrada cusub, lacagaha la dhaqay iyo farsamooyinka maal- gelinta argagixisada, hababka iyo isbeddellada;
    f) uga warbixisaa Xarunta Warbixinnada Maaliyadeed dhaqdhaqaaqyada shakiga leh iyo macaamilka lacagta caddaanka ah ee waaweyn iyo inay u hoggaansanto habraacyada ay soo saarto Xarunta Warbixinnada Maaliyadeed.

g) si joogto ah u samayso dib u eegis madax-bannaan oo ku saabsan waxtarka barnaamijka ka hortagga lacag-dhaqidda iyo la-dagaallanka maal-gelinta argagixisada; una gudbiso warbixinnadaas Bankiga Dhexe.

4) Dhammaan hay'adaha maaliyadeed ee shatiga haysta waa inay si wax-ku- ool ah u hirgeliyaan hannaan aqoonsi oo wax-ku-ool ah si waafaqsan shuruudaha uu Bankiga Dhexe jideeyay ee Xeer-nidaamiyayaasha, iyaga oo u adeegsanaya aqoonsiga macaamiishooda dukumentiyo la ansixiyay oo gaar ah ama hab kasta oo kale oo ku habboon, ha ahaato elektaroonig ama si kale; oo xaqiijinaya aasaaska aqoonsiga dhabta ah ee macaamiisha.

**Qodobka 123 [aad]:**
**Tartanka furan**

1) Hay'adaha maaliyadeed kuma lug yeelan karaan dhaqamo ka soo horjeeda tartanka furan, qandaraasyada, qabanqaabada ama hawlo ay u badan tahay inay si weyn u carqaladeeyaan tartanka suuqa.
2) Hay'adda maaliyadeed waa in aysan takoorin qof kasta oo adeeg u doonta marka laga reebo tuhunka la xiriira maal-gelinta argagixisada.

**Qodobka 124 [aad]:**
**Xaddidaadda isticmaalka ereyga "banki"**

1) Marka laga reebo qeexitaanka Sharcigan, qofna ma adeegsan karo erayga "banki" ama mid ka mid ah erayada kale ee la micne ah ee luuqad kasta ama magaca uu qofkaasi ganacsi kaga samaynayo Soomaaliya, ama uu ku sameeyo isagoo adeegsanaya astaan kasta oo caynkaas ah kuna qorto boor, warqad, xaashi, ogeysiis, xayaysiis ama qaab kasta oo kale.
2) Iyadoo la raacayo faqradda (3), cid aan banki ahayn, laguma aasaasi karo ama iskuma diiwaangelin karto magac ama summad, qofka aan banki ahaynna waa inaanu magaciisa u beddelin magac ama summad uu ku jiro ereyga "banki" ama mid ka mid ah asalkiisa oo ku qoran luuqad kasta.
3) Qodobkan laguma dabbaqi karo -
   a) Hay'ad lagu yagleelay sharci kasta oo kale;
   b) Hay'ad kasta oo lagu yagleelay ama aan lagu yagleelin, lagu sameeyay ama ka diiwaangashan waddan kasta oo aan Soomaaliya ahayn, iyadoo adeegsanaysa

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

magac ama summad ay ku jiraan ereyga "Bankiga" ama wax kasta oo la micne ah oo uu Bankiga Dhexe u fasaxay adeegsiga ereygaas ama erayada la micne ah oo la xiriirta yagleelidda ama ka shaqaynta bankiga ama xafiiska wakiilka ee Soomaaliya;

c) Qayb kasta oo hoos timaadda banki shati leh kaas oo uu Bankiga Dhexe u fasaxay inuu isticmaalo ereyga "banki" ama mid ka mid ah asalkiisa; iyo

d) Ururo guud oo ka kooban bankiyada ama shaqaalaha bankiga, oo loo sameeyay ilaalinta dantooda guud.

4) Iyadoo aan loo eegin faqradda (1), Bankiga Dhexe wuxuu, marka la tixgeliyo shuruudaha hadba sida loo arko inay ugu habboon yihiin, u oggolaanayaa shirkad banki oo milkiyad guud leh inay isticmaasho ereyga "banki" ama mid kasta oo ka mid ah erayada la micne ah ee luuqad kasta.

5) Isticmaalka ereyga "maaliyad" ama "hay'ad maaliyadeed" waxay u xaddidan tahay si la mid ah sida uu isticmaalka ereyga "banki" u xaddidan yahay marka la joogo Qodobkan, qofna ma isticmaali karo ereyga "maaliyadeed" ama "hay'ad maaliyadeed" ama asalkiisa haddii aan la raacayn shatiga uu bixiyo Bankiga Dhexe; ama marka laga reebo marka isticmaalku uu hoos imanayo arrimaha lagu xusay faqradda (3).

## Qodobka 125 [aad]:
## Koontooyinka fadhiidka ah

1) Koontooyinku wuxay noqdaan fadhiid haddii aan wax hawl ah lagu qabanin muddo lix bilood ah oo xiriir ah.

2) Wax kharash ah lagama qaadi doono koonto fadhiid ah.

3) Hay'adda maaliyadeed waa inay xirtaa koontooyinka macaamiisha ee fadhiidka noqday oo aan wax dhaqdhaqaaq ah lagu samaynin muddo laba sano ah oo xiriir ah.

4) Lacag kasta oo ku jirta koonto fadhiid ah waa in loo hayaa si aammin ah iyadoo la sugayo raadinta macmiilka ama dib u hawlgelinta koontada.

5) Hay'adda maaliyadeed waa in ay samayso dadaal kasta oo ay ku raadinayso macmiilka koontadiisu noqotay mid fadhiid ah, waana in ay isticmaalaan dhammaan xiriirrada la heli karo iyo kuwa la yaqaan oo ay ku jiraan dadka qaraabadiisa ah, dadaalladaasna waa in la diiwaangeliyaa.

6) Marka la furayo koontada, hay'adda maaliyadeed waa inay si buuxda u diiwaangelisaa xogta macmiilka sida qaraabada iyo dadka kale ee la

7) xiriira.
8) Hay'adda maaliyadeed waa in ay macaamiisheeda ku waajibiso in ay cusboonaysiiyaan diiwaankooda gaarka ah iyo faahfaahinta dadka lagala xiriirayo ugu yaraan labadii sannaba mar.
9) Bankiga Dhexe wuxuu soo saarayaa shuruudo dheeraad ah oo ku saabsan koontooyinka fadhiidka ah.

## Qodobka 126 aad:
## Lacagaha laga tagey

1) Lacagaha ku jira koontada macmiilka ee loo xiray fadhiidnimo awgeed waa in lagu wareejiyo Bankiga Dhexe iyada oo ay la socoto faahfaahinta milkiilayaasha lacagaha.
2) Lacag kasta oo lagu soo wareejiyo Bankiga Dhexe waxaa loo sii deynayaa milkiilaha ama wakiilkiisa sharciga ah marka la sugo aqoonsigiisa dhabta ah iyo sheegashadiisa lacagaha.
3) Bankiga Dhexe wuxuu samaynaya Xeer-nidaamiyayaal lagu maamulo la macaamilka iyo maaraynta lacagaha laga tegay.
4) Hay'adda maaliyadeed waxaa ka degaya mas'uuliyadda ka saaran lacagaha ay ku wareejisay Bankiga Dhexe, laakiin waxay mas'uul ka ahaan doontaa ku- darid kasta ama ka-dhaafid kasta oo la xiriirta lacagahaas ka hor inta aan lacagahaas lagu wareejin Bankiga Dhexe.

## Qodobka 127 aad:
## Sir-qarin

1) Hay'adda maaliyadeed iyo wakiilladeeda waa inay xafidaan macluumaadka sirta ah ee macaamiisha.
2) In kasta oo ay jirto mamnuucidda faqradda (1), haddana hay'adda maaliyadeed waa in ay siiso macluumaadka macaamiisha-
   a) macmiilka ay khusayso;
   b) Bankiga Dhexe;
   c) qof kale, oo haysta oggolaansho cad ama oggolaanshaha macmiilka ay khusayso oo qoraal ah;
   d) sida uu jideeyo sharci qoran, oo uu ku jiro Sharcigan; ama
   e) si ay amartay maxkamad awood u leh.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

## Qodobka 128 aad:
## Ilaalinta macaamiisha

1) Hay'adda maaliyadeed waa in ay meelmarisaa oo ay qaadataa siyaasad guud oo ku saabsan hawlgallada sugidda bedqabka, sirta macluumaadka macaamilka, adeeg la isku hallayn karo oo tayo leh, daah-furnaanta adeegyada, u xaqsooridda, ka falcelinta degdegga ah ee cabashooyinka, weyddiimaha iyo xallinta degdegga ah ee cabashooyinka.
2) Bankiga Dhexe wuxuu horumarinayaa oo uu dhiirigalinayaa barnaamijyada iyo hindisayaasha, isagoo la kaashanaya hay'adaha maaliyadeed ama hay'adaha metalaya hay'adaha maaliyadeed, si loogu baraarujiyo oo wax looga baro macaamiisha ama macaamiisha suurtagalka ah ee badeecadaha iyo adeegyada maaliyadeed.
3) Hay'adda maaliyadeed waa inay magacawdo maamul sare oo wax ka qabta cabashooyinka iyo waxyaaabaha ay tirsanayaan macaamiishoodu.
4) Macmiil kasta oo ka tirsan hay'ad maaliyadeed oo ka xumaada fal kasta ama tacaddi kasta ee uu kala kulmo hay'adda maaliyadeed wuxuu u caban karaa hay'adda maaliyadeed si ay wax uga qabato.
5) Bankiga Dhexe wuxuu Xeer-nidaamiye ku qeexayaa hannaan dhammaystiran oo ku saabsan ilaalinta macaamiisha.

## Qodobka 129 aad:
## Xayeysiiska marin-habaabinta lacag-dhigashada

1) Hay'ad maaliyadeed ama qof kale midna ma samayn karo xayeysiis, buug- yare, wareegto ama dukumeenti kale oo uu qof ku martiqaadayo inuu sameeyo lacag-dhigasho kaas;
   (a) si been-abuur ah u muujinaya inuu oggolaansho u haysto inuu lacag qabto ama uu shati u haysto si waafaqsan Sharcigan; ama
   (b) lagu soo saaray si ka soo horjeedda tilmaam kasta oo uu bixiyay Bankiga Dhexe oo ku xusan faqradda (2).
2) Bankiga Dhexe wuxuu wakhti kasta farayaa qof kasta in uu ka noqdo, wax ka beddelo ama ka waantoobo soo saarista xayeysiis, buug-yare, wareegto ama dukumeenti kale oo la xiriira lacag-dhigasho oo go'aankiisa uu u arko in uu yahay mid marin-habaabin ah.

**Qodobka 130 aad:**

**Dokumentiyada elektaroonigga ah, isgaarsiinta iyo macluumaadka**

1) Bankiga Dhexe, hay'ad maaliyadeed, macmiil, wakiil ama qof kasta oo kale oo uu saameynayo ama uu khuseeyo Sharcigani wuxuu u isticmaalayaa hab elektaroonig ah si uu-
   a) u curiyo u soo saaro dokumenti, diiwaangelin ama macluumaad kasta oo kale;
   b) macluumaad ugu gudbiyo qof;
   c) xiriir uga helo qof; ama
   d) u keydiyo dukumeenti, diiwaan ama macluumaad kale;

2) Isticmaal kasta oo dukumeenti elektaroonig ah, isgaarsiin ama macluumaad waa inay buuxiyaan arrimaha soo socda-
   a) asalka dukumeentiga, isgaarsiinta ama macluumaadka in la xifdiyey mar walba;
   b) asalka iyo qoraaga dukumeentiga, isgaarsiinta ama macluumaadka in si xooggan loo sugay;
   c) Dhammaan khataraha la xiriira dukumeentiyada elektaroonigga ah, isgaarsiinta iyo macluumaadka in la aqoonsaday, la qiimeeyay, la maareeyay, la xakameeyay oo la yareeyay;
   d) dukumeentiga, isgaarsiinta ama macluumaadka in lagu keydiyay hab si habboon loogu soo celin karo qaabkeedii asalka ahaa markii loo baahdo;
   e) farriimaha elegtaroonigga ah inay ku jiraan tafaasiil buuxa oo ku saabsan isha, qoraaga, taariikhda iyo wakhtiga la daabacay; iyo qaataha ama meesha uu u socdo; iyo
   f) Shuruudaha kale ee uu Bankiga Dhexe qeexo.

3) Dukumeentiyada elektaroonigga ah, diiwaannada, isgaarsiinta ama macluumaadka iyo soosaarkooda waa in lagu oggolaadaa caddayn maxkamad ama caddaaladeed halkaas oo dokumeentiyada, diiwaannada, isgaarsiinta ama macluumaadka looga baahan yahay.
4) Ilaa inta la hubinayo dukumeentiyada elektaroonigga ah, diiwaannada, isgaarsiinta ama macluumaadka inay yihiin qaabkoodii asalka ahaa ama la soo saari karo ama lagu soo celin karo qaabkoodii asalka ahaa.
5) Bankiga Dhexe wuxuu Xeer-nidaamiyayaal ku qeexayaa shuruudo dheeraad ah oo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ku saabsan dukumeentiyada elektaroonigga ah, isgaarsiinta iyo macluumaadka.

### Qodobka 131 aad:
### Habka xallinta cabashooyinka

1) Hay'adda maaliyadeed waa inay diyaarisaa hab fudud, habboon, oo la heli karo oo cabashooyinka lagu gudbiyo.
2) Cabashooyinka ama murannada waa in si degdeg ah loo xalliyaa, haddii aanay taasi suurtagal ahayn, waa in lagu furdaamiyo wakhti macquul ah ama muddada kale ee uu Bankiga Dhexe qeexo.
3) Macmiilka waa in si joogto ah loogu wargeliyaa horumarka laga sameeyay xallinta cabashadiisa.
4) Hay'adda maaliyadeed waa inay xallisaa cabashada si uu maacmiilku ugu qanco, haddii macmiilku aanu ku qanacsanayn natiijada xallinta, wuxuu isticmaalayaa jidadka kale ee la heli karo oo ay ku jirto in isla cabasho la mid ah uu u gudbiyo Bankiga Dhexe.

### Qodobka 132 aad:
### Xalliyaha cabashooyinka

1) Marka uu maqan yahay wakiilka qaranka ee ilaalinta macaamiisha, Bankiga Dhexe wuxuu u magacaabayaa mid ka mid ah maamulkiisa fulinta inuu noqdo xalliyaha cabashooyinka hay'adaha maaliyadda.
2) Bankiga Dhexe waa inuu dejiyaa Xeer-nidaamiye kasta oo loo baahdo oo-

   a) Ku saabsan hawlaha, waajibaadka iyo awoodaha xalliyaha cabashooyinka; iyo
   b) Wax ka qabashada cabashooyinka ka dhanka ah hay'adaha maaliyadeed ee macaamiishooda.

### Qodobka 133 aad:
### Warbixin-siinta Bankiga Dhexe

1) Bankigu waa inuu Bankiga Dhexe uga warbixiyaa, iyada oo keli ah iyo iyagoo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

wadajir ahba, xaaladdiisa maaliyadeed, waxqabadkiisa iyo khatartiisa, marka loo baahdo iyo si joogto ahba.

2) Warbixinnada lagu xusay faqradda (1) waa inay bixiyaan macluumaadka sida hantida iyo deymaha ku jira ama aan ku jirin xaanshida xisaabxirka, faa'iidada iyo khasaaraha, ku filnaanta raasamaalka, ku filnaanta xaraashka, u bandhignaanta khatarta, urursanaanta khatarta (oo ay ku jiraan qaybta dhaqaalaha, juqraafiga iyo lacagta), tayada hantida, bixinta deynta luntay, wax kala iibsiga dhinacyada xiriirka leh, heerka faa'idada deynta, khatarta suuqa iyo arrimaha kale sida Bankiga Dhexe uu ku qeexo Xeer- nidaamiyayaasha.

3) Bankiga Dhexe wuxuu Xeer-nidaamiye ku qeexayaa warbixinnada hay'adaha kale ee maaliyadeed looga baahan yahay in ay u soo gudbiyaan marka uu dalbado Bangiga Dhexe iyo wakhtiyo cayiman oo joogto ah.

## Qodobka 134 aad:
## Wadaagga macluumaadka amaahda

1) Hay'adaha maaliyadeed ee Sharcigan ku shatiyaysan waa in ay wadaagaan macluumaadka daynta ee togan iyo kuwa taban ee macaamiishooda si waafaqsan Xeer-nidaamiyayaasha.

2) Bankiga Dhexe wuxuu shati u siinayaa xafiisyada tixraaca amaahda si ay u ururiyaan, u lafaguraan oo ula wadaagaan macluumaadka deynta macaamiisha hay'adaha maaliyadeed iyo qof kasta oo kale oo idman.

3) Macmiilka waa in la siiyaa-
   (a) ogeysiis ka hor inta aan xogta deynta loo gudbin xafiiska tixraaca amaahda; iyo
   (b) ogeysiis ka dib markii macluumaadkiisa amaahda loo gudbiyo hay'ad.
   (c)

4) Bankiga Dhexe waa in uu sharciyeeyaa hab-dhismeedka wadaagga macluumaadka amaahda iyo hawlgelinta xafiisyada tixraaca amaahda.

## Qodobka 135 aad:
## Isku- xiranka

1) Hay'adda maaliyadeed waa inay isticmaashaa nidaamyo tignoolajiyadeed oo

awood u leh inay la shaqeeyaan nidaamyada kale ee dalka iyo kuwa caalamiga ah, si loo fududeeyo wada-shaqayn buuxda.

2) Hay'adda maaliyadeed waxa ay la geli kartaa wada-shaqayn ama heshiis isku- xiran hay'adaha kale ee maaliyadeed si ay awood ugu siiso wax kala

iibsiga dhammaan shabakadaha, nidaamyada ama goobaha ganacsiga iyada oo aan wax xaddidnaan ama xanibaad ah jirin.

3) Bankiga Dhexe wuxuu soo saarayaa tilmaamo ku saabsan hirgelinta wada-shaqaynta noocan ah.

## Qodobka 136aad: Hal-abuur

1) Si loo horumariyo hal-abuurka iyo horumarka nidaamka maaliyadeed, hay'adda maaliyadeed waxa ay maal-gelinaysaa cilmi-baaris ay ku soo saarto badeecooyin ama adeegyo cusub si gaar ah ama iyadoo kaashanaysa cid kale, oo loo marayo hab tijaabo ah ama "Tijaabi oo Baro", kaasoo aan ku dabbaqmi doonin qodobbada Sharcigan iyo Xeer- nidaamiyayaasha inta lagu jiro marxaladda tijaabada.
2) Iyadoo lala tashanayo lagana helayo oggolaansho Bankiga Dhexe, lana fulinayo shuruudaha uu jideeyo Bankiga Dhexe, hay'adda maaliyadeed waxay degaan la ilaaliyay ku samayn kartaa tijaabo horudhac ah oo ku saabsan badeecad ama adeeg cusub, waana inay la socodsiisaa Bankiga Dhexe horumarka laga gaaro tijaabadaas.
3) Khatar kasta oo la xiriirta badeecadda ama adeegga hal-abuurka leh ee la tijaabinayo waa in la aqoonsadaa, la qiimeeyaa, la maareeyaa, lana yareeyaa, warbixinnada qiimaynta khatarta leh waa in loo gudbiyaa Bankiga Dhexe.

## Qodobka 137 aad:
## Fasaxa bankiga

1) Bankiga Dhexe wuxuu markasta ogeysiis ku bixinayaa boggiisa internet- ka, marka uu ku dhawaaqayo xilliga fasaxa bankiga.
2) Hay'adda maaliyadeed waa in aanay dadweynaha u furnaan maalinta fasaxa bankiga.
3) Fasaxa bankiga ee lagu xusay faqradda (1) ee qodobkan khasab maahan uu noqdo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

fasax guud, nuxurka qodobkan looma qaadan karo in uu saamaynayo qodobbada xeer kasta oo dhaqangal ah ee la xiriira maalmaha ciidaha.

4) Iyada oo aan waxba loo dhimayn faqradda (1), Bankiga Dhexe wuxuu marka uu codsi uga yimaado hay'ad maaliyadeed ama qayb ka mid ah hay'ad maaliyadeed, haddii uu ku qanco in ay lagama-maarmaan tahay, u oggolaanayaa hay'adda maaliyadda ama laanta inay xirnaanto maalin ama gelin ka mid ah, ama maalmo sida lagu qeexo oggolaanshaha, iyadoo la raacayo shuruudaha iyo shuruucda uu Bankiga Dhexe jideeyo.

## Qodobka 138 aad:
## Ururka hay'adaha maaliyadeed

1. Hay'adaha maaliyadeed waxay samayn karaan ururro ujeeddkoodu yahay-

   a) horumarinta naftooda iyo ganacsigooda;
   b) dejinta xeer-dhaqan dhammaan hay'adaha maaliyadeed ee hoos yimaadda qayb gaar ah ay ku dhaqmi doonaan;
   c) fududaynta qabanqaabada wada-shaqaynta dhexdooda ah ama midda ay la leeyihiin hay'adaha kale ee maaliyadeed;
   d) horumarinta halbeegyada warshadaha iyo tilmaamaha loogu talagalay bixinta adeegyada badbaadada, bedqabka iyo hufnaanta leh;
   e) qaadashada halbeegyada caalamiga ah iyo hababka ugu wanaagsan ee la xiriira ganacsigooda;
   f) uga qareemidda danahooda Bankiga Dhexe ama hay'ad kale oo dawladeed ama urur kale;
   g) horumarinta qaab-dhismeedka xallinta khilaafaadka ee looga dan leeyahay furdaaminta khilaafaadka dhexdooda ah; iyo
   h) qaadashada siyaasadaha iyo hab-dhaqanka wadajirka ah ee ku wajahan ilaalinta macaamiisha.

## Qodobka 139 aad:
## Xiriirka Shuruucda kale

Haddii ay is-khilaafaan qodobbada Sharcigan iyo qodobbada xeer kale oo qoran oo dhaqangal u ah hay'ad maaliyadeed oo Sharcigani shati siiyay, qodobbada Sharcigan ayaa lagu dhaqmayaa ilaa xadka khilaafka sharciga;

## Qodobka 140 aad:
## Qoraallada farsamada

Bankiga Dhexe wuxuu wareegto ku soo saarayaa qoraallo farsamo si uu u sharraxo eray kasta ama jumlad kasta oo lagu isticmaalay Sharcigan ama Xeer-nidaamiyayaasha si loo fududeeyo maaraynta Sharciga iyo Xeer- nidaamiyayaasha.

## Qodobka 141 aad:
## Soo saarista wareegtooyinka iyo habraacyada

1) Bankiga Dhexe wuxuu soo saarayaa wareegtooyin ku saabsan ku dhaqanka ama hirgelinta qodob kasta oo ka mid ah Sharcigan ama Xeer- nidaamiyayaasha.
2) Bankiga Dhexe wuxuu soo saarayaa habraacyo khuseeya-
   a) tallaabooyinka ay tahay inay qaadaan hay'adaha maaliyadeed ee la xiriira ku dhaqanka ama hirgelinta Sharcigan iyo Xeer- nidaamiyayaasha;
   b) halbeegyada ay tahay in ay u hoggaansanto hay'adda maaliyadeed marka ay ku guda-jirto ganacsigeeda Soomaaliya ama waddan kasta oo ay ku taal laan ama qayb ka mid ah hay'adda maaliyadeed;
   c) tallaabooyinka iyo halbeegyada ay tahay in ay raacaan hay'adaha maaliyadeed si loo hirgeliyo nidaam-maaliyadeed xasilloon, bedqaba, oo hufan; ama
   d) qaadashada halbeegyada caalamiga ah, mabaadi'da ama dhaqammada la xiriira ganacsiga hay'adaha maaliyadeed.

3) habraac kasta oo lagu soo saaro Sharcigan ama Xeer-nidaamiyayaal wuxuu noqonayaa mid ansax ah oo la fulin karo, haddii la jebiyo ama aan la raacin waxaa lagu mutaysanayaa ganaax lacageed ama tallaabo kale oo maamul sida uu go'aamiyo Bankiga Dhexe.

## Qodobka 142 aad:
## Xeer- nidaamiyayaasha

1) Bankiga Dhexe wuxuu samaynayaa Xeer-nidaamiyayaasha uu u arko inay ku habboon yihiin ujeeddooyinka ama hirgelinta qodob kasta oo Sharcigan ka mid ah;
2) Bankiga Dhexe wuxuu ku jideynayaa Xeer-nidaamiyayaal-
   a) in la dejiyo qaab-dhismeedka iyo shuruudaha kale ee shati-siinta, hawlgalka, kormeerka iyo dardargelinta hawlaha ganacsi ee qayb kasta oo ka mid ah

hay'adaha maaliyadeed ee hoos yimaadda Sharcigan.

b) in la dejiyo foomamka codsiyada, shatiyada, oggolaanshaha, diiwaanka, ogeysiisyada, amarrada iyo dokumentiyada kale ee looga baahan yahay ujeeddooyinka Sharcigan;

c) in la qeexo xogta lagu bixinayo warbixinnada, soo celinta iyo dokumentiyada kale ee la keenay ama loo sameeyay ujeeddooyinka Sharcigan;

d) in uu qeexo khidmadaha iyo kharashaadka laga rabo inay bixiyaan hay'adaha maaliyadeed;

e) in uu jideeyo dembiyada iyo ciqaabaha ka dhasha ku xadgudubka Sharciga iyo Xeer-nidaamiyayaasha;

f) in la qaato halbeeg kasta oo caalami ah, mabaadi'da ama hababka ugu wanaagsan ee laga yaabo inay faa'iido u leeyihiin hay'adaha maaliyadeed ama nidaamka maaliyadeed;

g) in la caddeeyo arrin kasta oo aan si cad loogu qeexin Sharcigan balse lagama-maarmaanka u ah badbaadada, xasilloonida iyo wanaagga hay'adaha maaliyadda, nidaamka maaliyadeed ama danta guud.

h) Sababaha kale ee uu Bankiga Dhexe u arko inay ku habboon yihiin.

## Qodobka 143 aad:
## Qodobada dhaqangalka ku meel-gaarka ah

1) Shatiyada lagu bixiyay Sharciga Hay'adaha Maaliyadda (2012) ee dhaqan- galka ahaa ilaa taariikhda bilawga Sharcigan, way sii jiri doonaan waxaana loo qaadanayaa in lagu bixiyay Sharcigan.
2) Fal kasta, nidaamin iyo habraac kasta oo lagu sameeyay Sharciga Hay'adaha Maaliyadda 2012, wuxuu ahaanayaa mid ansax ah waxaana loo qaadan doonaa in lagu sameeyay Sharcigan.
3) Xuquuq kasta oo la bixiyay ama waajibka lagu soo rogay, si waafaqsan Sharciga Hay'adaha Maaliyadeed 2012, qof ama ka dhan ah qof waa inay sii ahaadaan dhaqan-gal si la mid ah in lagu bixiyay ama lagu soo rogay Sharcigan oo kale.
4) Codsi kasta oo hakad ku jira, si waafaqsan Sharciga la baabi'iyay, waxaa loo qaadanayaa in loo sameeyay si waafaqsan qodobbada Sharcigan, waxaana loogu

dhaqmayaa si waafaqsan Sharcigan.

5) Xuquuq kasta ama faa'iido kasta oo la helay ama mas'uulliyad ka ratibmatay, si waafaqsan Sharciga la baabi'iyay, waa inay u sii jirtaa si waafaqsan Sharcigan.
6) Amar kasta, ogeysiis ama tilmaamo la bixiyay ama la sameeyay oo dhaqan- gal ah, si waafaqsan sharciga la baabi'iyay waa in, haddii aysan waafaqsanayn Sharcigan, ay u sii ahaadaan dhaqan-gal ilaa inta looga noqonayo si waafaqsan Sharcigan.
7) Dhammaan Xeer-nidaamiyayaasha Bankiga Dhexe ee lagu soo saaray Sharciga Hay'adaha Maaliyadda 2012 oo dhaqan-gal ahaa ka hor inta aan la fulin Sharcigan, way sii jiri doonaan haddii aan dib loo eegin ama lagu beddelin Xeer-nidaamiyayaal lagu soo saaray Sharcigan.
8) Qodob kasta oo ka mid ah Xeer-nidaamiyayaasha dhaqan-galka ah ee lagu soo saaray Sharciga Hay'adaha Maaliyadda 2012 ee aan waafaqsanayn qodob kasta oo Sharcigan ka mid ah waa in loo fasiraa si waafaqsan qodobbada Sharcigan.

## Qodobka 144 aad:
## Baabi'in

Sharcigani wuxuu baabi'inayaa Sharciga Hay'adaha Maaliyadda ee 2012.

## Qodobka 145aad:
## Dhaqan-gal

Sharcigan wuxuu dhaqan-gelayaa markuu ansixiyo baarlamaanka Federaalka ah, Madaxweynaha JFS uu saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.